XHCP
XARUNTA HORUMARINTA CILMIBAARISTA PUNTLAND
PDRC
PUNTLAND DEVELOPMENT RESEARCH CENTER
(An Affiliated Local Organization to War-torn Societies Project International)

Tel. 252-545-4073/4 or 252-284-4255, email: PDRC @wsp-international.org

QORAAL QABYO AH

Xeer Guud,
Xeer Daaqsineed,
Xeer Xiji Iyo
Xeer Badeed.

"Waafajinta Xeer Soomaaliga Kuwa kale ee Shareecadda iyo Qaanuunka Wadciga ah"

Mashruuc Cilmi Baaris Loo Dhan Yahay

Waxa Qoray oo Fuliyey: **Xarunta Horumarinta Cilmibaarista Puntland (XHCP)**

Waxa Maalgeliyey: **DIAKONIA Sweden.**

August 2003

Erey bixin iyo Dhawaaq

1. Suugaanta kala duwan ee la xiriirta qaab-dhismeedka bulshada Soomaalida waxa loo adeegsaday ereyo kala duwan si loo sifeeyo qaybaha hiddo-raac ee Soomaalida. Darasaaddu waxa ay u adeegsaneysaa ereyada soo socda kooxeynta tolnimada sida hoos ku qoran:-

Beel (Clan) kooxeynta siyaasadeed ee tolnimada heer Harti

Qolo kooxeyn balllaran, sida Majeerteen, Dhulbahantee, iyo Warsangeli.

Jilib Mid ka mid ah qaybaha qoladda ee meel kuwada nool sida Dubeys, Naaleeye Axmed, Cumar Maxamuud, Cali Saleeban

Jifii heerka ugu hooseya xubinta siyaasadeed ee tolnimo ee si guud uu bixisa una qadata magta.

Reer, Qoys Xubinta ugu yar oo ka kooban Abaha, Hooyada, iyo Carruurta iyo kuwa nolol ahaan ku tiirsan ama la nool.

2. Qoraalka dhawaaqa higgaadda

Si loo qoro ereyada af-soomaliga ee daraasaddan, waxa la isku dayey in higgadda la qoro si loo ilaaliyo dhawaaqa asalka ah. Labanlaabka shaqalku waxa uu u taagan yahay shaqallada dhaadheer. Ku dhawaaqidda xarafka af-soomaliga iyo Carabiga ee “c” iyo “X” xoog ayaa loogu dhawaaqaa sida “A” da xooggan ama “H” xooggan.

Ingriisii	**Soomaali**
‘Urufu albahar, Ma’ad	Curuf albaxar, Macaad
‘Awaaji, Tarara ‘eyn	Cawaaji, Tararaceyn
‘Heer, ‘Heer beegti, ‘Hoobaali	Xeer, Xeer-beegti, Xoobaalli:
Yag’ar.	Yagcar.

1. HABRAACA CILMI BAARISTA.

Maamulka Puntland, ee la aasaasey 1dii Agoosto 1998 laguna abuuray shir ay u dhan yihiin beelaha degaan ku bahoobey Puntland ee Soomaaliya si ay u meel mariyaan maamul muddo 3 sano kala guur ah, waxa uu la kulmay dhibaatooyin aan laga gudbi karin. Waxa ay ahayd in dhidibka loo dhigo xukuumad Yagleel ah, meel aan wax ka jirin oo siddeed sano aaney ka jirin deggenaansho iyo sar-gooyo siyaasadeed toona. Xukuumadda cusub waxa loo igmadey in ay xoojiso nabadgelyada ka jirtey Puntland taas oo, illaa markii xukuumaddii M. S. Barre laga saaray dalka 1991, ay gacanta ku hayeen madax dhaqameedyo. Waxa kale oo loo igmadey in ay diyaariso sidii loo qaban lahaa doorashooyin xor iyo xaq-ba ah oo ay axsaab badani ku tartamaan. Maamulku waxa uu wajahay dhibta isu-keenidda iyo mideynta malleyshiyada badan ee hubeysnaa iyada oo aanu jirin sharci iyo kala danbeyn dawli ah. Maamulku waxa uu ku guuleystey in uu hubka ka dhigo maleyshiyada**,** kuna biirsho ciidamada dawladda, isaga oo dakhliga soo gala badankiis u goynayaa sugidda amniga. Waxase jirtey in maamulku aannu yeelan baaxad dhaqaale iyo tabo lagu soo celiyo sharciga iyo nidaamka, laguna xoojiyo hay'adaha asaasiga ee dawladeed.

Dadaalka maamuku u galey soo celinta hay'adaha sharci fulinta ayaa lagama maarmaan ka dhigey in la abbaaro dhaqangelinta saddexda nidaam sharci (Xeer dhaqameed, Shareecadda, iyo qaanuunka wadciga ah), kuwaas oo iska barbar shaqeynayey Puntland illaa 1991. Maamulku waxa u muuqatey in aan midna laga tegin maaddaama uu mid kasta nidaam lahaa qiimo taariikheed, dad ayidsanna ay ku sugnaayeen Puntland. Marka si dhab ah loo hadlo, saddexda nidaam sharci hal meel kama wada shaqeyn karaan maaddaama ay meelaha qaarkood iska burinayaan. Si xal loogu helo dhibaatadan adag, loona soo cesho nidaam sharci mideysan oo ku saleysan taarikhda iyo dhaqanka reer Puntland, maamulku waxa uu kaalmo weydiistey hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeeya gobolka (Puntland guud ahaan) si loo derso hababka la isu waafajin karo saddexda nidaam sharci.

Ka dib markii ay wada tashi la sameysey maamulka, UNDP waxa ay maalgelisey mashruuc lagu macaabo "Mashruuca Ilaalinta Bulshada Rayidka, (SCPP)", ujeeddada laga lahaana ay ahayd in la taakuleeyo abuuritaanka dawlad wanaagsan, dibna loo dhiso hay'adaha sharci fulineed ee Puntland iyo waliba Soomaaliya guud ahaan. Qayb ka mid ah Mashruuca Ilaalinta Bulshada Rayidka (SCPP) waxa loo jiheeyey daraasadda dabeecadaha saddexda hab sharci iyo sida Puntland looga dhaqmo xilliga kala guurka ah, iyo weliba suurtagalnimada iswaafajinta saddexdooda. Diakonia oo ah xubin hawl fuliye ka ah barnaamijka U.N.D.P/SCPP waxa ay ka codsatey Xarunta Horumarinta Cilmibaarista Puntland (XHCP) in ay sameyso daraasadda. Diakonia, oo ah hay'ad Swedish ah, waxa ay ka shaqeyneysey Puntland illaa 1994tii. DIAKONIA waxa ay maamulka Puntland ka taageertaa waxbarashada, guriyeynta, biyaha, dib u dhiska hay'adaha sharci fulinta, nabadgelyada iyo xoojinta xirfadaha shaqo ee dhowr ka mid ah ururrada degaanka iyo kuwa bushada.

XHCP waa hay'ad waddani ah, deggan caasimadda Garoowe, isla markaa waa hay'ad ka dambeysey, kana askuntey, hay'ad caalami ah oo lagu magacaabo WSP.

Barnaamijkan la magac baxay WSP waxa uu ka fulayey saddexda gobol ee Waqooyi Bari Soomaaliya (Waqooyiga Mudug, Nugaal iyo Bari) cilmi baaris ku saleysan wada hadal loo dhan yahay sannadihii 1997-1999. Ilaa iyo markii la asaasey bishii Oktoobar 1999, XHCP waxa ay fulisey dhowr mashruuc oo cilmi baaris ah iyada oo la kaashaneysa hay'adaha gargaarka ee ka hawlgala Puntland, gaar ahaan kuwa ku hawlan kabashada iyo dib u dhiska Puntland. XHCP waxa ay ku guuleysatey dhammeystirka daraasad 6 bilood qaadatey oo ku saabsaneyd "Is-waafajinta Xeer Dhaqaameedyada" bartamihii sannadkii 2001. Natiijada mashruucan cilmi baarista ah waxa la daabacey 2002, laguna magacaabey "*Cadaaladda Xoola dhaqaatada"* **-** Mashruuca Cilmi baarista loo dhan yahay kuna wajahan "Is-waafajinta Xeer Dhaqaameedyada, Shareecadda iyo Xeerka Wadciga ah." Waxa maalgelisey kharashka ku baxey soo saarista buuggan hay'adda la yiraahdo SIDA ee Sweden.

Iyada oo tixraaceysa talooyinkii ku qornaa daraasadda la daabacey, DIAKONIA mar labaad waxa qaandaraas siisey XHCP si ay u sii waddo hawsha daraasadda, una xaqiijiso sidii loo mideyn lahaa xeer dhaqaameedka. Waxa intaa dheer, wejiga labaad ee mashruuca waxa uu raadshey sidii uu xog dheeraad ah uga heli lahaa xeer dhaqameedka ku taxaluuqa dhaqan-dhaqaalaha xoolo dhaqatada, daraasad cusub-na uga sammeyn lahaa xeer dhaqameedka sida loogu dhaqmo waaxaha kale ee dhaqaale sida kalluumeysiga, iyo xijiga**.** Sidaa darteed, daraasaddan loo dhan yahay waxa ay soo bandhigtey natiijooyinka wejiga labaad ee mashruuca cilmi baarista ee ku wajahan is-waafajinta sharci dhaqaameedyada ee ay cilmi baaristii ka horaysey ku soo saartey wejigii kowaad ee mashruuca.

Xannibyada/Ku-talo-gal

In kasta oo xeer dhaqameedku muhimad weyn uu u leeyahay bulshada xoolo dhaqatada ah, haddana waxa la oran karaa ma aha mid qoran, waana kan loogu fahan yar yahay. Xeerka, oo ah mid aan qorneyn, facba faca xiga ayaa uu af-ahaan ugu gudbiyey. Xannibyada kale ee u bahaan in la tixgeliyo waa guur-guuridda joogtada ah ee bulshada Soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaan xoolo dhaqatada, oo ay darasaddan inta badan abbaareysey. Marka laga reebo abaarta soo wajahdey gobollada qaarkood, iyada oo ay weheliso degganaan la'aan siyaasadeed oo badanaa hakineysey socodka shaqada cilmi barista, haddana wakhtigii loo qorsheeyey xog ururinta, gorfeynta, qoraalka, iyo qorshaha shaqo guud ahaan waxa uu u fuley sidii loogu talagaley.

1.2 Habka ka-qayb-Qaadashada loo Dhan Yahay

Cilmi barista "Is-Waafajinta Xeer Dhaqameedyada Puntland" waxa lagu fuliyey hab loo dhan yahay, kaas oo isu keeney dhammaan dadkii ay khuseysey, meel dhex-dhexaad ah oo ay si xorriyad leh ugu wada hadli karaan kuna gaari karaan go'aanno ay u dhan yihiin. Kooxda Shaqada ee loo xulay arrintan ayaa si joogto ah u hageysey doodda. Ka hor, Agaasimaha XHCP, Mudane C/raxmaan Cabdalle Shuuke**,** waxa uu diyaariyey hawlgalka wejiga labaad ee mashruuca cilmi barista. Kadib xaruntu waxa ay qoratey isuduwaha Mashruuca, Mudane Cabdulqaadir Sh. Moxamoud, kaas oo xubin ka ahaa

kooxdii cilmi baarista ee wajiga koowaad ee hawshii baarista ee ku saabsaneyd “Is-Waafajinta Xeer Dhaqameedyada Puntland.’’ Intaa waxa dheer, saddex cilmi baare, oo ku cusub Habka Cilmi Baarista Loo Dhan Yahay, ayaa lagu soo kordhiyey. Kooxda cilmibaaristu waxa ay xushey Koox Shaqo ee Mashruuca (Project Working Group), kana kooban toddobo xubnood oo ka socdey gobollada, si ay u hogaamiyaan hawlaha cilmi baarista. Kulankoodii u horreeyey, koox hawleedku waxa ay dejiyeen marinka iyo geeddi socodka cilmi baarista. Si ay aad ugu muuqato, tixda “Mideynta Xeer Dhaqameedyada, Shareecadda iyo Xeerka Wadciga ah” waxa loo kala qaybiyey afar mawduuc-hoosaad oo kala ah:

1) Mideynta Xeer Dhaqameedyada
2) Diiwaangelinta Xeer Daaqsineedka
3) Diiwaangelinta Xeerka xijiyeysatada
4) Diiwaangelinta Xeer Badeedka (Curf Al-Baxar.)

Tan labaad kooxdu waxa ay baarista u dooratey, una adeegsatey, laba hab oo kala ah:-

1. Sahamin lagu sameyo gobollada Puntland,
2. Qabashada aqoon-is-weydaarsi loo dhan yahay oo ay ka qaybqaataan ka- qayb-galeyaasha iyo inta ay arrintu khuseyso oo ka kala socda gobollada Puntland oo dhan.

Tallaabada labaad waxa ay ahayd in loo tababaro cilmi baareyaasha cusub habka hawlgalka cilmi baarista loo dhan yahay (Participatory Action Research (PAR)) ee XHCP isticmaasho. Xaruntu waxa ay kiraysatey khabiir ka qayb qaatey cilmi baaristii (WSP) ee Puntland Sannadihii 1997-1999. Khabiirku waxa uu cilmi baareyaasha cusub u abaabuley tababar aqoon-is-weydaarsi todobo casho ah oo ku saabsanaa habka cilmi baarista loo dhan yahay (PAR). Tababarkaas kadib Kooxda Cilmibarista iyo Kooxda Shaqadu waxa ay soo saareen afar foom oo su’aal sideyaal ah (questionnaire forms); halkaas oo foom kasta khuseynayey hal mowduuc hoosaad.

Su’aal sideyaasha asalka ah hore ayaa loo tijaabiyey, laguna tijaabiyey hawl qaadatay labo maalmood oo lagu qabtey Garoowe, ayna ka soo qayb galeen kooxo metelayey dhammaan qaybaha bulshada. Sahamintan tijaabada ah, arrimaha soo socda ayaa tixgelin la siiyey: In su’aalaha ku jira su’aal sideyaashu noqdaan kuwo dhab ah, la xiriira hawsha, la aqbali karo, isla mar ahaantaana aan gef ku aheyn dhaqanka kuwa la wareysanayo. Hawshan horey loo tijaabiyey faa’ido weyn ayey yeelatey, waayo su’aalo badan ayaa dib loo wajahey, laguna sameeyey bed-bedilid, qaarkoodna dib ayaa loo dhisey halka qaar kalena dib loo habeeyey.

1.3 Sahanka

Hawsha sahaminta waxa ay qaadatey laba asbuuc. Kooxda Shaqada wadda iyo Kooxda Cilmi Baaristu waxa ay doorteen in ay isticmaalaan habka muunadda/sambalka ee hore loo qeexey. Gobollada daraasadda laga sameynayo iyo baaxadda muunaddaba waxa ay ahaayeen kuwo hore lo doortey. Baaxadda weyn ee bedka daraasaddu ka

hawlgeleysey, awoodda dhaqaale, carqaladda wakhtiga, iyo kacdoon siyaasadeed ee muddada sahanka jirey dartood, kooxda cilmibaarista iyo Kooxda Shaqadu waxa ay doorteen meelaha la gaari karo ee: Boosaaso oo ku taal xeebta Gacanka Cadmeed, waxa ayna soo mareen magaalooyinka iyo tuulooyinka kale ee Taageer, Baargaal, Binna, Handha, Hurdiya iyo magaalada Iskushuban ee Gobolka Bari; magaalooyinka Badhan iyo Dhahar ee Gobolka Sanaag; Eyl iyo Burtinle oo ka mid ah Gobolka Nugaal; magaalooyinka Gaalkacyo, Galdogob iyo tuulooyinka u dhow; magaalooyinka iyo tuulooyinka Xudun, Tukaraq, Sarmaanyo, Saaxdheer, Taleex, Boocame, iyo Xabaalo camare ee ka tirsan Gobolka Sool.

Sidoo kale, hawshan waxa loogu tala galay cabbirka muunadda 190 la wareysteyaal ah, oo loo kala qaybshey mawduuc hoosaadyada sidan: Mideynta Xeer Dhaqameedka - 90, cilmi baaris dheeraad ah oo ku saabsan xeerarka xoolo dhaqatada - 60, Xeerarka Xijiyeysatada - 20, iyo xeerarka badda (Curfal Baxar) – 20. Cabbirka sanbalada gobollada sida ay u kala horreeyaan ayaa loogu qoondeeyey. Dhammaadkii hawsha, 178 foom su'aal sideyaal laga soo jawaab baxshey ayaa soo xeroodey. Xalaadaha qaarkood, dood kooxeedyo ayaa la adeegsadey si la isu waafajiyo dhawr arrimood oo kuwa la wareystey ku kala ra'yi duwanaadeen. La wareysteyaashu waxa ay ka koobnaayeen odaayal, hoggamiyeyaasha dhaqanka, culimada diinta, kallumeysato, xijiyeeysato, ganacsatada xijiga iyo kooxaha haweenka ah.

Ujeeddada sahanku waxa ay ahayd in la buuxiyo faraqa u dhexeeya xeerka daaqsatada ee lagu habeeyey wejigii koowad ee mashruuca. Sidoo kale, waxa la raadinayey in xog looga doodo aqoon-is-weydaarsiga laga helo waaxaha dhaqaale ee xijiyeysatada oo aan ahayn daaqsatado iyo intifaacsiga kheyraadka badda. Hawshu waxa ay billaabatey 23kii Nofeembar, waxa ayna dhammaatey 7dii Diseembar 2001. Afar kooxood ayaa fuliyey hawshaas, halkaas oo ay koox kasta ka koobneyd Horjooge Cilmi baare ah iyo labo kaaliye. Koox weliba waxa ay sahamisey hal gobol, marka laga reebo hal koox oo isu martey gobollada Bari iyo Sanaag. Laga bilaabo asbuuci labaad ee Diseembar 2001 illaa dhammaadkii bisha, cilmi baarayaashu waxa ay isu duwayeen xogta laga soo ururiyey goobaha, iyada oo xog walba loo habeynayo ama la hoos geynayo mowduuca ay ka turjumeyso. Jawaabaha laga bixiyey su'aal sideyaasha waa la gorfeeyey iyada oo xoogga la saarey ansaxnimadooda, ku kalsoonaanta iyo isu ekaanshaha jawaabaha. Dhammaan jawaabaha waxa lagu keydiyey kombiyutar.

Intii lagu jirey sannadkii 2002, cilmi baareyaashu waxa ay natiijadii sahaminta ka soo saareen afar qoraal, mowduuc kastaba uu hal qoraal leeyahay. Bishii Febraayo 2002, kacdoonka siyaasadeed ee Puntland waxa uu gaarey heer adag, taas oo marar hakisey hawlaha cilmi barista. Bishii Maarso waxa lagu qaatey u soo bandhigista warbixino qabyo ah Kooxda Shaqada si ay ugu biiriyaan wixii talooyin iyo aqoon ah ee ay hayeen.

1.4 Aqoon-is-weydaarsiga

Asbuucii u horreeyey ee bisha April 2002, waxa kooxda cilmi baarista iyo kooxda shaqadu u kulmeen ka baaraandegga gunaanadka hawlaha cilmi baarista, isla markaana diyaariyeen warqad-doodeed, iyaga oo xuley ka qaybgalayaasha aqoon-is-

weydaarsiga soo socdey. Aqoon- is-weydaarsiga waxa lagu qabtey magaalada Burtinle (Gobolka Nugaal) 22, 23, iyo 24kii Aprill 2002, iyada oo la isu keeney 41 xubnood xul ah, kana kala socdey wakiillada kooxaha kala duwan ee bulshada - hoggaamiye dhaqameedyada, culimada diinta, wakiillada beelaha kalluumeysta ah, bulshada xoola dhaqatada ah, ganacsatada badda, Amiirrada xeerka badda, kooxaha haweenka, xijiyeysato iyo milkiileyaal, saraakiil ka socda maamul Goboleedka Puntland iyo wakiillo deeq-bixiyeyaal ah. Ka-qayb-galeyaasha Bariga Sanaag uma ayan suurogelin in ay yimaadaan aqoon-is-weydaarsiga jawi siyaasadeed oo kacsan waqtigaas awgeed. Maalmihii ka harsanaa bisha April cilmi baareyaashu waxa ay ururiyeen nuxurkii ka soo baxay aqoon-is-weydaarsiga.

Si loo dhameystiro natiijadii cilmi baarista, aqoon-is-weydaarsigii labaad waxa la qabtey Nofeembar 2002, waxa uu ku saabsanaa “Habraaca Xeerka” ay xeerbeegtida beeshu raacdo marka ay xallinayaan dacwadaha guud iyo kuwa gaarka ah. Qaybtan cilmi baaristu waxa ay xoogga saartey helitaanka qaababka iyo hababka ka soo jeeda maxkamadaha xeerka iyo xeerbeegtida, sida looga dhaqmo gobollada Puntland dhammaantood in kasta oo ay jirto kala duwanaansho degaan.

Si loo fududeeyo, waxa dukumiintiga cilmi baarista loo kala qaybiyey lix qaybood oo waaweyn:

1. Qaybta 1aad:Hordhac iyo gogol-dhig,
2. Qaybta 2aad: Xeer Dhaqameedka Daaqsatada
3. Qaybta 3aad: Xeer Dhaqameedka Xijiga,
4. Qaybta 4aad: Xeer Dhaqameedka Badda
5. Qaybta 5aad: Habraaca Xeerka
6. Qaybta 6aad: Lifaaqyo – qoraallo dhammeystiraya cilmi baarista.

1.5 Xeer Dhaqameedka

Ka hor inta aaney xoogaggii gumeysiga ee Talyaaniga iyo Ingiriisku qabsan Soomaliya qarnigii 19aad dabayaaqadiisii, bulshada Soomaaliyeed waxa ay ku dhaqmi jirtey labo nidaam sharci oo iska barbar shaqeeya, kuwaas oo kala ah: xeer dhaqameedka Soomaalida iyo Shareecadda Islaamka. Xoogagga gumeysigu waxa ay la yimaadeen nidaam sharci saddexaad, kaas oo ah Qaanuunka Wadciga ah oo yareeyey isticmaalka sharcidhaqamyadii meelaha magaalooyinka ah. Muddadii ka dambeysey madaxbannaanida, Qaanuunka Wadciga ahi waa ka shaqeynayey waddanka. Si kastaba ha ahaatee, Shareecadda iyo Xeer dhaqameedku iyaguna waa shaqeynayeen muddooyinkaas oo dhan, iyaga oo ahaa nidaamyada sharci ee ugu waaweyn ee ay ku dhaqmaan bulshooyinka xoolo dhaqatada iyo kuwa beeraleyda ahi, kuwaas oo ah tirada ugu badan dadka ku nool waddanka. Markii ay burbureen, oo kala daadateen hay’adihii dawladda dhexe, laga soo bilaabo 1991kii, Puntland iyo gobollada kale ee Soomaaliya waxa ka suulley Qaanuunkii Wadciga ahaa. Taasi waxa ay fursad siisay Shareecadda iyo Xeer Dhaqameedka oo iyagu beddeley Qaanuunkii Wadciga ahaa ee ka jirey magaalooyinka iyo gobollada Soomaaliya.

Marka taariikhda la eego, Soomaalidu waa xoolo dhaqato illaa maanta, waxana muuqata in aqlabiyadda Soomaalidu weli ku dhaqmaan hab nololeedka dhaqashada xoolaha. Muddadaas boqollaalka sano dhan, xoolo dhaqatada Puntland iyo bulshooyinka beeraleyda ah ee gobollada kale waxa ay sameysteen sharciyo gaar u ah oo ay isku xukumaan oo loo yaqaan “Xeer”, kaas oo saldhig u ah nolosha bulshada iyo dhaqaaleheeda, abuura xiriirro dhaqan-dhaqaale, isla markaana xal u noqda khilaafaadka. Ka- qayb-galeyaasha iyo kuwa la wareystey muddadii sahaminta, dhammaan, waxa ay aqoonsadeen in xeerku yahay hay’ad sharci gaar u leh maareynta dhinacyada kala duwan ee bulshada, maareynta iyo wadaagga kheyraadka sida daaqa, dhuldaaqeenka, keymaha, biyaha iyo goobaha biyaha; kalluumeysiga, Badmaaxidda, ganacsiga badda iyo xijiyeysiga .

Si kastaba ha ahaatee, suugaanta ku lug leh xeer dhaqanka Soomaalidu waa kooban tahay waxana laga yaabaa in hay’adaha cilmi baarista iyo baareyaashuba aanay dareemin baahida loo qaabey illaa muddo dhawaan ahayd. Halka hawlaha ay qabteen culimada ay ka mid yihiin Ferrandi, Cerulli, I. M. Cassanelli,I. M. Lewis, iyo ilo kale oo la tixraaco ay tafsiir fiican ka bixiyeen mawduucan, haddana ma jiraan dokumeentiyo gaar ah ama isku waafaqsan qaabka kala qaybinta xeer dhaqaameedka. Sucaad Ibrahim Cabdi buuggeeda lagu magaacabo “Raadka Dagaalka Sokeeye ku yeeshey Qoyska”, waxa ay u kala qaybisey xeerka laba qaybood: - qodobbo guud oo sida xuquuqda shakhsiga iyo waajibaadka iyo qaybsiga kheyraadka dabiiciga, iyo qodobo xeer oo cayiman oo lagu dabakho xallinta khilaafaadka ku lug leh dembiyada waaweyn sida dilka, dhaawaca iyo kufsiga, iyo xeer dhaqanka la tacaala xatooyada, burcadnimada, iyo arrimaha la xiriira qoyska.

Iyada oo tixgelin iyo maamuus siineysa kala qaybinta sare ku qeexan, haddana daraasaddani waxa ay xeerka u kala qaybineysaa: -

(b) Xeer guud oo ay wadaagto bulshada ku kala duwan duruufaha nolosha iyo kuwa dhaqaale-ba, kuwaaas oo waajib ka dhiga is-kaashiga xubnaha tolka iyo xallinta khilaafaadka ay ka mid yihiin diyada, kufsiga, iwm. Haddaba, Daraasaddani waxa ay eegeysaa oo keli ah suurtagalnimada beddelka xeerarka ku jira katigorigan ee aan waafaqsaneyn Shareecadda iyo Qawaaniinta caalamiga ahi laguna suuradiyey wejiga kowaad ee cilmi baarista, t) Xeerar mihnadeed xiriir ahaan la gaar yeelay (xeer gaar ah oo nidaaminaya xiriirada dhaqan-dhaqaale) oo marka Puntland laga hadlo ka kooban (i) Xeer daaq oo khuseeya “milkiiyadda”, isticmaalka iyo maamulka kheyraadka asaasiga ah sida daaqa, dhul daaqsineedka, biyaha, iyo goobaha biyaha, (ii) Xeerka Badda oo loo yaqaan curfAlbaxri oo nidaamiya kalluumeysiga iyo maareynta kheyraadka badda, badmaaridda, ganacsiga badda, iyo (iii) Xeerarka xijiga ee qeexaya habka ka faa’ideysiga xijiga.

Dadka la wareystey iyo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-waydaarsigu waa ay isku waafaqeen aqoonsiga waxtarka uu xeer dhaqameedku u leeyahay Soomaalida gaar ahaan bulshada xoola dhaqatada ah. Si kastaba ha ahaatee, fikradahoodu waxa ay ku kala duwanaayeen dhinaca askunka xeerka iyo sababta ay bulshada xoola dhaqatadu ugu janjeerto, ugana door biddo, xeerka dhaqamiga ah ee aan qorneyn kuwa kale ee

qoran. Marka laga hadlo askunka xeerka, dadka badankood waxa ay ku adkeysteen in odayaasha beeshu yihiin kuwa uu xeerku ka askunmey, oo ay iyagu xeerka u yihiin ilaaliyaal sare. Odayaal dhaqameedka ayaa ah kuwa dhaqan geliya xeerka, isla markaana u soo saara xaaladaha cusub qawaaniin cusub marka la waayo kuwo hore u jirey . Aragti tiro yar oo kuwa sahanka lagu wareysatey iyo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-waydaarsiga ah waxa ay diidey fikradda ah in odayaashu yihiin asaaska “xeerka”, bedelkeeda waxa ay ku doodeen in Shareecaddu saldhiga u tahay xeerka.

Intii lagu jirey cilmi barista, saddex ra’yi ayaa ka soo baxey sababta ay xoolo dhaqatadu u taageerto xeerka. Qaar waxa ay ku doodeen in xeer dhaqaameedku ku haboon yahay degaanka xoolo dhaqatada, xeer dhaqameedkuna badankiis yahay mid isla bed-beddeli kara xaaladaha xoolodhaqatada. Xoolo-dhaqatada xeerku waxa uu u yahay aalad ay u adeegsadaan xal u helidda iska-hor-imaadyada, waayo dadka garsoorka qaadaya ama xeerbeegtidu waa dad degaanka laga heli karo, marka loo eego labada nidaam sharci ee kale. Waxa intaa weheliya, xeerarka qorani waa ay isbebeddel yar yihiin marka la eego dhinaca xukunka dacwadaha, halka xukunnada xeerku ay badanaa ka debecsan yihiin, kana is rog-rog badan yihiin. Sababtuna waxa ay tahay xeerka oo in badan ku saleysan sulux iyo is-waafaqidda labada dhinac ee is-khilaafsan, halka Shareecadda iyo xeerka Wadcigu ay badanaa gooyaan xukunno aan wecwecan, una baahan yihiin hay’ado fulin sharci oo awood u leh in ay meel mariyaan amarrada maxkamadda.

Dad kale waxa ay iyaguna qabeen fikradda ah in Soomaalidu uga door biddo xeer dhaqameedka sharciyada kale, iyada oo xeerku ku saleysan yahay dhaqankooda. Waxa kale oo ay sheegeen in xeerku u yahay hab-bulsheedka qabiilka aalad u muhiimad badan, door weynna ka qaadata midnimada, iyo siyaasadda tolka, isaga oo xukuma wada bixinta iyo wada qaadashada diyada. Halkan, xigtadu waxa ay doorataa xeerka maaddaama aaney dooneyn in lagu fuliyo xukunka dilka (naf goynta) ee ay xeerarka Shareecadda iyo Wadcigu u gooyaan kuwa bareeraha dad u diley, waayo ruuxa labka ahi waxa uu lagama maarmaan u yahay kororka tirada qabiilka iyo waliba cududda difaac. Maahmaahdan Soomaaliyeed ayaa arrintan dhabteeda sheegeysa “*xukun shareeco oo lagu kala go’o waxa dhaama maslaxad lagu heshiiyey*.”

Aragti saddexaad waxa ay qabtaa in xeerku yahay dhaqan dhaxal-gal ah qoto dheer oo aan Soomaalidu si fudud u tuuri karin. Marka ay muujinayaan muhimmadda dhaqanka, Soomaalidu waxa ay tiraahdaa “*Caado la Gooyaa Caro alle aey leedahay*.” Taariikhdeedu sida ay u badan tahay, Soomaalidu waxa ay ku dhaqmi jirtey xeer, dhif beyna u hogaansami jirtey nidaamyada sharciga ee rasmi ahaan loo qaabeeyay. Waxa ay ku dhaqmeen nidaam sharci si rasmi ah u qaabeysan xilligii gumeysiga iyo muddadii koobneyd ee ka dambeysey ee xoriyadda oo marka la isku daro in yar ka badan 100 sano.

Natiijada daraasaddani waxa ay saldhig u noqoneysaa baaris dheeraad ah oo lagu sameeyo xeer dhaqameedka Puntland ama guud ahaan xeer dhaqameedka Soomaalida. La mideynta xeerka kuwa rasmiga ah ka sokow, daraasaddu waxa ay raadisey asalka xeer dhaqameedka. Waxa ay diiwaangelisey sagaashan xeer oo ay ku dhaqmaan qaybo kala duwan ee bulshada iyo weliba waaxo dhaqaale. Haddana, liiskan

looma qaadan karo mid dhammeystiran. Xeer dhaqameedka ay ku dhaqmaan bulshooyinka beeraleydu kuma jiraan daraasaddan, oo waxa uu u baahan yahay hawl ballaaran oo laga fuliyo gobollada Soomaaliya oo dhan.

Cilmi baaristu waxa kale oo ay shaacisey in xeer dhaqameedku yahay aalad muhiimmad weyn u leh maareynta iyo xallinta khilaafaadka ka dhexeeya beelaha, jifooyinka iyo arrimaha qoyska. Maqnaanshaha ciidan fuliya xukunka, awood dhexe, hay'ado sixitaan (xabsiyo) iyo nidaam ka-hortaaga dembiyada, ayaa xukunka xeerka ka dhiga mid ku saleysan isla oggolaanshaha dhinacyada is-haya, xukunkiisa mid is rog roga oo aan lahayn nidaam qormeysan rasmi ah. Xukunnada uu soo saaro xeerku inta badan waa kuwo ganaaxyo fudud u badan sida: gawraca awrka gurgur, cambaareyn moraaleed, bixinta xaal la siiyo qolada dembiga laga galey ama bixinta mag marki ay dhacaan xaalado dil ahi.

1.6 Gebagebanta Dukumentiga Cilmi baarista

Bishii June, xiriiriyaha mashruucu waxa uu mideeyey natiijooyinkii sahanka iyo aqoon-is-weydaarsiga si loo dhammeystiro qoraalka dukumentiga cilmi baarista oo loo soo bandhigo Kooxda Shaqada. Kulankoodii u dambeeyey kooxdu waxa akhridey, ansixiseyna qoraalkii qabyada ahaa ee dukumeentiga. Bishihii Juunyo iyo Luuliyo ee 2002, Agaasimaha XHCP waxa uu gebagebeeyey naqtiimeyna qoraalkan ugu dambeeya.

2.1 HORDHAC IYO GOGOLDHIG.

Isku-deyga in xeerka loo habeeyo sidii nidaam sharci rasmi ah ma aha wax cusub, waana arrin soo jirtey illa iyo 1960kii waayihii maamulka rayidka ah. Dawladdii Max'ed Ibrahim Cigaal (1967-1969) waxa ay, markii u horreysey, u dhaqaaqdey hawshan. 1968dii, dawladdu waxa ay abuurtey "Golaha La Tashiga Qaranka" oo xubnaheedu ka kala yimaadeen gobollada iyo degmooyinka dalka oo dhan, kana koobnaayeen hoggaamiyeyaal dhaqaameed iyo aqoonyahanno kale si ay ugala taliyaan dawladda arrimaha dastuurka iyo dhaqangelinta sharciyada, gaar ahaan xeer dhaqaameedka.

Golaha La Tashigu waxa uu ku shiray Muqdisho Ogoosto 1968dii, halkaas oo dawladdu ku soo bandhigtey dhowr arrimood oo ay ka mid tahay warqad doodeed ku saabsaneyd la mideynta xeer dhaqameedka xeerarka kale iyo ka tegidda qodobadda xeerka ee aan wakhtiga la socon karin, gaar ahaan masuuliyadda guud ee dembiyada iyo wada bixinta diyada. Goluhu waxa uu ku taliyey in la baabi'iyo masuuliyadda guud ee dembiyada iyo in la fuliyo xukunnada dilka ee ay geystaan gacan ku dhiigleyaasha bareer wax u dila. Si kastaba ha ahaatee, in yar ka dib waxa dhacey Inqilaabkii Maxamed Siyaad Barre, dhacdooyinkii ku xigeyna waxa ay hareyeen hal-abuurkaas billowga ahaa. Muddo ka dib dawladdii militiriga ahayd iyaduna waxa soo jeedisey arrintaas, hase yeeshe isku deygaasi ma noqon mid sii jira.

Sannadki 2001, Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista ee Puntland (XHPC) waxa ay wajahdey mowduuca. Wejiga koowad ee cilmi baarista ku saabsan "Is-waafajinta Xeerar Dhaqammeedyad Soomaalida" waxa lagu soo daabacey buugga magaciisu yahay "Caadaladda Xoolo Dhaqatada, 2002", arrimaha uu ku gorfeynayey waxa ka mid ahaa aqoonsiga xeerarka dhaqan ee hadda caada ahaan la isticmaalo iyo is bar-bardhigga nidaanyadaas sharci. Daraasaddu waxa ay caddeysey in badan oo xeer Soomaaliga ahi in ay ka hor imaanayaan qawaaniinta kale ee Shareecadda iyo kan Wadciga ah.

Daraasaddani waxa ay raadineysaa in ay hesho suurtagalnimada suullinta xeerarka, sida qaybsiga magta, kufsiga, guurka khasabka iyo duudsiga xuquuqda dhaxalka ee haweenka ee ka jira bulshooyingka qaarkood, ee aan la jaan-qaadi karin hababka caalamiga ah iyo xuquuqda asaasiga ah ee aadanaha. Waxa ay hageysaa dood la gorfeyneysa matalayaasha bulshada reer Puntland, fursadaha ka bannaan mideynta xeerarka.

2.2 Xeerka "Masuuliyadda Guud Ee Dembiyada"

Xeerku waxa uu ku qiimeeyaa Diyada labka 100 neef oo geel ah, halka kan dheddiggu yahay 50. Lama garanayo halka uu ka yimid asal ahaan qiimaha boqolka geela ah ee Diyadu. Waxa jira mala'awaallo iyo tarjumaado dhowr ah. Waxa dhici karta in isha ugu dhow laga soo qaatey dhaqankii Carbeed ee Diinta Islaamka ka hor oo ay Shareecaddu qaadatey. Sida ay qisadu sheegeyso, Ibnu Hishaam ayaa ka weriyey Ibnu Is-xaaq halka qiimaha Diyada ee geela 100ka ahi ka soo jeedo:

Horraantii qarnigii 6aad DHKD, Md. Cabdul Mudhalib, oo ahaa Nebi Moxameed awoowgiis (NNKA) waxa uu ahaa hoggaamiye la xurmeeyo oo ka dhashey jilibka ugu sareeya qabiilka Quraysh ee xukumi jirey Makka, xarunta ay musliiminta hadda Xajka u tagaan ee ku taal dalka Sacuudiga. Waxa uu ahaa ilaaliyaha Kacbada, Guriga Eebbe ee ku yaal Makka. Ka dib markii uu qodey isha biyaha barakeysan ee caanka ah, loona yaqaan ZamZam, Cabdul Mudhalib waxa uu ku dhaartey oo nidar ku galey haddii eebbe ugu deeqo 10 wiil, fursadna uu siiyo in uu noolaaado illaa inta ay ka qaan-gaarayaan, in uu u huri doono, kuna gawrici doono, mid ka mid wiilashiisa Kacbada Ilaahay gudaheeda.

Ilaahay waa ka aqbaley baryadaas, waxa uuna siiyey toban wiil, kuwaas oo qaan-gaarey isaga oo nool. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu u yeeray wiilashiisa, waxa uuna u sheegay in uu Ilaahay ballan la galey. Waxa ay kula taliyeen in uu fuliyo ballanta Eebbe. Si haddaba uu u xulo wiilka uu hurayo, waxa uu wiilashii mid kasta magaaciisa ku qorey qori yar, waxa uuna hortubey sanamkii uu jeclaa ee Hubal oo yaalley Kacbada. Qurayshtu waxa ay u carari jireen sanammadooda Kacbada iyaga oo ka doona kaalmo mar kasta oo ay noloshu ciriiri ku noqoto, kuwaas oo ay rumeysnaayeen in ay yihiin wakiillada Eebbe u gudbiya codsiyadooda ama u raadsha naxaris, waxa kale oo Qureyshii ka dooni jirtey sanammadaas fasiraadda asbaabaha dhacdooyinka iyo waqcadaha ama xukunnada khilaafadka ee la soo dersa. Cabdul Mudalib waxa uu hor keeney tobankiisii will sanamkii Hubal, waxa uu-na Wakiilka sanamka (faaliye) u sharxay ujeeddadiisa. Waxa uu u dhiibey faaliyihii sanamka tobankii qori oo ay ku qornaayeen magacyada wiilaashiisa, isaga oo ka dalbey faaliyuhu in uu u qori tuuro.

Faaliyihii markii uu qori tuurey, qorigii waxa uu ku dhacey wiilkii ugu yaraa, Cabdullahi oo aabihii ugu jeclaa wiilasha. Cabdull Mudhalib waxa uu la soo baxey toorrey, isaga oo dareenkiisu aad u beddelan yahay ayaa uuna u dhaqaaqey gowraca wiilka si u fuliyo ballankii Eebbe. Si kastaba ha ahaate, waxa ka hortimid xigtadiisa reer Qureysh. Diidmadii ugu xooganeyd waxa ay ka timid shakhsiyad caab ahayd, aadna u xoolo badneyd, waa ninka la yiraah: Muqiira Ibnu Cabdullahi Ibnu Cumar Ibnu Makhzuum, oo ahaa qolada wiilka abtiga u ah, ninkaas oo ku dhaartey in aanu oggolaaneyn gawraca Cabdullahi illaa xeelad kasta oo kale dhammaato, haddii loo baahdana hantidiisa oo dhan uu ku furanayo /beddelanayo wiilka uu abtiga u yahay. Ugu dambeyntii, guurtidii Qureysh waxa ay kula taliyeen aabahii wiilka in uu talo ka doono naag faaliso ah, oo deggan Madiina, si ay u keento xal maangal ah. Ka dib markii ay la tashatey rooxaanteedii, naagtii waxa ay Cabdull Mudhalib weydiisey inta ay diyada ninka le'g tahay degaanka uu ku nool yahay. Waxa uu ugu jaawaabtay "10 geel ah", kadib waxa ay ku amartey in uu ku noqdo degaankiisa, una qori tuuro Cabdullahii iyo 10 geel ah. Haddii uu ku dhaco wiilka, in uu ku daro 10 geel kale ah, sidaana ku wado illaa uu qorigu ku dhaco geela. Marka qorigu ku dhaco geela, Ilaahay waxa uu aqbaley in tiradaas geela ah lagu beddelo wiilka.

Markii uu ku noqdey Makka, Cabdul Mudhalib waxa uu hor keeney wiilkii iyo geelisii oo dhan (waxa uu lahaa geel badan) sanamkii Hubal, waxana uu billaabey qorituur. Samiigi waxa uu sii joogta ah ugu dhaceyey wiilka, waxa uuna joogteeyey in uu mar kasta ku daro toban geel ah. Goortii ay tirada geelu gartey 100, samiigi waxa uu ku dhacey, markii ugu horreysey, geela. Si uu u xaqiijiyo raallinnimada Eebbe, Cabdi Mudalib waxa

uu ku cel-celiyey qori tuurkii saddex jeer oo mar walba qori-tuurku ku dhacay geela, marka tiradiisu gaarto 100. Isaga oo si buuxda u qanacsan ayaa uu Cabdul Mudalib si dhakhso badan u gawracey boqolkii geela ahaa guriga eebbe ee Kabcada hortiisa. Maalintaas wixii ka dambeyey, Qureyshi waxa ay u qaadatey qiimaha diyada shakhsiga labka 100 geel ah. Dhaqankaan, sida heshiisyo badan oo kale, waxa lagu darey Shareecadda Islaamka. Waxa laga yaabaa diyada boqolka geela ah in Islaamku keenay Soomaaliya, kuna fiddey qarniyaal hore illaa ay wada gaartey gobollada Soomaaliya oo dhan.

Jawaab bixiyeyaasha sahaminta iyo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa ay caddeeyeen in xeerku u aqoonsan yahay dembiga uu shakhsi galo masuuliyadda guud ee dhamaan kooxda magta la bixisa. Xeerka diyadu waxa uu waajib kaga dhigaa kooxda in ay si guud u qaadato una bixiso diyada. Waxa laga yaabaa in caqliyaddaasi ka timid xaqiiqada ah qoyska reer miyiga ah oo sabool ah, isaga oo ku nool maqada ma dhergaan , lahaynna xoolo keligiis uu ku baxsho mag haddii xubin qoyska ka mid ahi dil geysato.

Teeda kale, inta badan waxa dhacda in xubnaha qoyska dembiiluhu aaney aqbalin xukun dil (naf goyn) ah. Iyada oo aan la eegeyn culeyska dembiga, mabda'a qabiilku waa in ay xubnaha magwaagta ahi badbaadiyaan xubinta iyaga ah ee dembiga gashey, waayo waxa qofkaasi uu tarminayaa jifida iyo inta diyada wada bixisa – baaxadda qoyska iyo xoogga jifida ayaa dhextaal u ah isu-dheelitirka qabiillada iyo sumcadda bahda, taas oo iyadu ballanqaadda jiritaanka jifida iyo iska difaaca kooxaha kale ee lidka ku ah

Sida badan, xeerka diyadu waxa uu difaacaa dembiileyaasha. Tani waxa ay tilmaameysaa diyada iyo wadaagga guud ee masuuliyadda dembiyada ay geystaan xubnaha qabiilku in aaney waxtar lahayn, ayna u badan tahay in ay dhiiri-geliso soo noq-noqodka iyo kororka falalka dembiyada culus. Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsiga iyo kuwa la wareystey waa ku kala duwanaayeen habka diyo-bixinta. Inta badan dadku waxa ay sheegeen in diyada loo bixiyo caynad ahaan, sida geela, haddii uu dilku yahay mid horey loo qorsheeyey iyo haddii kale-ba. Ka-qayb-galeyaasha ka socdey gobollada Sool iyo Sanaag iyo degaanka Buuhoodle waxa ay qabeen ra'yigan. Halka gobollada Bari, Nugaal iyo Waqooyiga Mudug sheegeen in xalka diyada loo kala saaro labo: I)Marka dilku ula kac yahay, diyada waxa badanaa lagu baxshaa geel, laakiin, II)Xalaadaha kale Diyada waxa lagu baxshaa naqad ama hanti iskujir ah, sida geel iyo lacag. Markii ka-qayb-galeyaasha iyo kuwa la wareystey la weydiiyey siyaabaha kooxi ku noqoto mid keligeed magta la baxda, waxa ay ku jawaabeen aragtiyadan kala duwan: dadka badankood waxa ay la ahayd in arrintaasi ku xiran tahay xoogga iyo baaxadda reerka – goorta tirada labka reerku kordho (Qoora-tiris), reerku waxa uu u sii janjeersamaa in uu noqdo koox diyada keligeed bixisa oo xor ah. Yeelashada hantida aeyaduna noqota qodob muhiimad leh oo mararka qaarkood keenta in koox aan tiro badan aheyni noqoto mid iskeed magta isaga bixisa. Run ahaantii, la iskuma waafaqin tiro go'an ee koox ka dhigi karta kuwo isku filan oo diyada si madaxbannaan isaga biixiya. Fikaraduhu waxa ay u dhexeeyeen boqol illaa kun rag ah ama qoys.

Ra'yi dad tira yari qabeen waxa uu ahaa in kooxi ka go'do xubnaha ay magwadaagta yihiin, oo noqoto mid magteeda iskeed isaga bixisa, marka bahweynta ay magwadaagta yihiin ay ka tirsadaan ku xad gudub xeerka wadaagga iyo bixinta diyada. Tani waxa ay ka soo jeeddaa xaaladaha qaarkood –waa marka qayb cudud weyn ah oo ka mid ah magwadaagta diiddo in ay diyada la bixiso ama la qaybsato diyo soo gashey inta kale ee la mag wadaagta ah. Ra'yi saddexaad ayaa isna sheegey in bahi noqto mid iskeed u madaxbanaan, marka ay yeelato xoolo ku filan, oo sida caadiga ah geel ah. Soo jeedintii baabi'inta xeerarka lidka ku ah Shareecadda iyo Wadciga waxa ay ka dhex abuurtey dood kulul oo xiiso leh ka-qayb-galeyaasha iyo kuwa la wareysanayey. Si kastaba ha ahaatee, waxa ay dhammaan isku raaceen in diyadu sideedaba aaney ahayn ciqaab maxkamadi xukuntey (penal verdict) ee ay tahay magdhow dhib la geystey. Waxa ay tilmaameen cadaalad- darada la xiriirta xeerka noocan ah, qaarkoodna waxa ay ku sifeeyeen caalamad madow oo ku taal xeer dhaqameedka wanaagsan ee Soomaalida. Waxa ay ku calaacaleen in xeerkan diyadu si fog dhidibada ugu aastey dhaqaanka siyaasadeed ee Soomaalida ee ku saleysan qabiilka laguna soo dhaqmaey illaa iyo boqollaal sano.

Burburka dawladdii Soomaaliyeed, kala dambeyn la'aantii xigtey iyo maqnaanshaha sharci waxa ay fududeeyeen koror dilka dadka ah. Dadka reer Punland ayaa la sheegay in ay si weyn uga xanuunsadeen bixinta is-daba joogga ah ee diyada. Tani waxa ay abuurtey cadaalad darro iyo kacdoon bulsho oo ka yimid ku dhaqanka badan ee xeerkan, kaas oo ku saleysan mas'uuliyadda dembiga oo loo nisbeeyo guud ahaan bahda uu dembiiluhu ka dhashey. Masuuliyadda guud darteed, shakhsiyaad aan dembi lahayn ayaa loo diley aano ka soo jeedda dil ay xubno kale ee bahdooda ahi geysteen. Hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo culimada diintu waxa ay sheegeen in xeerka diyadu masuul ka yahay in aan gashiga dhiigga si sinnaan ah loo bixin, loona qaybin si cadaalad ah. Tusaale ahaan, qoyska qofku ka dhintey (marxuumka) wax yar ayaa uu ka helaa diyada la keeney. Qoyska agoomoobey ee diyada leh, sida Shareecadda iyo Qaanuunka Wadcigu qabaan, 11 neef ayaa uu ka helaa 100ka geela ah, qaybta weyn ee diyada (90%) waxa qaybsada xubnaha diyada wadabixiya ee kale. Sida habkani tilmaamayo, hooyada ama haweeneyda laga diley wiilkeedii ama ninkeedii saami kuma laha diyada, xuquuqna bahda kuma ay laha maaddaama aaney ka qayb qaadan bixinta iyo qaadashada magta labada dhinac midna.

Bixinta diyadu kuma koobna degaanka baadiyaha oo keli ah, ee waxa ay gaarsiisan tahay xigtada ku nool magaalooyinka. Waxa ay xitaa gaartey Soomaalida qurbaha ku nool, oo ay waajib ku noqotey in ay lacag diyo lagu baxsho u soo diraan eheladooda waddanka ku sugan. Waayahan, waxa la is weydiiyaa in caruurta Soomaalida ee ku nool qurbuhu mustaqbalka oggolaan doonaan wax ka baxinta diyada marka ay ku koraan degaan iyo dhaqan ka fog koodii**.**

Kooxda isbeddel doonka ah uma muuqan wax dhib ah oo hortaagan geeddi socodka suullinta xeerka wadaagga magta. Waxase jirta in, qaar ka mid ah ka-qayb-galeyaasha iyo dadkii lagu wareystey daraasaddu, ay ka biyo-diideen aragtidan, kana gaabsadeen habka loo tirtiri karo ku-dhaqanka xeerka diyada. Kooxdan dambe waxa ay ku saleysey dooddeeda waayoaragnimaddii dawladdihii hore. Sannadkii 1971dii, xukumaddii

militeriga ahayd waxa ay soo saartey sharci mamnuucaya mas'uuliyadda guud ee dembiyada. Sharciga cusubi waxa uu dhaqan gal ahaa sannadihii u dhexeeyey 1971 iyo 1974. Muddadaas, shan qofood keli ah, oo ay hal dumar tahay, ayaa loo diley fal dil ah oo ay geysteen. Hase yeeshee, dadweynuhu si aad ah ayaa uu uga hor yimid sharcigaas, si buuxdana sharciga miyiga loogama dhaqangelin. Taasi waxa ay ku khasabtey dawladda in ay sharcigaas baabi'iso sannadkii 1974tii. Ugu dambeyntii, awooddii dawladda oo sii liicaysey awgeed, xeerkii magwadaaggu dib ayaa uu u soo noolaadey, awoodna u yeeshey.

Dood dheer kadib, waxa la isku af-gartey in isku deyga baabi'inta xeerka wadaagga diyadu yahay mid tijaabo ah, ahna qodob muhiimad weyn leh marka laga hadlayo wax ka beddelidda xeerka. Taas waxa loola jeedaa, haddii lagu guuleysto suulinta xeerka diyada, oo ah mid aad ugu xidideystey dhaqanka Somaalida, sidaa oo kale waxa suuroobaya in la tirtiro xeerar kale oo uu ka mid yahay kan 'Kufsiga'. Waxase jirtey in qaar ka mid ah ka-qayb-galeyaashu shaki ka muujiyeen in tallaabadan la qaadi karo waqtigan xaadirka ah marka la eego jiritaan la'aanta dawlad dhexe ee Soomaliyeed. Shakigan waxa keeney maqnaanshaha awood dhexe oo looga baahan yahay dhaqangelinta isbeddelada dhaqammada waxyeellada leh.

Dhacdada Iaad: Qaabka Qaybsiga Diyada oo Sii Baaba'aya

Tuulada Xarfo, oo ku taal waddada u dhexeysa Burtinle iyo Gaalkacyo waa halka u fadhiyo hoggaamiye dhaqameedka ugu sarreeya beelaha ku dhaqan gobolka Mudug. 1994tii arrin dil ah ayaa ka dhacdey goobtaas. Odayaasha dhinacooda dilku ka yimid waxa diyadii ay u dhiibeen hoggaamiye dhaqameedka si uu ugu gudbiyo dadkii wax laga diley. Hoggamiyihii waxa uu qabtey shir waxa uuna caddeeyey in uu hayo diyada noocaas ah. Hase yeeshee, waxa uu hadalkiisii carrabka ku adkeeyey in dadkiisu ay lunsan yihiin maaddama ay had iyo jeer gacan siiyaan isna bar-bartaagaan dembiilaha halkii ay ka taageeri lahayeen kan la dulmiyey. Waxa uu ku boorriyey odayaasha in ay si qoto dheer u fekeraan, Ilaahayna ka cabsadaan. Halkaas ayuu shirkii ku xiray.

Dadkii joogey shirka ma ayan fahmin waxa hoggaamiyahoodu u jeedey, waxa ayna u baahdeen sharraaxad intaa ka badan. Fasiraad kadib, waxa ay ogaadeen in hoggaamiyuhu tilmaamaey, dhan marka laga eego, in ay difaacaan dembiilaha iyaga oo iska hortaaga in la horkeeno sharciga, dhanka kalena, aaney siin diyada kuwa xaqa u leh, ee ay qaybsadaan xubnaha magwadaagtu. Dood dheer dabadeed, jifidii waxa ay go'aansadey in ay bedesho qaabka qaybinta diyada iyo saamiga la siiyo qoyska marxuunka dhintey. Laga soo billaabo maalintaas, xaaladdani waxa ay noqotey xeer guud, taas oo odayaashu billaabeen in ay siiyaan qoyska laga dhintey 22 geel ah, halka uu ka ahaa 11 ee 100ka geela ah. Arrintan waxa ay noqotey tusaale ay jifiyooyinka kale raacaan, oo waxa sii tiro badanaya isbeddelada ku dhacaya xeerka diyada. Waxa kale oo jira xaalado kale oo jifiyooyinku go'aansadeen in ay si buuxda ugu dhaqmaan Shareecadda marka laga hadlayo dilka waxa ayna siiyaan qiimaha diyada oo dhan qoyska agoomoobey, hase yeeshee tani waa dhif.

2.3 Xeerka Kufsiga

Farqiyada goboleed ee xeerka ciqaabta kufsiga ayaa daraasadda looga hadley. koox ayaa sheegtey in ciqaabta kufsiga gabadha ugubi tahay in lagu khasbo dembiilaha in uu guursado gabadha. Xeerkan marka la eego, ujeeddadu waa in la badbaadiyo sharafta gabdhaha la kufsadey, xalkuna waxa uu noqdaa iyada oo lagu khasbo in ay guursato ninkii kufsadey. Bulshada reer miyiga ah, marka gabar la kufsado, arrintu ma noqoto ciqaab u dhexeysa dembiilaha iyo gabadha ee waxa ay ka dhexeysaa labada jifiyood. Mar haddii arrintu soo shaac baxdo, dadweynuhuna ogaadaan in gabadha la fara-xumeeyey, sharafteeda iyo gabarnimadeedaba waxyeello weyn ayaa gaara, gayaankeedna waxa suurogal ah in aaney guur ugu iman. Koox kale ayaa iyaduna sheegtey in magdhowgu yahay tiro geel u dhexeeysa 5-50 neef iyo gabadho oo lagu khasbo in uu guursado ninka dembiga galey. Koox saddexaad waxa ay sheegtey in degaankooda ciqaabtu tahay seko oo dhan 44 ari ah oo keliya. Gobollada Sool, Sanaag iyo deegaanka Buuhoodle waxa kufsiga lagu soo rogey ciqaab caynadeed oo u dhaxeysa 5-50 geela si loo xakameeyo tirada dembiyada.

Gobolladda kale ee Puntland waxa ay saaraan ciqaab fudud oo gaari karta 5 geel ama 44 ari ah. Gobolladan, xeerbeegtigu waxa ay awood badan u leedahay goynta go'aanka ciqaabta ku habboon. Haweenka ka soo qayb galey aqoon-is-weydaarsigu waxa ay ka cawdeen in mararka qaarkood ay odayaasha xeerbegtigu xukumaan ciqaab fudud, sida in gabadha la siiyo "garbosaar". Waxa ay si xoog leh u cambaareeyeen xeerka ciqaabta kufsiga. Waxa ay ka cawdeen in raggu badanaaba iska idha-tiro ama aanu tixgelin dhawaaca qalbi, kan sumcadeed, iyo kan maskaxeed ee gaaraya gabadha la kufsadey. Waxa ay ku adkeysteen in la beddelo xeerkan, kana dalbeen madax dhaqaameedyada iyo culimada diinta faragelin deg deg ah si wax looga beddelo xeerka kufsiga. Ka-qayb-galeyaasha iyo kuwa sahaminta lagu wareystey dhammaan waxa ay diideen ciqaabta fudud ee xeerku ku qaado kufsiga. Waxa ay codsadeen in la joojiyo xeerka kufsiga, isla markaana soo jeediyeen in xeerkan lagu beddelo kan Shareecadda maaddaama ay kaga xukun kulushahey, taas oo gaari karta in dembiilaha lagu xukumo dil; ama lagu beddelo Qaanuunka Wadciga oo ciqaabtiisu u dhexeyso 5 illaa 15 sanno oo xarig ah.

Waxa muhiimad leh in la garto xeer dhaqameedku in aannu tixgelin siin dhanka xuquuqda aadanaha ee kufsiga. Marka gabar la kufsadey lagu khasbo in uu guursado kii kufsadey, odayaashu waxa ay ku sababeeyaan:-

1. In ninkaas lagu xukumo yarad badan oo noqonaya kii laga qaadan lahaa gabadha haddii gabadha aan la kufsan, Iyo
2. Waxa la badbaadiyey karaamada iyo sharafta qoyska gabadha, sababta oo ah gabadha la kufsadey waxa ay noqotaa mid aan qiimo badan lahayn maaddaama raggii guursan lahaa aaney guur ugu imaaneyn. Sidaa awgeed, gabadha oo lagu khasbo in uu guursado ninka kufsadey, waxa uu qoysku ku helaa yarad, isla markaasna waxa ku badbaada sharafta gabadha.

2.4 Xeerka “Yaradka Khasabka ah”

Soomaalidu waxa ay leedahay dhaqaamo guur soojireen ah. Dhaqanka Soomaalida waxa uu qabaa in ninka guur-doonka ahi u doonto guur oori fog. Aqoonyahanna badan ayaa ku sharxay caadadan in ay tahay mid horumarisa xiriirka siyaasadeed ee qabiillada, isla markaana leh faa’idooyin dhaqaale. I.M Lewis ayaa ka mid ah kuwa ayidsan aragtidan. Buuggiisa dhowaan soo baxay waxa uu qorey:

“Guurka waxa loo arkaa in uu yahay aalad abuurta xiriirro kuwa siyaasadeed u dhow iyo kuwa bulsho. Sida awgeed, qof waxa uu ka guursadaa reerka uu ugu xigeen yar yahay, sida awgeed, guurka waxa loo doontaa meelaha qof aanu xiriir la lahayn. Markaas, guurku dhif ayaa uu ka dhex-dhacaa kooxaha mag-wadaagga ah. Xoolo dhaqatada Waqooyiga Soomaaliya kuma dhaqmaan guurka ilma-adeerta ee caadada u ah Carabta muslinka ah.”

Arrintu si kastaba ha ahaatee, sida ay tilmaameen ka-qayb-galeyaasha daraasaddu, sabab kale oo macquul ah ayaa ka dambeysa caadadan. Iyaga oo aan si rasmi ah u dersin Cilmiga Hiddaha, Soomaalidii hore waxa ay ogaatey tafiirta waalid kala dhiig durugsani in ay siddo hiddo-sideyaal ka fiican waalidka xigtada isu ah. Waxa ay tilmaameen in tafiirtu mideyso laba dhiig oo kala duwan siddana astaamo kala geddisan; sidaa darteedna tafiirtu kala durugsani kaga fiicnaaneyso garaadka iyo tabarta kuwa tafiirta ka soo jeedda waalidka xigtada isu ah. Taa ayaa keentey in guurka shisheeye loo doonto.

Iyada oo ay arrintaasi jirto, haddana caadada guurka Soomaalidu waxa ay u badan tahay isguursiga ilmo abti iyo ilmo eeddo. Waxa ay ula muuqataa Soomaalida in ay kuwaasi kala asal yihiin, sameyska dhiiggooduna kala duwan yahay. Dhaqan ahaan, Soomaalidu waxa ay ogaatey in cudurrada qaarkood waalidku u gudbiyo carruurta. Waxa yaab leh in bulsho dhaqan daaqsato lihi yeelato aqoonta noocan ah. Laakiin, Soomaalida waxa lagu yaqaan in ay taarikh ahaan leedahay cilmi maxalli ah. Richard Burton, oo yimid Soomaaliya bartamihii qarnigii 19naad, waxa uu sheegay in Soomaalidu tiqiin in qaniinyada kaneecadu sababto cudurka ‘’Duumada’’ oo aaney dadkiisu (Ingriis) wakhtigaas aqoon. Qoraalkiisa arrintan aad ayaa uu Soomaalida ugu yasey, waxa uuna ku sheegey badownimo weyn in loo arko in kaneecadu keento duumada.

Tan labaad, Soomaalidu waxa ay qabtaa hooyadu in ay ka muhiimsan tahay aabaha marka laga hadlo sameyska caruurta ama astaamaha ay leeyihiin. Labadan xikmadood ayaa kala sheegaya arrintan. “*Awr waa kan hoose*” iyo *“wiil waa abtigii.”*

Iyada oo mabda’an laga duulayo, Soomaaligu waqti dheer iyo tamarba waxa uu ku lumiyaa raadinta gabadha u qalanta. Raadintan waxa lagu magacaabaa *Awrdayid ama Guurdoon*. Willka dhallinyarada ah ee guur-doonka ahi ma laha aqoon ballaaran oo uu ku qiimeeyo gabadha iyo asalkeeda. Sidaas awgeed, laba midkood aey Soomaalidu yeeshaa: b) ninka guur doonka ah waxa uu soo arkooda gabar, kadibna waxa uu kala tashadaa waalidkiisa oo markaas ka dib tab iyo xeeladba ku baara gabadha iyo

reerkeeda, ama t) markii qoysku isku raaco in wiilka loo guuriyo, waalidka ayaa u raadsha gabdha u qalanta. Qaabka dambe ee labaad waxa arrinta soo gala dad badan oo dhinaca hooyada iyo aabaha ka socda, sababtu waxa weeye xubnaha qoyska ballaaran in badan ayaa ka khuseysa guurka cusub. Labada xaaladoodba, hooyadu door weyn aey ka qaadataa hawsha xulidda. Waalidka wiilka guur-doonka ahi waxa ay baaraan dhammaan astaamaha ku taxalluqa gabadha, walaalaheed iyo meesha aabaheed iyo hooyadeed ka soo jeedaan iyo mararka qaarkood taariikhda qoyskeeda ballaaran oo dhan. Soomaalidu badanaa waxa ay tiraahdaa *"Gabadhi waa hooyadeed".* Inta qorshaha golafariisiga lagu jiro, labada hooyo ee dhaley lammaanaha is-guursanaya waxa ay doorweyn ka ciyaaran nidaamiinta aqalgalka cusub. Sida caadadu tahay, labada hooyo waxa ay yeeshaan kulanka ugu horreeya ee qabanqabaada inta aaney arrintu u gudbin aabayaasha iyo qaraabada.

Wixii ka dambeeyey madaxbanaanidii 1960kii, guur dhaqameedka Soomaalidu waa ka tirtirmey degaannada magaalooyinka ah taas oo ay ugu wacan tahay xawliga badan ee magaaleynta iyo dhaqammada reer Galbeedka oo soo galey magaalooyinka. Faca da'da yar, gaar ahaan kuwa reer magaalka ah, inta badan waalidkood kalama tashadaan guurka. Dhallinyarada guur-doonka ahi ma baaraan asalka gabadha ay rabaan in ay guursadaan. Waxa laga yaaba in waalidiintu gacan ka geysato aqalgalka iyo kharashka arooska laakiin aanay saameyn kale ku lahayn reerka cusub. Sidaa waxa ku debcey oo sida badan meeshaba ka baxey hiilladii waalidiintu siin jireen qoyska marka muran dhex yimaado labada isqaba oo odayaashu xal u heli jireen waayo-aragnimadooda awgeed. Taasina waxa ay sababtey in koror ku dhoco furriinka. Arrintan awgeed iyo weliba marka lagu daro dhibaatada dhaqaale ee jirta, waxa soo baxey tiro aad u badan oo reero dumey iyo dumar caruur haya oo la furay.

Bixinta yaradku waa xeer ay leeyihiin daaqsatada Soomaaliyeed. In kasta oo Soomaalidu guud ahaan aaney kala lahayn dabaqado kala sarreeya, haddana qiimaha yaradku waxa uu ku xiran yahay dhowr shuruudood oo ay ku jiran quruxda gabadhu, xoolaha iyo sumcadda qoyskeedu ku leeyahay bulshada dhexdeeda (Sucaad 2002). Ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay intaa raacsheen in qiimaha yaradku ku xiran yahay oo kale xoolaha uu leeyahay qoyska ninka guur-doonka ah. Guur-doonka maalqabeenka ah waxa laga filaa yarad aad uu badan. Qiimaha yaradku waxa kale oo uu ku xiran yahay hadba inta ninku u jiro gabadha uu dooney.

Dhaqan ahaan, iyaga oo kaga duwan kuwa beeraleyda ah, daaqsatadu waxa ay yaradka ku bixin jireen geel iyo fardo. Markii gumeysiga Reer Galbeedku waddanka keeneen qoryaha (hubka), qorigu waxa uu noqday wax qiima leh oo kuwa awoodaa raacshaan yaradka. Si kastaba ha ahaatee, madax-bannaanidii ka dib, iyada oo ay ugu wacan tahay hubka badan ee galey gacanta dadweynaha, hubkii waxa ka lumey qiimaha uu ku lahaa yaradka. Farasku isaguna waxa uu lahaa qiime sare, waxa uuna bulshada xoola dhaqatada ah wax ka tari jirey is-gaarsinta deg-degga ah. Waxa loo isticmaali jirey sahaminta roobka marka uu roob ka da'o meelo fog-fog. Waxa kale oo lagu isticmaali jirey dagaallada dhex mara qabillada iyo dhicidda geela ama weerar rogaal celis ah oo lagu soo dhicinayo geel la qaadey. Si kastaba ha ahaatee, markii ay

xoogaggii gumeysigu la yimaaden gadiidka baabuurta, fardihii waa qiimo dhaceen, halka geelu weli ku leeyahay qiimihisii bulshada xoola dhaqatada ah iyo yaradkaba.

1.5 Xeerarka "Guurka Khasabka ah"

Odayaashu waxa ay sheegeen 4 nooc oo guur khasabka ah oo xeerku qabo. Afartaasi waxa ay kala yihiin:

b. Waxa dhaqan guud ah in waalidku (Aabbe, Walaal, ama qof qaraaba ah) yahay masuulka gabadha ugub, iskiina ugu nikaaxi kara ninka uu u garto ama kan weydiista ee u arko in uu munaasib ku yahay, isaga oo aan la-tashi ama oggolaansho ka raadin gabadha. Weligu si sharci ah ayaa uu tan u yeelaa. Waxase jira marar in weligu dano gaar awgood, sida isaga oo doonaya in uu qaato yarad badan, gabadha siiyo nin aan kuf u aheyn .

t. In dumarka laga dhintey lagu khasbo dumaal aaney raalli ka ahayn, sida walaalka ama ilmo-adeerta marxuunka. Xeerkan waxa uu qabaa walaalaha, ama haddii aanety jirin, ilmo-adeertu in ay xaq u leeyihiin dhaxalka dumaaska afada uu ka dhintey walaal/ina-adeer. Marka ay jiraan dhowr walaalo ahi, kuwa isku bahda ah**,** ayaa xaq ka leh kuwa isku aabaha oo keliya ah. Laakiin, xeerku waxa uu u oggol yahay afada laga dhintey in ay ka dhex-doorato ninka dumaalaya walaalaha ama ilma-adeerta. Haddii ay dhacdo in ay diiddo ku-dhaqanka xeerka dumasha, waxa laga yabaa in haweenta si adag loola dhaqmo, taas oo gaarta iyada oo carruurta laga qaado, loona diido xuquuqda ay u leedahay ka talinta hantida uu ninkeedu ka dhintey. Marxaladaha adag qaarkood deyro ayaa laga dhigaa waxana laga xannibaa in ay guursato cid aan ka tirsaneyn walaalaha iyo ragga caa'ilada u ah marxuumka. Waxase sheegid mudan, in kasta oo ciqaabtaasi jirto, haddana afada laga dhintey lagama duudsiyi karo qaybta dhaxalka ninkeeda ay ku leedahay, taas oo dhan hal-qayb-siddeeddii-qayboodba (1/8) hantida dhammaanteed, sida ay qabto Shareecadda.

j. Xigsiisan: oo ah walaasha afo geeriyootey oo lagu khasbo guurka ninkii walaasheed ka geeriyootey, iyo
x. Godobtir: oo ah hanti lagu siyaadiyo diyada, si loogu qaboojiyo dhaawaca qalbi ee kooxda la xumeyey. Xaaladdan gabadha waxa lagu khasbaa in ay guursato walaalka ama xigtada nin la diley.

Qaybaha Waqooyi ee dalka oo ay dadka badankood yihiin daaqsato , kheyraadka dabiicigu waa kooban yahay, waxana ku badan ishor-imaadyo ka yimaada daaqa, biyaha iyo dhaca geela, kuwaas oo sababa dil tiro badan. Si loo xakameeyo dhibaatada, beesha ama beelaha jaarka ahi waxa ay sameysteen qaabab kala duwan oo khilaafka lagu xalliyo si xasilloonidu aaney faraha uga bixin. Qaababkaas waxa ka mid ah in qiimo dheeraad ah oo diyo ah laga baxsho dilka ula kaca ah, lana raacsho gabar loo guuriyo ninka la diley walaalkiis ama kan xigto ahaan ugu dhow. Guurka gabadhu waxa uu wanaajiyaa xiriirka labada reer, waxa uuna si weyn u tirtiraa aannada iyo nacaybka.

Sidaas awgeed, Soomaalidu waxa ay tiraahdaa *''meeshii xinjiri ku daadato xab baa lagu burburiyaa"*

Godobtirku khasab ma aha, ee waa astaan wanaag-dheeraad ah looga dhigo diyada marka dilku u dhacey si aad u fool xun, lagana cabsi qabo in colaadi abuuranto. Waxa kale ee godobtirka loola jeedaa in xiriir xididnimo dhex maro kooxaha dilku dhexmarey, Taa micnaheedu waa dhaqanka iyo danaha qabiilka oo ka saramarey xuquuqda aadaminimo ee gabadha. Sida badan, gabadhaas waxa ku dhaca afxumo iyo jir dil kaga yimaada dhinaca xididkeeda cusub, waayo waxa loo arkaa in ay ka dhalatey qabiil cadow ah**,** xushmad badanna lama siiyo, marba haddiiba la soo raacshey geel diyo lagu baxshey. Aragtidan colaadda ah waxa gabadha ay ku kelliftaa in marar badan ay u dhuumato reerkii ay ka dhalatey, ugana cabato dhibaatada ka heysa degaanka cusub. Ciil-qabka reerka wax laga diley ee xididka ahi hoos waxa uu u dhacaa haddii gabadhu godobtirka ahi u dhasho ninka wiilal. Wiilashu waa gaashaanka ugu weyn ee gabadhu iskaga difaaci karto furriin, xad-gudub**,** aqoonsina kaga heli karto dadka ay xididka yihiin. Waayo waxa markaa loo arkaa mid tarmiysey cududda reerka. Marka ay badato tirada wiilashu, waxa kordha qaddarinta hooyadu ku leedahay qoyska iyo bahdaba**.**

Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsiga iyo kuwa sahaminta lagu wareysteyba waxa ay dhaleeceeyeen xeerka guurka khasabka ah. Waxa ay sheegeen in guurka khasabka ahi xawli badan ku sii yaraanayo. Dhowr sababood aey arrintan ku saleeyeen, sida dadka oo fahmey in ay jiraan xukunno xeer dhaqameedyo badan oo khilaafsan diinta Islaamka, magaaleynta deg-degga badan, soo kororka aragtiyo casri ah iyo caadooyin diineed suubban oo ay la yimaadeen wadaaddo ku dadaalaya kala caddeynta diinta iyo dhaqanka. In kasta oo ay jiraan dhibaatooyin sharciyeed iyo xagjirnimo jinsi ka soo jeeda dhaqanka guurka khasabka ah iyo yarad qaadashada**,** odayaashu waxa ay ku adkeysteen in xeerku leeyahay fuliyona hawlo wax ku ool ah oo aan la inkiri karin. Iyada oo ay odayaashu mabda' ahaan cambaareeyeen ku dhaqanka guurka khasabka ah, haddana waxa ay farta ku fiiqeen qiimaha ay leedahay waayo-argnimada waalidiintu, kuwaas oo uga aqoon badan gabdhaha doorashada kufka munasaabka ah. Taas oo in badan keeni karta dammaanad waaritaan guur. Markii ay gorfeyneysa guurka, Sucaad waxa ay daraasaddeeda ku sheegtey:

" Shardi aey ahaan jirtey in ugu horreyntii waalidku u garto shakhsiga gabadha doonaya in uu yahay fil-keed iyo in uu yahay mid hanan kara mas'uuliyad," "Dhallinta is-guursaneysa waxa lagama maarmaan ahayd in ay oggolaansho ka helaan waalidiinta iyo odayaasha qaraabada ah. Taas waxa ay suutogal ka dhigi jirtey in labada qoyska noqonaya la isu fiirsho si mustaqbalka qoyskaasi u noqdo mid baraara. Haddii dhibaato dhex timaaddo labada qofood, markaas xigtada soke ee qoyska waxa waajib ku ahayd in ay gacan ka geystaan xal raadinta iyo dib u soo celinta degganaanshaha ama jiritaanka qoyska."

Marka la eego Shareecadda, aabuhu masuul ayaa uu yahay gabadhiisa ugub iyo agaasinka guurkeeda, isaga oo mudnaanta siinaya raallinimadeeda. Mararka qarkood, aabuhu si xun ayaa uu u isticmaalaa awooddan isaga oo gabadha u guuriya nin aaney dooneyn. Haddiise gabadhu garoob tahay, aabaha iyo walaaluhu kuma khasbi karaan

guurka nin aaney dooneyn. Haddii gabadhu garoob tahay, waa u madax bannaan tahay in ay doorato nin iyada oo aan oggolaansho ka dalbin, amaba wargelin waalidka. Guurka garoobta waajib ma aha in laga baxsho yarad. Waa wax xiiso badan in aaney da'du macno badan sameyn, taas oo loola jeedo garoobta la furay, xitaa haddii ay labaatan jir tahay xor aey u tahay in ay guursato ninka ay doonto, halka gabadha iyada la dhalatey ee 21 jirka ahi aabaha ama wiilasha la dhashay oggolaansho uga baahan tahay. Soomaalidu ahmiyad weyn waxa ay siisaa xannaaneynta caruurta. Odayaashu waxa ay aaminsan yihiin in carruurta agoonta ama rajada ahi u baahan yihiin cid ilaalisa haddii aabaha ama hooyada geeri ku timaaddo, sidaas awgeedna, adeerkood ama habaryartood yihiin kuwa muraan la'aan lagu beddeli karo. Dumaasha waxa loo gartey in ay keeni karto xal wax ka tari kara xannaaneynta carruurta marka uu hooyada guursado ninka qaraabada ahi. Sidoo kale la xididka dhinaca dilku ku dhacey waxa uu ishortaagaa sida badan aano iyo ciilqab dambe.

Odayaashu waxa ay ku adkeysteen in kheyr ku jiro hooyada laga dhintey in uu guursado walaalka xiga ama ina-adeerku, halka guurka afada laga dhintey nin ka durugsan carruurteeda ay badanaaba abuuro xiisad dhex marta qoyska carruurta iyo ninka cusub, xiisaddaas oo ka dhalata daryeelka caruurta ama maareynta hantida uu ka dhintey marxuumka caruurta dhaley, Dhibahani ma soo baxaan marka afada laga dhintey guursato qaraabada xigta. Intaa waxa dheer, dhaqanka Soomaalida, xigtada xaqa u leh dumaasha afada, dabeecad wanaagsan aey kula dhaqmaan afada inta uu nool yahay ninkeedu si aaney diidmo dumaaleed uga iman haddii ninku geeriyoodo. Tixdan gabey ee caanka ah ayaa xoojineysa arrintan: "*Ma dumaalo naaguhu ninka ay nolol ku dayrshaane."* Maahmaah kale oo caan ahi waxa ay tiraahdaa: "*Dumaali waa Nolosha,"* taas oo loola jeedo, ninku waxa uu dumaali karaa afada walaalkiis ka dhintey haddii uu xurmo iyo wanaag siin jirey intii walaalkiis noolaa. Waxa dhacda in ay haweentu diido dumaasha ninka u leh xiriir xumadiisii awgeed isla markaana doorato walaal isaga ka da' yar ama ina-adeerka ninka ka dhintey. Haweenkii ka qayb galey aqoon-is-weydaarsigu waxa ay si xooggan u diideen sii socodka dhaqannadan, waxa ayna ku baaqeen in la joojiyo guurka khasabka ah.

Dhacdada 2: Xeerka Dumaasha

1994dii, odayaasha ugu waaweyn, tiradoodu dhan tahay todobaatan, matalayena bulshada ku nool Burtinle, waxa ay falanqeeyeen arrinta khuseysa dumaasha, iskuna raaceen in la xaaraantimeeyo guurka dumaasha khasabka ah ee looga dhaqmo degaankooda. Xeerkan cusub waxa uu qeexayaa in afada laga dhintey sugto 6-12 bilood ka dib geerida ninka. Muddadaa wixii ka dambeeya, afada laga dhintey xor waxa ay u tahay in ay guursato ninka ay doorato. Muddadaas inta lagu jiro ninka ugu xiga marxuumka waxa uu fursad u leeyahay in uu guur ka dalbo haweenta, guursadana haddii ay oggolaato. Haddii uu ku guuleysan waayo, haweentu xor waxa ay u tahay in ay nin kale guursato. Xeerkan waa looga dhaqmaa Burtinle illaa iyo hadda.

Dhacdada 3: Aabbe Ku Khasbey Gabadhiisa In ay Guursato Nin Ay Diidan Tahay

Waxan ahaa nin hanti leh oo da' yar. Markaan 25 sano-jir noqdey, waxan noqdey Nabaddoon. Maalin maalmaha ka kid ah ayaan go'aansadey in aan xusho xaaskeyga mustaqbalka, Waxan u tegey nin gabar dhaley, weydiisteyna gabdhihiisa. Ninkii waa i soo dhoweeyey, waxa uuna la tashadey gabadhiisii. Gabadhii waa diiddey. Markii diidmadii i soo gaartey, waxa si toos ah ugu tagey gabadhii aniga oo isku deyeya in aan ka weeciyo diidmada. Gabadhii waa aan loodin waayay. Waa aan caroodey, waxanan ku laabtey aabaheed oo aan u bandhigey yarad fara badan, aniga oo ka dalbaya aroos deg-deg ah. Aabihii waa ii guuriyey gabadhii, iyada oo aan raalli ka ahayn. Waxannu wada joogney muddo 30 sano illaa ay ka geeriyooytey. Marka aan runta sheego, xiriirkayagu marna ma noqon mid fiican, kumana annu nooleyn jacal dhab ah .

2.6 Xuquuqda Dhaxalka ee Haweenka

Taariikh ahaan, beelaha qaarkood, dumarka looma oggola in ay dhaxlaan hantida qaarkeed, sida geela, fardaha, guryaha, doonyaha iyo beeraha xijiga. Si kastaba ha ahaatee, dhaqankani waa mid sii tirrmaya, meelo badanna waaba ka dabar-go'ay. Ka-qayb-galeyaasha iyo dadkii la wareystey waxa ay isku waafaqeen in haweenka reer magaalka ahi helaan saamiga ay ku leeyihiin hantida dhaxalka ah ee qoyska. Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa ay u aqoonsadeen in u diidmada haweenka dhaxalkooda tahay fal-dambiyeed xun, maaddaama xeerkani lid ku yahay Shareecadda iyo xuquuqda asaasiga ah ee aadanaha iyo caadooyinka la aqoonsan yahay. Intaa waxa ay ku dareen in xeerkan aad loogu dhaqmi jirey wixii ka horreeyey imaatinkii xoogaggii gumeysiga ee Soomaaliya. Hase yeeshee, dhaqankani waxa uu weli ka jiraa meelaha miyiga iyo bulshooyinka xijiga. Haweenka ka qayb galey aqoon-is-weydaarsigu waxa ay si aad ah diideen xeerka noocan ah, kuna tilmaameen in uu xad gudub ku yahay xuquuqda asaasiga ah ee haweenka, waxa ay dalbadeen in la tir-tiro xeerkan.

2.7 Xeerka "Jir-dilka Haweenka"

Ka-qayb-galeyaaha aqoon-is-weydaarsiga iyo dadkii ka jawaab baxshey sahamintu waxa ay xaqiijiyeen in jir-dilka haweenku aanu xad gudub weyn ka ahayn Xeerka Soomalida. Sida uu qabo xeer dhaqameedku, raggu waa kuwa ilaaliya, daryeelana haweenka iyo caruurta. Raggu sababo badan aey u jir-dilaan dumarkooda; sababta ugu badani waa marka dumarku dayacaan xoolaha qoyska meelaha badiyaha ah, sida marka arigu, oo ah hantida aasaasiga ah ee qoyska iyo mas'uuliyadda tooska ah ee dumarka, lumo ama bahal cuno, sida waraabe,dawoco, iwm. Arigu qoyska reer miyiga ah waxa ay ula mid yahay dalagga beeraleydu ku nool yihiin, si fududna loo iibin karo si loogu soo gato wixii loo baahdo, la'aantiisna ma noolaan karaan**;** sidaas awgeed, lumin mid ama laba neef lama xammili karo. Cadhada iyo niyad-jabka ka soo unkama khasaaradan inta badan waxa ay keentaa in ninku u gacan qaado xaaskiisa. Laakiin fara saarka dumarku waa ku dhif magaalooyinka, halkaas oo aan la jecleyn ragga xaasaskooda jir-dil ku sameeya. Qaybaha kala duwan ee waddanku waa ku kala duwan yihiin ra'yiga laga qabo jir-dilka haweenka. Qaybaha qaarkood, sida Bay iyo Bakool,

dhaqankani waa mid bannaan oo la caadeystey, loona arko fal sixitaan ah, halka Puntland laga neceb yahay, dadkuna ka didaan maqalka falkan oo kale. Qaraabada haweenta la jir-diley, sida badan, waa dul-qaataan, umana dacwoodaan sharciga haddii dhaawacu fudud yahay; hase yeeshee, xaaladaha daran ee dhaawacu yahay mid weyn, qaraabadu sharciga aey u dacwoodaan. Qaraabada dhibbanuhu waxa ay dalban karaan in tallaabo sharciga waafaqsan laga qaado ninka, haddii uu ku xad gudbey jir-dilka xaaskiisa, xad dhaafsiisan inta loo dul-qaadaan karo. Qaraabada afadu, marka ay dacwoonayaan, waxa ay tixraac uga dhigaan dooddooda xeerka sheegaya in afadu leedahay labo nasab; *dhaxdin iyo dhalasho ama dhaqan iyo dhiig*. Sida uu qabo xeerkani, afadu waxa ay ninka iyo tolkiisa u dhashaa carruur. Hase yeeshee, dhiiggeeda waxa leh dadka ay ka dhalatey - sida aabaheed, walaalaheed, qabiilkeeda, iwm.

Marka dhawaaca afada loo geystey fudud yahay, xeerbeegti odayaal ka kala socda labada dhinac ee oorida iyo ninkeeda, ayaa qaada garta, sida badanna waxa ciqaab fudud ninka looga dhigaa xaal la baxsho. Laakiin, haddii dhawacu yahay mid culus, waxa loo tagaa Qaadi qiimeeya nabarrada gaarey afada, ninkuna waxa uu baxshaa qiimaha nabarrada uu geystey. Waxa xiiso leh arrinta ah in gashigaas ay qaataan qaraabada oorida ay dhibaatadu gaartey. Odayaal ka-qayb-galeyaasha ka mid ahaa waxa ay sheegen in, dhacdooyinka qaarkood, jir-dil culusi keeni karo xukun furriin ama kala-tag, haddii ay ooridu sidaa codsato. Sida xeerku qabo, haddii uu nin nafta ka qabto ooridiisa**,** magta waxa qaata tolka. Tani si toos ah waxa ay u khilaasan tahay Shareecadda oo Diyada qofka (lab ama dheddig) u qaabeysa sida dhaxalka. Habkan ninka waxa ku beegma qayb weyn - afar-qaybood-qayb (1/4)- inta kalena waxa yeesha caruurta ama waalidkeed ama walaalaheed hadba sida warasado tahay. Si kastaba ha ahaatee, ka-qayb-galeyaasha iyo dadkii la wareystey waxa ay sheegeen in jir-dilka dumarku sii yaraanayo. Waxa ay ku warrameen in waayahan dambe dumarku ka cararaan ragga ku dhaqma jir-dilka, haweenka kalena cambaareeyaan ninka sidaas yeela isla markaas diidaan in ay guursadaan kuwa noocaas ah ee xiloodiya. Haweenka joogey aqoon-is-weydaarisigu dhammaantood waxa ay dalbeen joojinta dhaqankan iyo in ciqaab la marsho ragga sidan u dhaqma. Tiro ka mid ah kuwa jaawabaha ka bixiyey sahaminta waxa ay soo jeediyeen in la bilaabo olole wacyi-gelin dadweyne oo qayb ka noqda dadaalka loogu jiro ciribtirka dhaqankan.

2.8 Rasmiyeynta Xeer Soomaaliga

Doodihii aqoon-is-weydaarsiga iyo wareysiyadii sahamintu kuma koobneyn dhinacyada xun ee xeer dhaqameedka ee waxa ay isla markaas eegayeen dhinac kasta oo xeerka ah. Waxa cilmibaaristani muujisey in xeerku leeyahay dhinac fiican oo ay lagama maarmaan tahay in lagu dhaqmo,la dhowro, lana xafido. Waxa la sheegey in xeerka loo kaashado xal u helidda khilaafaadka, gaar ahaanna in uu door weyn ka ciyaaro kuwa daaqsata dhexmara. Waxa wadajir loo codsadey rasmiyeynta iyo xoojinta qaybaha xeerka ah ee wax ku oolka ah, kuwaas oo aan si fudud looga tegi karin sababo dhaqan-dhaqaale aanuna ka noolaan karin mujtamaca reer-guuraaga ahi. Talo kale waxa ay ahayd in dib loo habeeyo (la beddelo) xeerarka ka hor-imaanaya xeerarka Shareecadda iyo Wadciga, isla mar ahaantaana ku xadgudbayaa xuquuqda asaasiga ah ee aadanaha iyo qaybo bulshada ka mid ah, sida haweenka iyo kuwa laga xoog badan yahay.

3. XEERAR DHAQAMEEDKA DAAQA

3.1 Bulshada Xoolo Dhaqadata.

Qaybta xoolaha nool waxa lagu tiriyaa in ay tahay tan ugu sarreysa, uguna muhiimsan dhaqaalaha Puntland. Sannadkii 1998-dii dakhli-sannaadeedka ka soo galey dhoofinta xoolaha nool waxa uu dhammaa USD 22,000,000 halka wadarta wax dhoofintu dhammaanteed ahayd USD 33,000,000, taas oo ugu dhowaan ah 67%. Sida inta kale ee Soomaaliya, marka laga reebo dhulka webiyada leh, tirada aqlabiyadda dadku waa xoola dhaqato ku nool nacfiga xoolaha ka soo baxa. Qaybta yar, bulshooyinka reer magaalka ah ee deggan magaalooyinka iyo tuulooyinka, iyana waxa ay nolol ahaan ku xiran yihiin xoola dhaqatada oo u keena hilibka iyo caanaha. In kasta oo xoola raacatada Puntland dhaqdaan dhammaan noocyada xoolaha sida idaha, riyaha, geela iyo lo'da, saddexda hore ayaa qaalib ahaan la dhaqdaa.

Tirokoob dhab ah dhawaanahan lagama sameyn tirada xoolaha nool, warbixinta (WSP) 1997-99 waxa ay ku qiyaastey tirada guud ahaan xoolaha saddexda gobol ee kala ah Bari, Nugaal iyo W/Mudug, iyada oo lagu saleynayo qoraallo hore ee 1998dii, sidan: 20,751,616 neef oo u qaybsan riyo: 12,507,000 neef (60%), ido: 6,335,300 neef (30.5%), geel: 1,475,3000 neef (7.12%) iyo lo': 434,100 neef (2.1%). Lama hayo qiiyasaha labada gobol ee Sool iyo Sanaag wakhtiga xaadirka ah. Wakhtigan hadda ah waaxdan dhaqaale waxa hor taagan caqabado waaweyn oo aaney daaqsatadu iskood wax ka qaban karin.

Xayiraadaha dhowrka jeer ka yimid Sacuudiga ee dhoofinta xoolaha darteed, sannadkii 1997 iyo horraantii 1999 iyo 2002 (oo weli tagaan), waxa ay si weyn u saameeyeen dhaqaalaha bulshada xoola dhaqatada ah, kowaas oo si weyn u wiiqey dhaqaalihii xoolodhaqatada, dhaawacey awooddooda iibsi, isla mar ahaantaana waxa aad hoos ugu dhacey ganacsiyada kale ee ku xiran ganacsiga dhoofinta xoolaha sida kireysiga gaadiidka, ka-ganacsiga cawska, shaqaalaha xilliyeed ee ka shaqeeya dhoofinta xoolaha, iyo illaa heer dhaqdhaqaaqa soo dejinta badeecadda, iwm. Iyada oo ay jiraan xayiraadaha Sacuudiga ee dhoofinta xoolaha, ayaa Yemen iyo khaliijka loo dhoofiyey 6dii billood ee dambe ee 2001 iyo 8da bilood ee ugu dambeeyey 2002 ari ka badan 1,400,000 neef, lo' 65,200 neef iyo 9,000 neef oo geel ah. Dakhliga laga helay waxa lagu qiimeeyey USD 50 Milyan.

Tan waxa barbar socda faca da'yarta raacatada oo ku soo qulqulaya magaalooyinka, taas oo ku keentey in waalidku ku cidleysto dhaqidda xoolaha. Tani waxa ay khatar ku keeneysaa jiritaanka, iyo mustaqbalka, waaxda xoolaha. Teeda kale, daaqsatada magaalooyinka yimid waxa aad ugu adag in ay helaan fursado shaqo, waxana la sheegay in dhallintu ka qaybqaadato dembiyada, qalalaasaha iyo fawdada ka jira magaalooyinka qaarkood. Dhacdadan ay reer miyigu ku soo qulqulaan magaalooyinka waa arrin aad u adag oo dalalka Afrikaanka badankood soo wajahdey intii ka dambeysey xorriyadda. Dadka ku nool buushashka ku hareersan Nayroobi waxa ay markhaati cad ah u yihiin habqanka hijrada miyiga. Soomaliya intii lagu jirey dagaalka sokeeye, bulshooyin badan oo reer miyi ah ayaa ku soo qulqulay magaalooyinka oo ka

buuxshey seyladihii dad aan xirfad lahayn. Xaaladdu waxa kale oo ay waxyeello u geysatey nabadda, lumiseyna isu-dheelitirkii degaannada.

Dhibaatooyinka kale waxa ka mid ah abaaro kordhaya, roob yari, roob aan la isku halleyn karin oo khal-khal geliyey isu-dheellitirka xiriirka deegaanka iyo dadka, iyo abuurka deegaanta siiba daaqa. Tani waxa ay curyaamisey caafimaadka xoolaha, waxa ayna yareysey awoodda ay cudurrada isaga difaaci lahaayeen. Waxa tan si xumeeya la'aanta adeegga caafimaadka xoolaha. Iyada oo ay intaas oo idili jiraan, haddana xooluhu waa saldhigga dhaqaale ee bulshada reer Puntland. Si ay u noolaato, bulshada reer miyigu waxa ay weligeed halgan kula jirtey degaan adag, biyo iyo baad gabaabsi ah. Si ay u wadaagaan kheyraadka yar ee la wada leeyahay, xoola dhaqatadu waxa ay leeyihiin cadooyin iyo xeer dhaqaameed gaar u ah. Cutubka soo socda waxa uu baarayaa xeer dhaqaameedka xoola dhaqatada dhinaca wadaagga kheyraadka guud oo ay ku jiraan daaqa, qaab daaqsinteedka iyo isticmaalka dhul-daaqeenka, kaymaha iyo biyaha.

3.2 Maareynta Dhul Daaqsineedka

Lahaanshaha dhulka

Marka laga reebo tiro yar oo ku sheegtey in dhulka iyo kheyradkiisuba yihiin deeq Alle oo cidina aaney gooni u sheegan karin, ka-qayb-galeyaasha intooda kale waxa ay tilmaameen in xeerku qabo bulshada si joogta u deggan goob in ay sida caadiga ah sheegtaan milkiyadda dhulkaas, sidaasna ku yeeshaan kuna maamulaan daaqa, kaymaha iyo kheyraadka kale ee laga helo degaankaas. Heerka ugu sarreeya ee kala lahaansha dhulku waxa uu gaaraa heer beeleed sida guri Harti**,** guri Ogaadeen ama Guri Isaaq**.** Gabyaagii caanka ahaa ee Samatar Baxnaan waxa uu tiriyey tixdan oo ka mid ahayd gabay uu kula hadlayo geeliisa mar uu dhulka Nugaali abaaroobey *"Geelyahow galbeed iyo la qabey gurigi liddoor e"*

Dhan marka laga eego, tani waxa ay caddeyneysaa, sida uu qabo xeer dhaqaameedka Soomaliddu, in daaqa la wadaago; waana sababta uu Samatar Baxnaan ugu haajirey dhul aad uga fog oo aan kiisii ahayn, isaga oo raadinaya daaq. Dhanka kalena, waxa uu caddeynayaa in ay jirto milkiiyad dhuleed, maaddaama uu yiri *"gurigi liddoor".* Heerka labaad ee qaybsiga dhulku waa mid ku saleysan qolo qolo. Cibaarooyinka soo socda ee badanaaba ay yiraahdaan daaqsatadu marka ay ka hadlayaan meelo waxa ay muujineysa arritan: *"Xero Majeerteen", "Xero Dhulbahante"*, *"Cal Warsangeli"*. Meelaha qaarkood waxa dhici karta in dhulku u sii kala qaybsan yahay jilib jilib. Tusaale ahaan, waxa badanaa la maqlaa "Dhulka Naaleeye Axmed" ama "Silsiladda Buurta Cali Saleebaan", kuwaasi waxa ay ka kala tirsan yihiin Dhulbahante iyo Majeerteen sida ay u kala horreeyaan. Sidaa awgeed, xeerku: waa in reer miyiga soo guurey ay daaqi karaan dhulka, hase yeeshe aaney goyn karin cawska ama keymaha, ama dhismo ka sameyn karin gobahaas (sida guryo, ceelal, berkado, binno, iwm) taas oo keeni karta milkiiyad joogto ah. Qabiil la xiriirinta dhulku waxa ay astaan u tahay sida dhulka ay u kala leeyihiin qabiilladu. Qarankii Soomaalido ma aqoonsaneyn kala lahaanshaha dhulka. Marka laga hadlo daaqsatada, qabiilka ama degaanka ayaa ah kann ugu weyn

ee xukuma isticmaalka dhulka. Dastuurkii Jamhuuriyaddii hore ee Soomaaliya waxa uu dhulka ku qeexaey hanti qaran, qof ma sheegan karin xuquuq dhul gaar ah, dawladda mooye. In kasta oo aan xeer gaar ah loo sameyn dhulka daaqsinka ah, dhul-beereedka iyo bogcadaha magaalooyinka waxa ay lahaayeen xeerar la sameeyey wakhtigii gumeysiga. Dhulka beeraha (Fondiario) waxa dawladdu ku bixin jirtey heshiis 50 sano ah, halka bogcadaha magaalooyinku (Demanio) aaney laheyn muddo go'an. Labada hab-ba dawladdu dhulka waa la noqon kartey dan guud haddii ay timaaddo. Hase yeeshee, in kasta oo ay xeerarkani jireen, haddana ma aaney khuseyn dhulalka reer miyigu u isticmaali jireen beeraha yar-yar ee aan joogtada ahayn. Waana halkan meesha ay isaga hor imanayaan xeerarka dawladda ee dhulka iyo xeerka dhaqamiga ahi. Dhulka daaqsinka ah waxa uu dawlad kasta ku noqon doonaa dood ku taagan inta ay Soomaalidu xoolo dhaqatada tahay.

Xeerarka Daaqa

Xoolo raacatadu waxa ay daaqa u aqoonsan yihiin hanti la wada leeyahay. Daaqsatadu, iyaga oo aan loo kala eegeyn gabiil, waxa ay u guur-guuri karaan goobo ay beelo kale ama qolo kale leeyihiin. Si kastaba ha ahaatee, ka-qayb-galeyaasha darasaddu waxa ay tilmaameen in ay shardi tahay, si daaqsatada soo guurtey loogu oggolaado ka faa'ideysiga dhulka daaqa leh ee beel ama qolo kale leedahay, waa in ay jiraan duruufo adag oo dadkaas ku khasbey in ay dhulkoodii ka soo guuraan. Tan waxa loola jeedaa, waa in ay jirtaa abaar ku khasabtey in ay baadi-goobaan daaq. Wakhtiyadan dhow, meelo ka mid ah Puntland, raacatadu, iyaga oo jebinaya xeerka daaqa, waxa ay xirmeeyaan dhulkooda daaq ujeeddo ganacsi (iib caws) awgeed, waxa ayna daaq u raadsadaan meelo kale. Dadka leh dhulka ay daaqa u doontaan waa u diidaan, oo dib aey u celiyaan, maaddaama ay xirmeysteen dhulkoodii sidaana ku jebiyeen xeerka daaqa. Marka la eego xeerka daaqa, cidna xaq uma laha in ay xirmeyso dhulkeeda daaqa ah, isla maarkana daaq ka raadiso meelo kale. Xoolo dhaqatada Waqooyiga Soomaaliya waxa ay dhowraan oo ku dhaqmaan xeerka daaqa waayo nooloshooda ayaa ku xiran. Xeerka daaqu waxa uu mamnuucaa ka-ganacsiga daaqa. Roobka oo yaraadey ama qalleyl xaddidey waaridda daaqa awgeed, ayaaney suurtogal u noqon karin in cawska laga ganacsado. Taas waxa la mid noqonaya xirmeysiga dhulka ee lagu sheego beero ama ujeeddo kasta ha laga yeeshee; gubidda kaymaha, goynta dhirta wixii dhaafsiisan baahida asaasiga ah ee qoyska.

Waxa jira xeerar daaq oo kale. Marka la eego xeerka daaqa, meelaha qaarkood, qoyska daaqsatadu waa in ay degaan geesaha dooxooyinka ee aanay degin bartamaha dooxooyinka daaqa leh laba sababood awgood: Tan hore, waa si ay xooluhu si xor ah u daaqaan dooxooyinka, tan labaadna, degitaanka dooxooyinku waxa ay keeneysaa in la jaro dhirta keynta dooxada si xero loogu oodo, taas oo dhaawaceysa keynta dooxada. Tani waxa ay aad u khuseysaa xoola raacatada doolka ah. Sidaa oo kale, xeerku uma oggola xoolo raacatada doolka ahi in ay ka dhistaan kaabayaal meelaha ay daaqa u yimaadeen. Xeerarka kale ee daaq waxa ka mid ah qoysaska xoolo dhaqatada ahi in ay isu degaan (jirsadaan) masaafo aan ka yarayn 1 km si kiiba u helo aag xoolahiisa uu ku mayracdo subaxdii iyo galabtii.Aaggaas waxa loo yaqaan *Kobta mayracashada ama naylo daaqeenka ama sabada.*

Daaqsintu ama wadaagga daaqu waa socotaa illaa inta baahidu taagan tahay. Laakiin, marka uu roob ka da'o dhulkii ay ka timid daqsatada doolka ahi, daaqsatada martida ahi waxa ay ku laabataa dhulkeeda. Haddii ay koox ahaan u sii joogaan sabab cad la'aanteed, xeerku waxa uu bulshada martigelisey u oggol yahay in ay ka dalbaan martidu in ay ku noqoto dhulkooda si kuwa leh dhulkan ugu daaqaan qalo yari, dhulkana looga qaado culayska daaq ee saaran. Xeerku waxa uu oggol yahay joogitaanka ragga ka mid ahaa daqsatada doolka ah ee guursadey hablaha bulshada wax martgelisey oo ay la noolaandaan xididkood. Raggaas waxa loo yaqaan *"Inan-la-yaal",* halkaas oo ninka iyo carruurta hooyadu dhasheyba ku biiraan jifida hooyada iyaga oo hela xaq degaan. Hase yeeshee, diyada ninka iyo carruurtuba waxa ay u noqotaa oo iska leh jilibka ninku u dhashey asal ahaan. Ninka iyo caruurtaba waxa daafaca oo ilaaliya tolka afada, waxa ayna xubnaha kale ee tolka kaga duwan yihiin keli ah iyaga oo haybtoodii qabiil ee asalka ahayd sheegta. Sidaa awgeed, mas'uuliyado hoggaan siyaasadeed kama qaban karaan dhismaha bulsho ee tolka ay ku biireen. Si kale marka loo sheego, waxa ay noqdaan degaan rasmi ah oo aan ku lahayn xuquuq siyaasadeed qolada martigelisey. Meelo qaarkood ee ka baxsan Puntland, ninka iyo caruurtiisuba waa ka guuraan haybtoodii qabiil ee asalka ahayd, waxana dhacda in ay qaataan haybta jifida afada ama bulshada hadba tan ay khuseyso, iyaga oo ku milma bushada ay martida u yihiin da'ba da'da ku xigta, markaana ay dhacdo in ay yeeshaan xuquuq siyaasadeed sida hanashada xil hoggaan (sida qabiillada Raxanweyn ee ku nool koonfurta iyo qabiillada Ogaadeen ee koonfurta iyo koonfur-galbeed oo lagu yaqaan dhaqankan).

Iyada oo lagu saleynayo xeerka diidaya xirmooyin gaar ah ee laga sameeyo dhulka daaqa, xukuumaddii gumeyiga ee Ingiriiska ee Waqooyi-Galbeed waxa ay soo saartey sharci la magac baxay "Sharciga beerista iyo isticmaalka dhulka". Sharcigani waxa uu difaacaey dhulka daaqa ah isaga oo mamnuucey in xirmooyin gaar ah laga sameyo. Sharcigu waxa dawladda uu xaq u siiyey in ay tirtirto xirmooyinka laga sameyo dhulka daaqsinka isla marka warku soo gaaro.

Ceerigaabo iyo agagaarkeeda ee Gobolka Sanaag waxa jira lahaanshaha gaarka ah ee dhulka. Halkan, hab degitaan ayaa ka socdey muddo dheer, taas oo dadku dhulka qaybsadeen. Koonfurta iyo Bariga magaalada Ceerigaabo waxa isugu yimaada saddex jilib oo kala hayb ah, kalana abtirsiinyo fog, kuwaas oo tartan ugu jira kasbashada dhul dheeraad ah. Sida ay odayaashu sheegeen, si loo ilaaliyo kala lahaanshaha dhulka, loogana dheeraado iska-horimaadyo, jilib kasta dhulka uu deggan yahay waxa uu u qaybiyey laba qaybood; dooxooyinka dalsanka ah ee kheyraadka badan iyo dooxooyinka ay kheyraadku ku yar yihiin. Qoys-qoys ayaa uu jilib waliba u qaybsadey dooxooyinka dalsanka ah. Qoys kasta waxa uu ka helay dooxada gudaheeda dhul gaaraya 1 Km, kaas oo lagu magacaabey beer, kana dhistey mudul iyo dhaowr xero-xoolaad. JIlibyadu dooxooyinkii kheyraadka yaraa waxa ay ka dhigteen hanti ay wadaagaan, oo ay xoolohoodu wada daaqaan xilliga roobka. Xilliga Jiilaalka, marka doogga iyo cawsku gabaabsi noqdaan, qoys kasta waxa uu ku laabtaa dhulkii uu gaarka u lahaa si xoolihiisu u daaqaan illaa iyo xilli-roobaadka xiga. Nidaamkan lahaanshaha dhulka waxa la qaatey muddo aad u fog. Jilib deggaanka ah ayaa Dooxada Jiidali ka bilaabey qaybinta dhulka sannadkii 1926dii, mid kale Birxamur

1946dii, iyo mid saddexaad oo hawsha ku kacey sannadihii 1950-60. Qoys kasta waxa uu sameystey waraaqo sharci ah, diiwaangelin xafiisyada dawladda, waxa uuna dawladda siin jirey canshuur sannadeed joogto ah. Sida qaybtan gobolka Sanaag oo kale, Puntland ma yeelan kala lahaansho dhulka la wadaago. Ka-qayb-galeyaasha qaarkood waxa ay la ahayd in labadii maamul ee kala gumeystey labada gobol ee qaybaha waqooyi ee dalka ku kala duwanaayeen aragtida degaanka. Ingiriisku waxa uu dhirigeliyey ilaalinta iyo daryeelka degaanka in ka badan Talyaaniga, taas oo natiijo ahaan iminka ka muuqata aragtida dadyowga labada meelood. Fikraddaas waxa lid ku ah jilib dega bariga gobolka Sanaag oo uu Ingiriisku maamulaey oo aan yeelan aragtida daryeelka degaanka ee Sanaag inteeda kale leedahay. Kuwani waxa ay baabi'yeen dhir badan oo galoolku u weyn yahay(Acacia Nilotica) iyaga oo dhuxul u gubey illaa intii ay dawladdu dhacdey 1991dii. Hase yeeshee, Gobolka Sool waxa uu muujiyey sawir kaas ka wanaagsan. Waxa ay u muuqataa in dadka reer Sool dadka intooda kale kaga horreeyaan daryeelka degaanka. Waxa ay u gaar yeelaan dooxooyinka qaarkood oo ay ka mid tahay *"Dhidaya"* daajinta idaha, ri'yaha iyo lo'da. Waxa ayna tan ku sifeeyeen in loo yeeley si loo xakameeyo cudurrada faafa ee xoolaha iyo yareynta xaalufka.

Iska-hor-imaadyada Ka Dhasha Daaqa

Waa wax la fili karo in raacatadu boqollaal sano ku yeelatey xeerar xukuma daaqa, si loo helo daaq xor ah, kaas oo muhiimad weyn u leh nolosha xoolo dhaqatada. Sida horey loo soo sheegey, ka-qayb-galeyaashu waxa ay xaqiijiyeen in ay jiraan xeerar la xiriira maareynta dhulka daaqa. Waxa ay sheegeen in ay xoolo dhaqatada caado u tahay u tartanka daaqu xilliyada oo dhan; xilli-roobeedka oo naqu badan yahay iyo xilliga jiilaalka oo biyaha iyo baadkuba gababsi noqdaan. Iska-hor-imaadyada ka dhasha daaqa iyo waraabka xooluhu waxa ay badan yihiin xilliga jiilaalku dheeraado. Raacatadu aalaaba waxa ay ku dagaalantaa lahaanshaha ama helitaanka wada daaqa kheyraadka. Kuwa leh dhulka kheyraadkaas lihi waxa ay isku deyaan in ay ka ceshadaan kuwa kale, halka kuwa soo guurey isku dayaan in ay la wadaagaan, haddii loo diidana kula dagallamaan.

Iska-hor-imaadyadu waxa ay bataan xilliyada abaarta ama roob meel kooban ka da'o oo xoola badani isugu yimaadaan, kuna buuqqaan goobtaas. Sidaa oo kale, iska-hor-imaadyadu waxa ay bataan marka, daaqsin yari awgeed, ay lagama maarman noqoto isu soo dhawaanshaha kooxo xinifi dhex taal, taas oo keenta fursad lagu kala aargoosto colaado hore u jirey ama geel la kala dhacey. Si taa looga hortago, daaqsatada colaadda leh waxa caado u ah in ay isu jirsato masaafo aan yareyn, oo qolona aaney soo gelin (buffer zone), haddii aaney jirin koox saddexaad oo aan midkoodna godob ka gelin oo fursad u hesha daaqa dhulkaas dhexe. Soomaalidu daaqa ka baxa dhulka noocaas ah ee aan la daaqin colaad awgeed, waxa ay u taqaan "*Geedo Waran gaaxshey/dhaqey.*"

Xilliga abaarta ka dib, marka roobku bilowdo, xoolo dhaqatadu waxa ay u hayaantaa halka roobku ku da'ay, waxana ay isaga hor-timaadaa u-tartanka helitaanka jabad/xeero hore. Helista hoy xoolaad hore u jirey waxa ay hawl yari u tahay xoolo dhaqatada oo ka badbaada hawsha yagleelka xero cusub. Sida caadiga ah, marka uu

qoyska geeddiga ahi ku soo dhow yahay aagga roobku helay, madaxa qoysku hore ayaa uu maraa si uu u sii doorto goobta ugu doogga badan una qabto xero reerku dego (haddii aanu sidaas yeelin maalin ka hore). Marka uu intaas helo, waxa uu ku soo laabtaa, xoolihii iyo qoyskii oo weli geeddi ku soo jira, kuna jaheeyaa goobtii uu soo asteeyey/sahmiyey. Si aan qofna jabadka uga degin inta uu ka maqan yahay, xeerku waxa uu qabaa in ninku dhigo laan qoyan irridda laga galo jabadka ama, haddii taa la waayo, uu sumadda geeliisa ku dhigo dhulka ah afka xerada. Sida xeer dhaqameedku qaabo, xeradaasi/jabadkaasu waxa ay seere u tahay ninkaas xoolo racatada ah, taas xeerku yahay in ay ka leexdaan raacatada kale ee sahanka iyo jabad-doonka ahi. Waxa dhacda in rag damac badani degaan xero calaamadsan, taana badanaaba waxa ay keentaa iska-hor-imaad dhaliya dhawac iyo geeri mararka qaarkood.

Iska-hor-imaadyada Ka Dhasha Lahaanshaha Dhulka

Iska-hor-imaadyada dhulku ma aha kuwa ku cusub dhaqanka Soomaalida. Taariikhyahannada iyo saynisyahannada cilmiga bulshada ee wax ka qorey dadka Geeska Afrika, waxa ay sheegaan dagaallo joogto ahi in ay dhex mari jireen dadyowga Geeska Afrika muddooyin boqollaal sano ah. Waxa ay ku warbixiyeen in hadafka dagaalladani ahaayeen loollan loogu jiro helitaanka dhul kheyraadka badan. Waxa ay sheegeen in sansaanta socodka dadku ahayd ka guurka dhulka qallalan ee Waqooyi iyo Waqooyi-Bari Geeska Afrika iyaga oo u socda Koonfur iyo Koonfur-Galbeed. Dhulkan dambe, oo kheyraadku ku badan yahay marka laga hadlo roobka iyo *carun-ka* carrada, waxa dhexmara labada webi ee Jubba iyo Shabeelle. Iska-hor-imaadyada ka dhasha dhulku waa astaan taarikheed ee Soomaalida. Soohdimaha dhulalka beeluhu(Clan) ma ahayn kuwo joogto ah, waxana ku dhacaey is-beddello isdaba joogo ah, waayo beel kasta oo ka mid bulshada xoolo dhaqatada Waqooyigu waxa mid kasta ku dadaaleysey helitaanka dhul horleh oo ku hodon ah baad iyo biyoba. Mid kasta tan kale waxa ay u sii riixysey dhanka Koonfur iyo Koonfur-Galbeed, taas oo abuurtey dhaqan ku dhisan dhul-ballaarsi. Xoogga beeshu waxa uu midka keli ah ee sharciyeeya xaq-u-lahaanshaha dhulka ay waqti uun qabsatey. I.M. Lewis arrintan waxa uu ka yiri:

“Maba jirin wax joogto ahi, marka laga hadlayo soohdime xaddidan ee beelaha ama xuquuqda lahaanshaha daaqa iyo ceelasha .”

Dagaalladan iyo la kala wareegidda dhulku waa arrin socotey illaa ay yimaadeen xoogaggii gumeysigu qarniyadii 19aad iyo 20aad, kuwaas oo si maangal ah u xaddidey dagaal-beeleedyadii iyo dhul kala qabsigii. Gumeystayaashu waxa ay beel kasta ku xaddeeyeen aaggii ay ugu yimaadeen, waxa ayna u sameeyeen khariidad muujineysa soohdimaha dhuleed ee beel kasta. Hase yeeshe gumeysteyaashu ma aaney xurmeyn soohdimahaas markii ay qaybsanayeen Geeska Afrika. Laga soo bilaabo wakhtigaas, lahaanshaha dhulka dhinaca Soomaalidu waxa uu ahaa mid neg, ismana beddelin illaa markii la qaatey madax-bannaanida 1960kii.

Waxa ay u muuqataa in maamulladii gumeysiga Ingiriiska iyo Talyaanigu aqoonsadeen xeerka lahaanshaha dhulka, ayna waafaqeen illaa xadka aanu ka hor imaneyn danahooda, inta uu xoojinayo gacan ku heynta nabadda, isla markaana xakamaynayo

isku-dhaca daaqsatada. Warbixinno badan ayaa qoraya munaasabado dhowr ah oo maamullada gumeysigu dhaqan geliyeen xeerka lahaanshaha dhulka ee beelaha ama qabiilka si ay u joojiyaan dagaallada ka dhex oogma. Waxa tusaale qoran u ah, xadkii uu dhex-dhigey Guddoomihii Gobolka Mudug ee wakhtigaas- ”Linea Tomasselli”-labada beelood ee ugu waaweynaa gobolka Mudug. Odayaasha xog-ogaalka ah iyo nabadoonnadu waxa ay qabaan in Dhaq-dhaqaaqii Gobannimadoonka Soomaaliyeed iyo dawladihii Soomaaliyeed ay ahaayeen kuwii ugu horreeyey ee jebiya xeerka lahaanshaha dhulka. Dhaq-dhaqaaqa Gobannimadoonku, xilligii uu la halgamaey xoogaggii gumeysiga, si uu u helo taageero iyo midnimo shacab, waxa uu dadka ugu baaqey fikrado cusub waddani ah**:** Soomaalidu dhammaanteed in ay walaalo tahay, in laga fogaado qabyaaladda, lagana tanaasulo nidaamka lahaanshaha dhulka ee qabiilka. Hordhaca Dastuurka Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed (SYL) waxa ku qoran:

“Himilada siyaasadeed ee SYL waa sare u qaadidda walaalnimada u dhexeysa Soomaalida oo dhan, gaar ahaanna dhallinyarada, si loo gaaro midnimo qaran, taas oo baabi’isa kala qaybsanaanta Soomaalida ee ab-wadaagnimada, qabiilka, diinta iyo kala sarreynta bulshada.”

Shacabku si qiira badan ayaa uu u qaatey uguna dhaqmey fikradaha cusub intii lagu jirey halgankii dhaq-dhaqaaqa gobannimadoonka. Axdi Dawladeedkii ugu horreeyey 1961dii, iyo kii ku xigey ee la dhaqan geliyey 1979kii iyo sharciyo kale ee dawladeed, iyaga oo aan la kala soocin, waxa ay sharciyeeyeen in dhulka iyo kheyraadka ku sugan dushiisa iyo hoostiisaba ay yihiin hanti qaran, muwaadin kasta ee Soomaaliyeedna meel kasta ka degi karo Jamhuuriyadda, intifaacsiga kheyraadkana loo siman yahay.

Arrintaasi waxa ay sababtey in qabiillo iyo ab-wadaag kala duwani is-dhex degaan, halkaana lahaanshihii dhulku ku hakado. Qabiillo iyo ab-wadaag ku noolaa dhul kheyraadkiisu yar yahay waxa ay ka faa’ideysteen fursaddan waxa ay “is-fidin” ku gaareen dhul-daaqsineed kale oo kheyraad badan leh oo ay qabiillo iyo ab-wadaag kale lahaayeen. Tan waxa ay si gaar ah uga muuqataa gobolka Mudug, oo khilaaf dhul-daaqsineed dagaal ka dhex ridey laba ab-wadaag oo jaar ah dabayaaqaddii 1980kii. Markii ay tamar yareysey dawladdii Soomaliyeed, daaqsatadii dhulka hodonka ah hore u laheyd iyo kuwii cusbaa, oo si qoto dheer ugu xidideysteen dhulkaas, waxa ay iskaga horyimaadeen isticmaalka dhulka. Soomaali badani waxa ay aaminsan tahay in burburkii dawladda qaran iyo bilowgii dagaalka sokeeye ay lug weyn ku leedahay arrinta khilaafka dhul daaqsineedka ee meelaha qaarkood iyo damaca beelaha qaarkood ee ku wajahan helitaanka dhulka kheyraadka badan ee koonfurta dalka.

Sheekooyinkan waxa laga soo tebiyey daaqsatada ka qayb gashey daraasadda:

Dhacdada 4

Wakhtigii gumeysiga Ingiriiska ee afartanaadkii, guddoomiyihii Ingiriiska ee Qardho ayaa u dulqaadan waaey iskahorimaadyada sida is-daba-joogga ah uga dhex-dhacaey beelaha deriska ah ee bariga iyo galbeedka degaanka Qardho, iyaga oo isku haya

daaq. Si uu u joojiyo iska horimaadka, waxa uu mamnuucey in daaqsatadu isu guurto, isna dhex-degto. Guddoomiyuhu waxa uu Qardho isugu yeeray odayaal, una akhriyey sharciga cusub ee uu soo saaray, kaas oo mamnuucaya isu-guurka beelaha kor ku xusan. Waxa uu intaa raacshey in qofkii sharcigan hadal ka soo celiya uu si toos ah u xirayo. Odayaashii goob-joogga ahaa waa aamuseen. Hase yeeshee, mid ka mid ah ayaa farta taagey oo isu-taagey in uu ka hadlo macna darrada xeerka cusub. Waxa uu yiri, "Mudane, ii fasax in aan su'aal ku weydiiyo, oo haddii aad doonto iyada ka dib i xir." Guddoomiyihii isaga oo yaabban ayaa uu u fasaxay odaygii su'aasha. Odaygii waxa uu yiri, "Mudane, amarkii waan qaadaneynaa, laakiin marka roobku uu dhinac ka da'o, dhinaca kale ma adiga ayaa roobka ku amraya in uu ka da'o?" Guddoomiyihii Ingiriiska ahaa waa wareeray, waxa uuna fahmey macno darrada sharcigan, iyo in uu khaldan yahay isagu. Dib ayaa uu ula laabtay sharcigii cusbaa, hase yeeshee waxa uu xabsiga u taxaabey odaygii, maaddaama uu jebiyey amarkiisii ahaa in aan laga daba hadli karin.

Dhacdada 5

1995tii nin la yiraah Max'ed Saciid Qoordheere waxa uu ka degey goob aad u daaq fiican meesha la yiraah Kabadhilis oo ku taal xeebta Noobir ee gobolka Bari. Goor aroor ah ayaa uu Guure Cismaan qoyskiisu soo ag degey. Qoordheere ayaa soo boodey oo ku amray qoyska cusubi in uu si deg-deg ah meesha uga guuro. Guure waa iska dhegatirey. Qoordheere oo aad u carooday ayaa ku laabtay gurigiisa oo soo qaatay qori, si toos ahna xabbado ugu ridey Guure, wilkiisa curadka ah iyo nin saddexaad oo dhexdhexaadin u yimid. Wiilkii Guure isla goobtaas ayaa uu ku dhintey. Waxa uu isna dhaawacey ninkii wax dhexdhexaadinaey, oo la lagu magacaabo Max'ed Carris. Odayaashii ab-wadaagta la ahaa Qoordheere arrintan waxa ay u arkeen mid culus, mudan tahayna in maxkamad rasmi ah la geeyo. Waxa ay Qoordheere (gacan-ku-dhiigle) geeyeen maxkamadda Shareecadda ee Bossaso oo isla markiiba dil ku xukuntay, kaas oo la fuliyey. Jifidii dembiiluhu ka dhashay waxa ay doorteen in ay maxkamadda u gudbiyaan ninkaas laba sababood awgood: (b) in ay ka hortagaan isku-dhac intaa ka badan (qoysaska dembiilaha). (t) in ay is-dhaafshaan dembiilaha aan xilkaska ahayn si aanu dembiyo kale u gelin.

Dhacdada 6

Sannadkii 1987dii, magaalada Galdogob waxa ka dhacey dhowr iska-hor-imaad oo la xiriira muranno ka dhashey dhul daaqsineed iyo isticmaalka daaqa taas oo dhexmartey laba jilib hoosaad ka tirsan beel weyn oo ku dhaqan hal goob. Labada jilib-hoosaad midka tiro ahaan yar oo weligiis daaqi jirey ama lahaa dhulka, ayaa diidday in lala wadaago. Arrinta waxa dhax-galey odayaal ka tirsan jilibada kale ee ku dhowdhow, waxa ayna ku xalliyeen si waafaqsan xeerka daaqa oo ah in nabad lagu wadaago daaqa. Sababta ay sidaa u go'aansheen waxa ugu wacnaan karta iyada oo xilligu abaar ahaa. Badanaaba, xukunnada xeerku waa is rog-rogaan, sidaas aeyna kaga duwan yihiin xeerarka rasmiga ah, oo isula beddelaan baahiyada duruufeed iyo xalaadaha bulsho ee wakhti gaar ah jira. Siyaabo iyo go'aanno kala duwan ayaa dhici karta in ay hal arrin u isticmaalaan laba bulsho oo jaar ah wakhtiyo kala duwan abaar ama xilli roobaad. Kheyraadka, xaaladaha xilliyada iyo duruufaha nabadgelyo ayaa door xasaasi ah ka ciyaara qaabka xeerka loo dhaqan gesho.

Dhacdada 7aad

Sannadkii 1999kii ayaa bulsho degganeyd Darowda, Bilcil Quraan oo koonfurta ka xigta Dharkayngeenyo, iyo nin ka mid ah daaqsato dool ah ayaa khilaaf ku dhex-maray sameynta Berked uu nin daaqsatada ahi doonaey in uu halkaas ka dhisto. Dadkii degaanka ahaa waxa ay ku doodeen in ninku aanu xuquuq u lahayn dhulka daaqsinta in uu kaabayal ka dhiso, waayo taasi waxa ay raacatada doolka ah u ansaxineysaa lahaanshaha dhul daaqsineedka. Labadii qolo mid kasta waxa ay isu soo diyaarisey dagaal, hub baana la isu gurtey. Nasiib wanaag, odayaasha jilibyada kale ee ku dhaqnaa aaggaas ayaa dhex-galey oo ugu baaqey shir ay isugu yimaadaan labadii qaybood. Ugu horreyn, waxa ay amreen in labaduba hubka dhigaan, kadibna dhexdhexaadin aey u gudbeen. Ugu dambeyntii, odayaashii waxa ay soo saareen weedh ay ku cambaareynayaan ninkii martida ahaa ee jebiyey xeerkii u yiil daaqa oo aan u oggoleyn daaqsato dool ah dhismayaal, balse uu daaqa ka faa'ideysan karo. Marar badan ayaa xukunnada waxa lagu saleeyaa qaddarin la siinayo ka-hor-tagga iska-hor-imaad in ka badan doodda sharci. Xallinta iska-hor-imaadyadu waa awoodda siyaasadeed ee odayaasha, iyada ayaana u sabab ah xurmada ay dadku u hayaan odayaasha. Ka mamnuucidda ninka martida ah in uu ka dhisto Berked meel daaq oo uu marti u yahay waxa ay lid ku tahay sharciga qaran ee sheegaya in muwaadiniintu leeyihiin xuquuq siman, dalkana kaga noolaan karaan meel kasta oo ay doonaan.

Dhacdada 8

1999kii, nin geel-jire ah ayaa dhexmariyey geeliisa dooxo la yiraahdo Dhidayo oo ka tirsan gobolka Sool. Isaga oo dhabbaha haya ayaa waxa ka soo hor baxay nin qori sita, oo istaagey geela hortiisa, una diidey in uu gudbo. Geel-jirihii waxa uu su'aaley ninkii sababta uu geela u celiyey? Waxa uu ugu jaawabey in geelu ka tago digo xoolaha kale cudur u keenta, ariga iyo idaha daaqa dooxada. Geel-jirihii caqli-gal waa ula muuqan waaey hadalku, waana uu diidey in uu ka noqdo qorshihiisa, waxa uuna goostey in uu horey u kaxeeyo geela. Labadii nin xaalku waa ka xumaadey. Odayaal dhaqaameedkii meesha ayaa ku baqaay shir in la isugu yimaado. Natiijadii shirku waxa ay noqotey in, sida xeerkoodu dhigayo, ariga, idaha iyo lo'da oo keli ah loo gaar yeelay dooxada, geelana aan loo oggoleyn in uu halkaas daaqo ama dhex gudbo. Markii ay caddeeyeen xeerkaas, odayaashu waxa ay gooyeen go'aan aan caadi ahayn, kaas oo ah in markan uu geelu ka gudbo dooxada isaga oo aan daaqin, shuruudduna tahay in aanu ninku mar dambe dooxada kula soo noqon geeliisa.

Su'aashu waxa weeye sababta ay odayaashu uu qooni yeeleen xaaladda geelan. Waxa ay leedahay saddex sababood : - b) Xeerka waa la rog-rogi karaa, waxa uuna inta badan ku saleysan yahay gor-gortan t) Geel-jiraha socodka ahaa oo aan aqoon u lahayn xeerarka daaq ee dooxada, iyo j) In laga hortago daagal qarxa.

Gabayada Daaqa iyo Maareynta Dhulka

I. Samatar Baxnaan

Samatar Baxnaan waxa uu ahaa gabyaa Soomaaliyeed oo caan ah. Gabaygiisan soo socda waxa uu if-tiiminayaa dareenka qalaad iyo walwalka geel-jiraha iyo geeliisuba ka mutaan dhul-shisheeye. Marka dhanka sharciga laga eego, gabyaagu waxa uu tilmaamayaa maqnaanshaha heshiis daaq ka dhexeeya beeshiisa iyo beelo kale, kuwaas oo geel-jiruhu rabo in uu geeliisa geeyo. Isaga oo aan ogeyn waxa ku dhici doona geeliisa, sida xatooyo, dhac, iyo waliba dil marka uu geeliisa u hayaamiyo dhulka Isaaq, waxa uu yiri : -

“Wax badan baad Garowiyo fadhidey guda Nugaaleed ‘e
Wax badan baa gawaammada Ildheer gool ku laacdamay ‘e
Geelyahow galbeed iyo la qabey gurigi Iidoor ‘e
Iminkana goldheeraha sare yaan kuu gudbinayaaye
Garanuugle weeye halkaad galabta joogtaa e
Gabaarreyda meeshii lahayd baad ku geediyiye
Gunbuur iyo Cigaal Aadan baa goolka kaa qali e
Ga-gaabyadii Dhogori baa guri habeenkii e’’

Gabaygani waxa uu tilmaamayaa laba waxyaalood: b) Walwal waxa ku dhici kara geel-jiraha marka uu geeliisa geeyo dhul aan qabiilkiisu degganeyn, heshiis daaqna la lahayn, iyo t) Dal-tabyada geeliisa ku dhaceysa inta uu degaankiisa ka maqan yahay.

II. Khalif Xassan Walah - Gabyaa

Qaybta hore ee gabaygan soo socda waxa uu sharaxayaa hab-daaqsineedka raacatada ee guurista is-daba joogga ah u dhaqdhaqaaqa meelaha roobku ka da’o iyaga oo raadinaya daaq. Waxa ay tilmaameysaa in raacatadu had iyo jeer u baahan tahay daaq, taas oo micnaheedu yahay in la daaqu wadaag yahay xitaa meelaha ka baxsan soohdinta beesha**.** Labada duluc ee ugu dambeeya gabaygu waxa ay tilmaamayaan xeerka is-taakuleynta ee ka dhexeysa xubnaha beesha wakhtiyada adag. Inta lagu jiro abaaraha dheeraada ee biyaha iyo daaquba gabaabsi noqdaan, xeerku waxa uu ku amraa xubnaha tolku in ay si walbaba isu taakuleeyaan. Qofkii aan sidaa waafaqin waxa xukunkiisu noqdaa in la go’doonsho, aanna la kaalmeyn marka uu u baahdo.

“*Dhoosaali iyo Eerago dhoolka ka hilaacey”*
Geeddigu dhibweeyee haddii dhiga-jac loo guuro
Ninka arwka kula dheeli tira kuna dhaqaaleeya
Iyo kii dhabbada kugu maray aan hoosna kuu dhuganin
Midba wuxuu dhitastay baa ugu jira dhiisha caanaha e.”

III. Samatar Baxnaan

Marka la eego gabaygan soo socda, beeluhu sida badan waxa ay u guuraan dhulka doogga iyo naaqa leh ee beelaha kale xilli-roobaadka, Guga iyo Dayrta. Gabyaa la yiraahdo Yawle ayaa tiriyey gabey guubaabo lid ku ah beel kale oo ay jaar yihiin. Samatar Baxnaan oo ka dhashey beesha la abbaarey ayaa u jaawabey gabyaaga. Waxa uu uga digey Yawle in gabeygiisu colaad dhex-dhigayo labada beelood oo lahaa xeer daaq. Waxa uu saadaallinayaa in xilliga roobka marka la gaaro, Yawle beeshiisu aaney u suurogeli doonin in ay xoolohoodu daaq iyo biyo u yimaadaan dhulka beesha uu colaadda u muujiyey, sababta oo ah gabey-gan ayaa carqaladeeyey xiriirkii ka dhexeeyey beelaha:

“ Haddii at dayrtu waa mudan Hartiye idinka soo meerto.
Meer meerka Gubadood haddii laga maqnaan waayo.
Sida maylka geedigu hadduu mudh isa soo siiyo.
Oo Muusayaal nala dersaan nagama maarmaan e.
Maatada xaggee reer Cismaan madaxa loo saari.
Masbaa kagu tufaye ceelka yaa mar uga soo dhaamin.
Magligaad afaysaa ku goyn muruqa Yawlow e”

3.3 Xeerarka Maareynta Dhul Daaqsineedka

1. Dhulka iyo kheyraad kasta ee laga helo waxa leh oo ka wada faa’ideysta beesha sida rasmiga ah goobtaas ugu nool.
2. Daaqsatadu daaqa waa wadaagaan, iyada oo aan loo eegeyn beel ama meesha ay ka timid marka ay baahidu jirto.
3. Waa mamnuuc in daaqsatadu gubto xerada iyo digada; xerada waxa loo keydinayaa isticmaalka mustaqbalka, si uu u badbaaddo degaanku iyada oo aan loo baahnaaneyn in dhir kale la jaro, halka ay digadu waxtar ugu leedahay beeraha oo looga baahdo meelaha qarkood.
4. Gobollada qaarkood waa la oggol yahay in la dego bartamaha dooxooyinka.
5. Raacatadu waa in aaney bur-burin, gubin ama jarin baadka la-wadaago iyo geed miroodka.
6. Raacatada martida ahi ama kuwa degaanka ahi kama ganacsan karaan baadka iyo dhul daaqeenka.
7. Raacatadu waa in aaney ka sameysan xirmooyin ama beero gaar ah dhul daaqeenka.
8. Qoysask raacatadu waa in ay isu jirsadaan masaafo hal kiloomitir ah, si loo helo goob ay daaqaan ama ku meyracdaan xooluhu galabtii iyo aroortii, taas oo loo yaqaan *kobta mayracashada* ama *naylo daaqeen***.**
9. Doogga ama cowska lama jari karo meel kalena looma rari karo.
10. Raacatada doolka ahi waa in ay xushmeeyaan xeer daaqsineedka, nabadna kula daaqaan beesha marti gelisey.
11. Guddi odayaal ah oo ka kooban beesha degaanka ah iyo tan doolka ah waa in ay xalliyaan khilaafka ka dhex dhaca labada dhinac.
12. Bahda raacatada ahi waa in ay gacan isa siiyaan gaar ahaan xilliga abaarta iyo hayaanka

13. Si aan looga degin, ninka sahanka ahi waa in uu calaamad muuqataa, sida ood qoyan ama sumadda geeliisa, ku muujiyaa xerada/jabadka, si uu u baajiyo in aan midka kale ka degin

3.4 Xeerarka "Keymaha iyo Ugaarta"

Laga soo bilaabo maamulkii gumeysiga illaa iyo dawladdii Soomaaliyed, keymaha iyo dhirta waa la ilaalin jirey si looga hor-tago nabaad-guur. Ugaarta waaweyn sida geriga, maroodiga, jeerta, yaxaaska iyo deerada lama oggoleyn in la laayo sabab la'aan. Hase yeeshee, burburkii dawladdii Soomaaliyeed markii hubkii qaranku gacanta u galey dadka rayidka ah, ugaadhii, mid yar iyo mid weynba, si isdabajoog waxa loo laaey ganacsi iyo cunto. Cilmi-baareyaasha daraasaddu waxa ay la falanqeeyeen arrinta kooxo la xuley, weydiiyeenna xeerar dhaqameedka difaaca ugaarta iyo keymaha. Cilmi-baaristani waxa ay mujisey in aqlabiyadda ka-qayb-galeyaashu (80%) qireen jiritaanka xeerar difaaca keymaha, halka tiro yar (20%) sheegtey in aaney jirin xeerar noocaas ahi. Xeerku waa mamnuucaa jaridda dhirta la harsado iyo geed-miroodka, goynta iyo gubista inta dhaafsiisan baahida aasaasiga ah. Heestan Soomaaliyeed waxa ay xoojineysaa xanaannada dhirta la harsado: "*Dhirtaba geed aan la jarin iyo waxa jira lama garacaan*". Hees kale oo geela loogu heeso waxa ay tiraah: "*Haddii hadi dhaco oo hareerigu hoosta ka engego, adaa hoogey e, xaggeed har u dayan,"* Xeerku waxa uu oggol yahay goynta ama gubista dhirta qallalan ee xaabo ama dhuxul ahaan loo isticmaalayo. Haddii loo baahdo, xoolo dhaqatadu waa ay ka goosan karaan dhirta qoyan laamaha si ay ugu ootaan xeero xoolaad, hase yeeshe waa in ay beeqaamiyaan intii suurta gal ah oo jaraan laamaha dhinacyada ee geedka. Waa mamnuuc in geedka gunta ama baarka sare laga jaro.

Dawladdii Soomaaliyeed ee dhacdey waxa ay lahayd hay'ad lagu magacaabo "Wakaaladda Dhirta iyo Daaqa", taas oo lahayd barnaamij maareeya daryeelka daaqa, kana koobneyd ilaalinta dhirta iyo duur-joogta. Wakaaladdu hawlaheeda waxa ka mid ahaa in aan la gubin dhirta wax dhaafsiisan baahida aasaasiga ah, iyada oo la mamnuucey in dhirta loo gubo dhuxul la dhoofinayo. Hase yeeshee, dagaalkii sokeeye oo dabo dheeraadey iyo sicirka dhuxusha ee sayladaha dibedda oo koror ku dhacey awgood, dhuxushu waxa ay noqotey ganacsi si weyn looga fa'iido 11kii sannadood ee dawlad la'aantu jirtey. Haddaba, si looga hor tago falkaas xun ee dhoofinta dhuxusha, waxa la adeegsadey habab kala duwan. Xoola dhaqatada dhinaceeda waxa ay ku adkeysatey fulinta xeerka mamnuucaya gubista dhirta wixii aan ka ahayn baahi asaasi ah. Maamulka Puntland labo tallaabo ayaa uu qaadey 1999kii: tan hore, waxa uu soo saarey sharci mamnuucaya dhoofinta dhuxusha, waxa loo xil saarey ciidan gaar ah oo ka hor taga ganacsigeeda. Ciidanku waxa uu baadigoobi jirey, gacantana ku dhigi jirey, gaadiidka sida dhuxusha sharci darrada ah ee Puntland dhex maraya, waxa uuna xirey goobaha xeebaha ee dhuxusha laga dhoofin jirey; tan labaad, isaga oo khubaro la tashanaya maamulku waxa uu la xiriirey hay'ado caalami ah oo ka shaqeeya ilaalinta degaanka sida IUCN iyo UNDP, oo wadajir codsi u hor dhigey dalalka loo dhoofiyo dhuxusha sida Imaaraadka Carabta (UAE), Kuweyt iyo Sacuudiga in ay gacan ka geystaan joojinta ganacsigan sharci darrada ah. Habka dambe aad ayaa loogu guuleystey, iyada oo waddamadii loo dhoofin jirey dhuxushu mamnuuceen in Puntland

dhuxul looga qaado dalalkooda, ugu dambeyntiina, ganacsigan intiisa badan waa xirmey.

Waxa yididiilo lahayd xaqiiqda ah in dhammaan dadkii lagula kulmey gobollada Puntland dareensan yihiin in nabaadguur ba'ani socdo, oo ay sida badan sababtey ka ganacsiga dhuxushu, waxa ayna muujiyeen xammaasad weyn oo ay kaga qayb qaadanayaan barnaamij kasta oo lagu ilaalinayo degaanka, loogana hortegayo xaalufin intaa ka badan. Markii lagala tashadey sidii loo sameyn lahaa nidaamka xirmeynta dhul-daaqeenka, intooda badani waxa ay tageereen in la abuuro dhul daaqsineed ballaaran oo la seereeyo. Waxa ayse ka deyriyeen in sameynta dhul- daqsimeed xaddadan, oo baaxad yar, uu keeni karo xaaluf aad u badan maaddaama ay xooluhu isugu soo dhacayaan iskuna ciriirinayaan marka seerayaasha kooban la furo.

Dhacdada 9

1996kii beel-hoosaad reer miyi ah ayaa u guuray koonfurta Laas-caanood, dagayna dhul ay leedahay beel kale oo la jaar ah iyada oo raadinaysa daaq fiican. Raacatadii martida ahayd waxa ay bilaabeen in ay ganacsi u jaraan dhirta. Dadkii degaanka degganaa ayaa u diiday, kuna khasbay in ay gaadiidka ka rogaan waxa ay saareen. Geeri halkaas kama dhicin, laakiin dhaawac aad u culus ayaa dhacay. Gole odayaal ka kala socda labada kooxood ayaa dhex-galay arrinta, sameeyeyna xukun waagii bamde noqday xeer, kaas oo oranaya: "dhacdadan wixii ka dambeeya, waxa aynu isku af-garaney in aannu qofna jari karin, ama waxyeello u geysan karin, dhirta. Balse, daaqsatadu waa ay soo doonan kartaa daaq." Dhaawacyadii labada qaybood kala gaarey waa la kala sintay, dhibaalkiina waa la kala qaatey.

Dhacdada 10

1999kii beel ayaa u hayaantey dhanka Koonfeed ee Laas-caanood iyada oo daaq doon ah, waxa ayna bilowdey in ay gubaan dhirta si ay dhuxul ganacsi uga sameystaan. Dagaal ayaa ka dhex oogmey beeshii hayaanka ahayd iyo tii degaanka ahayd, halkaas oo ay ku dhinteen afar qof, laba dhinaciiba, saddexna dhaawac noqotey. Odayaasha labada beelood ayaa kulmey, xalliyeyna arrintii. Xeer ayaa halkaas ka soo baxey, kaas oo qeexaya: "Raacatada socotada ahi xaq uma laha in ay gubto dhirta keymaha ay beesha martisoortey leedahay."

Xeerarka Keymaha iyo Dhoofinta Dhuxusha

Kuwan waxa ka mid ah: 1) kuwa isticmaalaya waa in aaney sinnaba wax u yeelleyn keymaha, ha noqoto gubid ama jarid. 2) waxa xaaraan ah in la gooyo, ama dhuxul loo gubo, dhirta keynta in dhaafsiisan baahida aasaasiga ah. 3) Waa in aan la goyn dhirta harka ama miraha leh. 4) Lama oggola in kaamam ku meelgaar ah laga sameeyo keymaha ama dhul daaqeenka.

3.5. Xeerarka Wadaagga Biyaha

Woqooyiga iyo bartamaha Soomaaliya waxa lagu yaqaan cimilo lama-degaan-xigeen ah. Puntland waxa ay ku taal figta Waqooyi Bari ee aaggaas. Xaaladaha cimilo ee Puntland waxa astaan u ah roob sannadeed aan joogto ahayn ee dhan 100mm marka laga reebo joogagga Caal-madow oo hela roob sannadeed dhan 300mm. Ma jiraan webiyo mara gobollada, waana kooban yihiin ilo biyeed joogto ahi. Uumi-baxa oo aad u sarreeya ayaa sii adkeeya xaaladaha cimilo ee qallafsan, kana dhiga dhulka mid ku habboon qaab-nololeed raacato keli ah.

Gobolku waxa uu roob helaa laba xilli keli ah sannadkii *(Gu: Maarso, Abriil iyo Maajo, iyo Dayr: Sebteembar, Oktoobar iyo Nofeembar)*, labada xilli kalena waa qalleyl *(Xagaa: Juunyo, Luuliyo iyo Agoosto iyo Diraac: Diseembar, Janaayo iyo Febraayo)*. In kasta oo dhulalka xeebaha ay ka jiraan tiro yar oo ceelal sannadka oo idil biyo leh iyo weliba ceelal-gacmeedyo dooxooyinka gobollada Mudug iyo Nugaal, haddana Puntland inteeda kale ma laha biyo dhulka hoose si fudud looga gaari karo. Xilliyada abaaraha dhaadheer, heerka biyaha ceelashu waa uu dhacaa, taas oo ku kallifta in daaqsatad xoolahooda u arooriyaan bar-biyoodyo tiro yar oo durugsan. Gabaabsigan biyaha waxa daaqsatada uu ku khasabaa, wixii ka horreeyey xilligii gumeysiga, in ay dhexdooda ka dagaallamaan, iyo in ay u haajiraan koonfurta. Iska-hor-imaadyadan, oo sida badan ku xusan taariikhda Soomaalida, waxa ay ku wajahnaayeen gacan ku haynta bar-biyoodyada rasmiga ah ee gobolka.

Kooxda cimi-baaristu waxa ay booqatey 147 bar-biyood, oo ka kooban ceelaal gaa-gaaban, durdur-xilliyeedyo, balliyo iyo baraago. Ka-qayb-galeyaasha daraasadda badankood waxa ay ku war bixiyeen in biyaha ceelasha riiga ah, durdur-xilliyeedyada iyo biyaha degaanka guudba la wadaago, ayna xeer tahay in dadku wada intifaacsadaan. Sababtu waxa weeye, ilahan biyood waa kuwo Eebbe dadka ugu deeqey, oo jiilkii hore laga wada dhaxley, ama waa kuwo ay dadku ku heleen gargaar aadane oo ay baxsheen hay'ada guud, sida dawladda qaran amaba ururrada caalamiga ah.

Ceelasha gacanta lagu qodey sida badan waa kuwo la wadaago sida ay oraahyadan Soomaaliyeed tilmaamayaan: *"Ceel nin baa qoda ee nin ma cabbo"* iyo *"Ceel ninkii qodey waxa uu leeyahay magaciisa iyo maaxdiisa (oo keli ah)." I*n kasta oo biyaha ceelashan la wadaago, kuwa noocan ah, illaa iyo xad, waxa loo nisbeeya qolada shakhsiga qodey ceelka, ama bixisey maalka lagu qodey, mararka qaarkoodna sheegta milkiiyad. Meelaha qaarkood, marka baahida biyuhu cirka isku shareerto, lahaanshaha ceelashani waxa ay ku laabataa milkiiyad gaar ahaaneed. Marka la garab dhigo berkadaha, waxa mar walba milkiiyaddooda leh shakhsiyo gaar ah, oo iyagu biyaha u isticmaala baahidooda amaba iibiya.

Xeerarka biyaha aan kor uga soo hadalney marka laga soo tago, ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay sheegeen xeerar kale oo tiro badan: bar-biyoodyada waxa xeer ah "sida loo soo kala horreeyey in loo cabbo." Guddi biyood ee barta laga qabtey ayaa aalaaba diyaariya liiska kala horreynta, kaas oo la xurmeeyo. Lama oggola in kala

horreyntaas la khilaafo. Xoolaha tabarta yar ee idaha iyo riyaha ayaa mudnaanta ka leh geela, lo'da iyo dameeraha; dhaanku waxa uu mudnaan ka leeyahay inta kale. Waayo dhaanku waa in sida ugu dhakhsaha badan uu carruurta iyo haweenka looga yimid gurigii biyaha ugu geeya; xoolaha ay dumarka iyo caruurtu soo arooriyaan waxa ay leeyihiin mudnaan gaar ah oo waa la hor mariyaa; ugu dambeyntiina, iyada oo ay hadba ku xiran tahay duruufta, sida biyaha oo gabaabsi noqda, geelu waa in uu ceelka u dhaafaa xoolaha tabarta yar, biyahana u doontaa bar-biyoodyada kale ee fogaanta jirta. Markii la weydiiyey in ay jiraan xukunno dadka ka hor yimaada xeerka biyaha, ugu badnaan dhammaantood dadka ka qaybgaley cilmi-baaristu, waxa ay ku jawaabeen in ay jiraan, halka ay tiro yar ay la ahayd in aaney jirin. Xilliga jiilaalka, marka ay baahida biyuhu badan tahay, beesha degaanku waxa ay guddi u xil-saartaa maamulka biyaha. Marka ay dhacdo in lagu xad gudbo xeerka biyaha, guddigu waxa uu gooyaa xukunno ciqaabeed, kuwaas oo ku xiran hadba inta ay dhibtu le'eg tahay, una dhexeeya cambaareyn, takoorid iyo iyada oo kan/kuwa xad-gudubka ku kacey lagu ganaaxo gowraca neef ari ah, ama awrka gur-gur.

Iska-hor-imaadyada ka Dhasha Biyaha

Daraasaddu waxa kale oo ay iftiimisey in ay dhacaan iska-hor-imaadyo ka dhasha gacan ku heynta ceelasha iyo durdurrada, halkaas oo ay isku dayaan daaqsatada is-fidinta ku loollamaya in ay khasab kula qaybsadaan, ama bara-baxshaan, kuwa degaanka deggan. Iska-hor-imaadyo is daba joog ah ayaa ka yimaada isticmaalka biyaha miyiga. Iska-hor-imaadyadu sida badan waxa ay ka kacaan khilaaf ka yimaadda kaltanka, sheegasho mudnaan, qof xoolihiisa ceelka ku sii daaya iyada oo xoolo kale cabbayaan, qof biyaha ku raajiya xoolihii oo ku sii rakaadiya iyada oo xoolo kale oomman yihiin sugayaanna, daaqsatada marida ah oo aqoonsan weyda xuquuqda iyo xurmada ay leeyihiin kowa degaanka ahi, iwm. Marka laga hadlo sida ay biyaha u wadaagaan beelaha colaadu ka dhexeyso ee deriska ah, dadka ka qaybgaley daraasadda badankood waxa ay sheegeen in ay jiraan xeerar saldhig u ah arrintan, si ay u suurto gasho in beeluhu wadaagaan biyaha. Xeerarkan waxa ka mid ah: beesha ama qolada leh bar-biyoodda waa in ay u oggolaataa biyaha kuwa ay is-hayaan marka baahiyi timaaddo. Xeerku waxa kale ee uu waajib ka dhigey in odayaasha maamula biyaha ee beesha degaanku difaacaan ragga beesha colaaddu ka dhexeyso inta ceelka la joogo. Sida badan, dumarka iyo caruurta ayaa la door bidaa in ay xoolaha u waraab geeyaan ceelka. Beesha socotada ah dhankooda waxa laga doonayaa in ay ilaaliyaan dhowr waxyaalood, sida in ay odayaal wada-xaajood gala iska horreysiiyaan inta aaney ceelkaas u soo guurin, waa in aaney ka muuqan ceelka shakhsiyaadka gefka galey si taasi aaney uga weyrixin dadkii gefka laga galey ee degaanka ah marka ay isha ku dhuftaan.

Dhacdada 11

1989kii, ceelka Hol-Hol ee u dhow tuulada Xuddun oo ka tirsan gobolka Sool, isku-dhac ku saabsan mudnaanta xoolaha hor cabbaya ayaa dhex marey laba beelood oo jaar ah. Isku- dhacaasi waxa uu sababey 4 dhimasho ah, 2 dhinaciiba. Odayaasha labada dhinac ayaa isu yimid oo xalliyey khilaafkii, waxana la isku raacey in mudnaanta hor-

cabidda ay gaar u leedahay beesha degaanka ah. Tan labaad, diyo lama kala qaadan maaddaama tirada dhimashadu is le'ekeyd. Balse,hal malyan Shillin ayaa loo soo qaadey ubadka waalidka dhintey oo lagu xukumey beeshii socotada aheyd ee iska hor-imaadka sababtey. Tan saddexaad, marka la eego dadka halkaas ku dhaawacmey, mid kasta waxa loo qiimeeyey nabarrada gaarey, dhibaalkiisana waa la siiyey. Xaaladdan marka la derso, waxa xiiso badan arrinta ah in dhiigga diyadu uu gebi ahaan is-tirtirey maaddaama dhinac kasta labo qofood laga diley. Wax diyo ah lama kala qaadan, halka dhaawacyada la qiimeeyey, lana baxshey.

Dhacdada 12

Bartamihii sannadkii 2000 magaalada Goldogob, nin reer miyi ah ayaa diiday kala-horreynta ama safka waraabka xoolaha. Waxa uu ku adkeystey in ay xoolihiisu cabbaan isla marka ay yimaadaan. Markii guddiga maamulka biyuhu la hadley-na, dagaal ayaa uu billaabey oo waxa uu toorrey ku dhaawacey mid ka mid ah guddiga. Guddi arrintan galey waxa uu ku ganaaxey ninkaas in laga gowraco awrka gur-gur iyo weliba isaga oo siiya xubinta guddiga uu dhaawacey 5 neef oo ari ah. Awrka gur-gur iyo hasha irmaan waa xoolo aad u qiimo badan. Gowraca awrka gur-gur waxa uu milkiilaha ku yahay xukun ciqaab kulul; waayo waa gaadiidka ugu muhiimsan ee reer miyiga. Shaki kuma jiro in xukunkaasi ku ahaa milkiilaha mid aad u xanuun badan.

Dhacdada13

Sannadkii 2000, labo qolo oo ka kala tirsan labo beelood oo jaar ah waxa ay iskaga horyimaadeed cabbidda ceelka Xumbo-weyne, oo galbeed ka xiga Garoowe. Biyaha ceelkan salka hoose ayaa loogu dhacaa, oo waxa laga sugaa maax, taas oo wakhti qaadata. Labadaas qolo waa dagaallameen, halkaana nin ayaa ku dhintey. Arrintu si kastaba ha ahaatee, odayaasha labada dhinac waxa ay galeen dhex-dhexaadin, go'aansheenna in qolada degaanka ah, oo awalka hore u maamuli jirey ceelka, ay leedahay gacan-ku-heynta iyo maamulka ceelka. Xukunku waxa uu noqdey in ninkii la diley diyo laga baxsho, ganaax xaal ahna lagu xukumay qoladii xeerka biyaha jebisey.

Gabey uu tiriyey gabyaa weyn ee Soomaaliyeed - Cali Aadan (Cali Dhuux).

Cali Aadan (Cali Dhuux) waa gabyaa caan ah oo in badan lagu arko suugaanta Soomaalida. Cali ayaa hashiisii "Cartan" oo luntey ka helay dhulka daaqa leh ee Hawd oo ah degaan ka baxsan kiisa. Isaga oo wada hashii ayaa Cali keeney bar-biyood muhiimad weyn leh si uu u waraabiyo hashiisa. Bar-biyoodkan waxa taariikh ahaan lahaa Reer Dalal, qolo Ogaadeen ah, laakiin Habar Yoonis, qolo Isaaq ah, ayaa la wareegtey ceelka wakhti aan fogeyn. Markii uu Cali Dhuux hashii dul geeyey ceelka, waa loo diidey in hashu ka cabto. Isaga oo ka careysan sida loola dhaqmey, ayaa uu Cali Dhuux tiriyey tixdan gabeyga ah oo sawir ka bixineysa cabasho jebinta xeer wadaagga biyaha, isla mar ahaantaana, ku boorrinaya Reer Dalal in ay u dagaallamaan dhiigna u daadshaan dib u hanashada ceelkan muhiimadda leh ee laga dhacay:

" Cartaney Cammuud la isu diid iyo Ceelkii Reer Magan 'e
Cabdullaahi iyo Yuusuf baa ciidda hoos galay 'e

Haddey curaddadii nool yihiin waad cabbi lahayd 'e
Cayn iyo Hartaad leedahaye caraqda fuuq fuuqso''.

Dhacdada 14

Nin ka soomay (iska af-qabtey) cabidda biyaha 30 Sano

Cabdullaahi Maxamed Dhafar waxa uu ka soomey cabidda biyaha la billaabo 1971gii illaa markii uu geeriyoodey oo ahayd 2001dii. Xilli ay abaar adag jirto ayaa Cabdullaahi iyo qooskiisu u hayaameen degaan-xilliyeedka meesha lagu macaago Gooba Cali Gari. Markii uu gaarey degaankaas, dadkii meesha degganaa ayaa u diidey in ay waraabiyaan. Sida xeerku qabo, qaybsiga biyuhu waa dhaqan soo jireen ah. Intaa waxa dheer, Cabdullaahi xididnimo adag ayaa uu la wadaagey qoladaas, oo waxa uu mudnaa xurmo iyo qaddarin dheeraad ah. Cabdullaahi aad ayaa uu u baryootamey, laakiin biyiho lama siin. Baahidiisa biyood ee daran iyo rafaadkii ka muuqdey midna kama ay dhiidhiyin dadkii uu soo martiyey. Waa uu qaadan waaey sida loo qadiyey. Reerkii waxa uu kula noqdey weel maran iyo harraad daran.

Haddaba, si uu u ciqaabo kuwa ku xad-gudbey xeerka, dhacdadana taariikh u noqoto oo ruux dambe aannu sidaa oo kale yeelin, Cabdullaahi waxa uu go'aansadey in aanu biyo dambe cabbin inta noloshiisa ka dhiman. Waxa dhici karta in go'aankan Cabdullaahi ay ka keeneen sababo badan, oo ay ka mid yihiin: b) iyada oo aaney jirin meelo kale ee uu Cabdullaahi biyo u doonan karey, taas oo macneheedu noqon karo in beesha degganeyd Gooba ay dishey Cabullaahi iyo qoyskiisa. Arrintan waxa kale oo ay khilaafsan tahay dhaqanka tolnimada. t) Beesha Gooba waxa ay mar labaad jebiyeen xeer dhaqameedka Soomaalida, kaas oo sharci ka dhigaya wadaagidda biyaha, iyo j) Dhaqanka Soomaalida marka la eego, xididka waa la xurmeeyaa, sidaa awgeedna, Cabdullaahi waxa uu tirsadey xididnimo xumo, iyaga oo ku xad-gudbey xeerka xididnimo. Sidaa awgeed, si ay dadku arrinta u ogaadaan, una ceebeeyo xididkiis, waa uu iska af-xirey cabidda biyaha inta uu nool yahay. Muddo 30 sannadood ah, Cabdullaahi, caano mooyaane, ma cabbin biyo. Ka hor inta aanu ku geeriyoon gobolka Sool, 27dii Nofeembar 2001dii, Cabdullaahi jirkiisa waxa uu noqdey harag iyo lafo is heysta.

Xeerarka Biyaha

1) Mabda' ahaan, biyuhu waa la wada leeyahay, 2) Guud ahaan, nidaamka waraabka sida loo soo kala horreeyo ayaa loo cabbaa marka xoolaha laga waraabinayo ceelasha, 3) daaqsatada martida ku timid waa loo oggol yahay biyaha, kal ayaana la siiey ku waraabsadaan xoolahooda, 4) kaltanka waraabka waa in la ilaaliyaa, 5) waa in aan lagu xad gudbin nidaamka kala horreynta, 6) mudnaan hore waxa leh xoolaha ay wadaan dumar iyo caruur keli ahi, 7) xoolaha ay wadaan dumar laga dhintey, ama agoon, waa in mudnaan la siiyaa, 8) awrta dhaanka ah waxa ay leeyihiin mudnaanta kowaan, 9) xoolaha nugulka ah, sida ariga iyo lo'da, waa in laga hormariyaa kuwa kale, 10) idahu mudnaan aey ka leeyihiin riyaha, waana in aroornimada hore la waraabiyaa, 11) haddii biyuhu gabaabsi noqdaan, geela waa in loo aroorshaa bar-biyoodyada kale ee fog, 12) daaqsatada socotada ah iyo kuwa deegaankaba waa in ay ilaaliyaan nadaafadda bar-biyeedyada, *tusaale ahaan, iyaga oo ka nadiifiya kaalinta biyaha iyo saalada xoolaha.*

XEER DHAQAMEEDKA XIJIGA.

4.1 Muhimmadda dhaqaale ee Xijiga

Marka la garab dhigo dhaqaalaha xooggan ee dhaqashada xoolaha iyo kalluumeysiga, xirfadda xijigu ma aha mid madax-bannaan ama isku filan. Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsiga iyo dadkii lagu wareystey daraasaddu waxa ay labaduba sheegeen in guratada xijigu ka kooban yihiin shaqaalaha dheeraadka ah ee qoysaska reer miyiga - dad ama qoysas sabool ah oo ka mid ah xoolodhaqatada. Tiro yar oo kalluumeysato ah ayaa gala xijiga xilliga Xagaa-baxa ee badxiranka ah, si ay u helaan dakhli dheeraad ah. Raacatada hodanka ahi ma gurtaan xijiga, waxdheefka oo hooseeya darteed, waana ay liidaan oo waxa ay u arkaan shaqo ka liidata dhaqashada xoolaha. Reer Puntland waxa ay yiraahdaan "*shaqadaas xiji gal baa dhaanta.*" Ereyga xiji waa erey guud oo kulmiya dhamaan noocyada dhirta laga helo udugga.

Xijigu sidaas ayaa uu qoyska reer miyiga daaqsatada ah ugu noqdey kaabe, iyaga oo xooggooda inta dheeraadka ah gesha gurashada xijiga si ay qoska ugu helaan dakhli dheeraad ah. Mararka qaarkood, ee la waayo shaqaale dheeri ah, reer miyiga qaarkood waxa ay xijiga uga shaqeystaan si ku-meel-gaar ah. Wakhtigooda badankiis waxa ay u hibeeyaan dhaqashada xoolaha, qayb yar oo wakhtooda ahna waxa ay siiyaan gurashada xijiga. Marka ay jirto xaaladdani, reer miyiga beerta xijigu waxa ay goostaan dalag aad uga yar inta caadi ahaan laga helo xijiga. Dakhliga sidan ku yimaadda, haba yaraadee, waxtar weyn waxa uu u leeyahay daboolidda qaar ka mid ah baahida qoyska sida dharka.

Halka ka-qayb-galeyaasha iyo kuwa la wareystey ay sheegeen in beerashada xijigu guud ahaan tahay dalag sabool, waxa sidaas diidey meelo ay ka mid yihiin degmooyinka Caluula iyo Baargaal oo iyagu caan ku ah xiji tayo sare leh, dakhli badanna soo hooya. Marka dhabta loo hadlo, ka-qayb-galeyaashu waxa ay xaqiijiyeen in, wixii ka horreeyey dawladdii militeriga ahayd ee 1969-1991, guratada xijigu ahayd bulshada kuwa ugu hooseeya xagga dhaqaalaha. Saboolnimada ay ku sifeysan yihiin kalluumeysatada iyo guratada xijigu, waxa tibaaxaya halheyskan: **"***Kalluun iyo xiji labaduba marada waa kaa laayaan, kuumase gadaan."*

Mar la weydiiyey boqollkiiba dadka gurta xijiga, ka-qayb-galeyaasha iyo dadkii la wareystey waxa ay baxsheen qiyaasahan:

B) Aagga ugu wax soo saarka badan ee Cal-Miskeed oo ka kooban degmooyinka Boasaaso, Qandala, Caluula iyo Baargaal, dadweynuhu waxa uu u qaybsamaa sidatan:
40% kuwo xijiga keli ah ku nool
50% kuwo ku nool xijiga iyo xoolaha
10% kuwo ku nool hawlo kale sida kaluumaysiga iyo ganacsiga yar yar.

T) Meelaha wax-soo-saar ee kale oo ka tirsan Gobolka Bari waa dhulaalka fidsan (bannaanka ah) ee *karkaar* halkaas oo geedka beeyada ee *Moxor*-ku oo keli ahi ka baxo. Lama hayo qiyaasaha tirada guud ee xijiyeysatada, hase yeeshe xijiyeysatadii

joogtey aqoon is waydarsigu waxa ay caddeyeen in boqolleyda xijiyeysatada ee aagga Karkaar ay aad uga hooseyso tan silsiladda xeebaha buuraleyda, meeshaas oo aan ku habbooneyn dhaqashada xoolaha.

Xijiyeysatada ka qayb gashey baaristu waxa ay ka digeen in Xijiyeysatada dhaqan ahaan ay soo wajahaan xannibyo soo noq-noqda sida la'aanta dhaqaalaha asaasiga ah ee ay u baahan yihiin. Goobaha xijiga oo ay adag tahay in si sahal ah loo gaaro meelaha buraleyda ah, baahi biyood iyo weliba guratada oo ka go'dooma qoysaaskooda. Shaqada uruurinta joogtada ah ee goobaha xijiga oo qaadata muddo dhan lix bilood ah dhinaca beeyada halka maydiguna qaato 12 bilood kuwaas oo iska hortaaga xiji-guratada in ay boqdaan qoysaskoodii.

5.2 Juquraafiga, Cimilada iyo Noocyada Dhirta

Ka-qayb-galeyaasha iyo dadka lagu wareystey sahaminta waxa ay cayimeen sinjiyada waaweyn ee laga helo Puntland ee laga gurto xijiga iyo malmalka: Moxor, Lufood, Yagcar, Xankookib, iyo Malmal (Dhidin) iyo Hadi, sida ay u kala horreeyaan. Marka laga reebo dhirta Hadi-ga iyo Malmalka oo ka baxda dhulka siman ee gudaha kuna fidsan illaa iyo xadka Itoobiya, dhammaan sinjiyada kale waxa ay ka baxaan silsiladda buuraleyda ee Gacanka Cadmeed iyo meelaha u dhow ee gobollada Bari iyo Sanaag. Dhammaan noocyada dhirtaasi waxa ay soo saaraan foox ama xabag oo wakhti wakhtiyada ka mid ah la dhoofin jirey. Dhirta xabagta leh ee xankookibka iyo Malmalka iskood aey u dhalaan halka labada kale la beero.

In kasta oo beeraha xijiga la kala leeyahay, haddana lama hayo tiro koobka keymaha xijiga maaddaama ay ka baxaan dhul baaxad ballaaran iyo buuro sameys qallafsan. Cidna ma sheegi karto tirada saxda ah ee xijiga ama bed go'an oo tilmaama keymaha xijiga ah. Sida ay qabaan odayaashu, keymaha xijiga waxa loo kala qeybiyaa Kobo si looga faa'ideysto. Sidaa oo kale, odayaashu waa sheegi kari waayeen cabbirka halka Kob. Kobaha jira waxa ay u dhexeeyaan kuwo yar-yar oo uu galo (qaada) hal xijeyeyste xilligiiba iyo kuwo ay ka shaqeeyaan illaa shan xijeyeyste. Marka laga hadlo wax soo saarka, aagaggu waxa ay u kala qeybsan yihiin: 1) *Koraad* oo ah goobo joog sare ku yaal oo xijigu ka baxo, soona saara xiji tayo sare iyo tiro-ba leh. Kuwan waxa ka mid ah: Ceel-gaal, Dhurbo, Muudiye, Baargaal, Caseyr iyo qaybo ka tirsan degmada Boosaaso. 2) *Xaysimo* oo ah keymaha xijiga ah ee ku jeeda xeebta Badda Cas, iyo 3) *Gagaab* oo ah kobaha xijiga ee ku yaal siibadka buuraleyda joogga hoose kuwaas bixiya wax soo saar tayadiisu liidato. Kuwan waxa ka mid ah: aagaggaa Tuurmasaale, Timirshe, Buq Catooti, Dawacaley, Ufeyn, Taageer, nawaaxiga Boosaaso 4) *Karkaar* oo beeyo sooc ahi ka baxdo, waxa ay ku taal bartamaha gobolka Bari. Tirada iyo tiyada wax soo saarka kobaha xijigu waxa ay ku xiran tahay waxyaalo badan oo ay ka mid yihiin: xalaadda cimilo, degaanka iyo joogga dhulka. Degaanka kobuhu waxa uu ku kala duwan yahay dheefta carrada, caddadka roob-sannadeedka, heerkulka iyo joogga:

b. *Joogga*. Keymaha xijiga ee ku yaal joogagga sare waxa ay bixiyaan wax soo saar ka badan kuwa ku yaal joogagga hoose. Meelba meesha ay ka joog sarreyso waa ka wax soo saar iyo tayaba fiican/badan tahay.

t. *Roobka*: Keymaha xijigu waxa ay u baahan yihiin roob si ay u soo saraan xabag. Meeliba meesha ay ka roob badan tahay waa ka wax soo saar badan tahay.

j. Dabaylaha Ganaciga: Dabeylaha Ganacsigu saameyn weyn aey ku leeyihiin wax soo saarka. Keymaha xijiga ee ku jeeda Badda Cas waxa si toosan ugu dhaca dabaylaha Ganacsi ee Waqooyi-Bari ee qoyan, sidaa darteedna waxa ay soo saaran xabag badan, marka loo eego meelaha kale ee la mid ah ee aan dabeysha helin.

x. *Shaqada/xoogga:* Maxsuulku waxa kale ee uu ku xiran yahay hadba inta shaqo ama xoog la geliyo hawsha beerid-da . Meertada beerid-da dalagga meydigu waa 12 bilood, halka kan Moxorku yahay 6 bilood. Xijiyeystuhu waa in uu joogteyaa meertada beeridda dalagga. Meertada oo aan la joogteyn waxa ay yareysa wax soo saarka. Wax soo saarku waxa uu si toosan isula beddelaa hadba baaxadda shaqada la geliyo geedka.

5.3 Yeelashada Kobaha Xijiga.

Taariikh

Odayaasha gobolka Bari waxa ay sheegeen in keymaha xijigu ku yaalaan silsiladda buuraha ee Gacanka Cadmeed iyo dhulalka fidsan ee gudaha kana tirsan gobollada Bari iyo Sanaag. Dhirta Yagcar-ka iyo Moor-ka waxa ay ku sheegeen in ay yihiin caynadaha ugu muhiimsan ee soo saara fooxa laga ganacsado. Labadii qarni ee la soo dhaafey, labadan geed waxa ay ahaayeen hanti ay si gaar ah u leeyihiin dad ka soo jeeda qabillada dega goobahaas.

Gobolka Bari dadku waxa ay ka sheekeeyaan sida keymaha xijiga loogu qeybiyey beelaha xoolo dhaqatada ah ee wakhtigaas ku noolaa. Waxa ay sheegaan in boqor la oran jirey Maxamuud Yuusuf Hawadane (1809-1818), oo wakhtigaa ka talinaey gobolka Bari, uu sameeyey xeerka lahaansha keymaha xijiga. Hase yeeshee, lama hayo sida ay ku timid milkiyadda dhirta xijiga gobolka Sanaag. Waxa ay odayaasha la tahay in qaybsiga keymaha xijiga ee wakhtigaasi ay sababi kartey koror ku dhacey qiimaha fooxa. Keymaha waxa loo qaybsadey qoo qolo sida Majeerteen, Geeso-guulle, Dishiishe, iyo Jambeel, kuwaas oo wada deggenaa gobolka Bari. Qoys kasta waxa uu dhexdiisey ka sii qeybsadey calaamadsadeyna aagga uu wakhtigaas degganaa, isaga oo codsadey in boqorku u sharciyeeyo milkiiyad, sidaas oo uu oggolaadey. Sharciga loo adeegsadey qeybinta kobaha xijiga waxa uu ahaa iyada oo qoys kastaa calaamadsadey dhul masaafadiisu gaarsiisan tahay daaqsinta ariga ee loo yaqaan *Ari-soof*. Qaabka calaamandintu waxa uu ahaa dhagxan tuur ah oo la dhigo geesaha koobtaa. Ka-qayb-galeyaashu waxa ay sheegeen in keymaha xijiga loo qeybiyey qoysaska saboolka ah ee bulshada wakhtigaas jirtey. Qoysaska ladan, gaar ahaan kuwa leh xoolo nool ee badan, ma aaney daneyn qaybsiga kheyraadkan, waxana ugu wacnaa shaqada adag ee ay u baahan tahay, faa'iidada yar ee ka soo noqota iyo weliba aragtida ay ka qabeen gurashada xijiga oo ahayd mid hooseysa.

Milkiyadda iyo Dhaxalka

Waxa kale oo odayaashu qeexeen ragga iyo warasadooda lab in ay gaar u leeyihiin milkiiyadda keymaha xijiga, iskana dhaxlaan. Marka la waayo nin dhaxalka yeesha, haweenta ugu dhow ee warasadada ah ayaa qaadata kirada isticmaalka kobta xijiga inta ay nooshahey, markaas oo lahaanshaha dhirta u gudbo, sida xeerku qabo, ninka xigto ahaan ugu sokeeyey milkiilihii labka ahaa ee hore u dhintey. Maaddaama milkiyadda xijigu raacdo firka labka ah, waxa abuurmey aragtida ah in xijigu yahay mid magwadaagtu leedahay**.** Soomaalida oo dhaqankeedu yahay in raggu wax xukumo, milkiyadda keymaha xijigu, sida hantida aasaasiga ah ee kale, waxa ay noqodtey hanti uu raggu dhaxlo. Marka la eego xeerka qabiilka, dumarku ma dhaxlaan keymaha xijiga sababta oo ah, haddii ay dhimato, hantida waxa ay u wareegeysaa caruurteeda oo laga yaabo in ay ka soo jeedaan qabiil ama beel kale. Si kale marka loo sheego, dumarku waa guursan karaan rag qolo kale ah, laakiin ninkeeda iyo carruurtoodu waxba kuma laha hantida xijiga ah ee aabbaheed.

Odayaashu waxa ay ku gebebeeyeen in milkiyadda keymaha xijiga lagu yeesho mid ka mid ah siyaabaha soo socda:-

- Boqorka oo sharciyeeyey markii la qaybsaneyey ee hore.
- Hibo loo siyey.
- Diyo ahaan loogu wareejiyey.
- Khasab lagu heley, sida, boqorka oo ka wareejiyey hantida kii lahaa, oo u wareejiyey mid kale sababta ay doonto ha ahaatee.
- Masaalaxo lagu heley. Tani waxa ay timaaddaa marka milkiilayaasha keymaha xijigu dhexdooda isku qabsadaan, oo odayaal dhex-dhexaadiyaan. Mararka qaarkood, xalku waxa uu noqdaa in xijiga qaybta, ama qaarkeed, la isku hayo laga wareejiyo labada dhinac ee isku haya oo la siiyo cid kale, sida mid ka mid ah odayaasha dhexdhexaadinta, si kuwa lihi aaney isugu dilin. Sidaas aey qayb saddexaad ku yeelataa xijiga, waxana qaabkaas loo yaqaan *ka-dhex-qaadasho*.

Isu-Eegidda Dhaqanka Iyo Shareecadda

Xeer dhaqameedka iyo Shareecaddu meelo badan aey iska shabbahaan. Soomaalida oo ah dad heysta diinta Islaamka, waxa loo arkaa in Shareeddu ka sarreyso xaaladahan. Laakiin, marar badan sidaa arrintu ma aha: u diididda dumarka dhaxalka keymaha xijiga ayaa tusaale u ah. I. M. Lewis waxa uu dhabtan ka heley bulshada xoola dhaqatada:

"…*xitaa beesha gudaheeda, xukunka Shareecadda waxa xadeeya awoodda xeer dhaqaameedka... Mabaadii'da Islaamka waa la qaatey, laakiin waxyaabaha shareedda ka khuseeya beesha waa la iska indha tiray."*

Odaayashu si cad aey u dhaleeceeyeen aragtida ah in dumarka loo diido dhaxalka keymaha xijiga, waxa ayna isku raaceen in tani ka soo horjeeddo Shareecadda

Islaamka iyo xuquuqda aadanaha. Laakiin, marka ay gaar u hadlayaan, waxa ay ka cawdaan in u wareegidda keymaha xijiga beel ama qolo kale aaney ahayn arrin la aqbali karo. Odayaal dhaqaameedka iyo culimada diintu waxa ay tilmaameen (marka gaar la isku yahay) in dakhliga laga helo kirada dhirta xijigu diin ahaan xaraan yahay, waayo dhirta xijigu iskood aey u baxaan ee cidina ma beerin; sida awgeedna, looma tixgelin karo hanti kooxeed ama shaqsi. Waxa ay ka deyriyeen in dakhliga kirada xijiga laga helo lagu quudiyo qoyska. Waxa ay soo qaadeen in qoysas badan oo ku noolaa kirada xijiga ay haatan cirib go'een ciqaab Alle awgeed.

Lahaanshaha iyo Taranta Qoyska

Wakhtiga hadda ah, ma jiro hal qoys oo gaar u leh hal kob xiji. Qoysaskii jirey waagii xijiga la qaybinaey waxa ay hadda u fideen bahweyn ama koox gaarta magwadaag. Waxa laga yaaba in qoys dhan 200 nin oo hal oday ka tafiirmey maanta ay wadaagaan hal kob xiji. Tirada dhirta xijigu ma kororto. Cimriga geedka xijigu inta uu gaaro lama yaqaan. Ma jiro qof noloshiisa arkey geed xiji ah oo soo baxey, korey, kadibna miro dhaley/ qaangaarey. Odayaashu waxa ay ku qiyaaseen cimriga geedka xijiga in uu gaaro 3 qarni ama ka badan. Tirada milkiilayaasha oo korortey awgeed, Qiimaha dhaqaale ee xijigu aad ayaa uu yaraadey. Sidaa awgeed, milkiyadii gaarka ahayd ee xijigu waxa si tartiib tartiib ah ay u sii socotaa mid guud, maadaama dadkii lahaa ay sii badanayaan, uuna markaas yeelano ahmid dhaqaale yar. Kontonkii sano ee la soo dhaafey, reero badan ayaa waxa khasab ku noqotey in ay maamulka iyo intifaacsiga xijiga faraha uga qaadaan kuwooda saboolka ah.

5.4. Hababka Intifaacsiga Xijiga

Odayaasha ay la kulmeen cilmi-baarayaashu waxa ay sheegeen in siyaabo kala duwan loo beero xijiga. Kororka ku dhacey milkiilleyda wadaagta beeraha xijiga, iyada oo aaney kordhin tirada beeraha xijigu, waxa ay adkeysey qaybsiga intifaacsiga dhirta xijiga. Sidaa awgeed, waxa looga faa'iideystaa sidan: milkiilleyda rabta in ay iyadu beerato xijiga la wadaago waxa ay u galaan kaltan. Nidaamkan waxa loo yaqaan *'Gaafeysi'* oo macneheedu yahay ka faa'iideysiga milkiileyda ee kaltanka ah. Marka laga reebo xaalado kooban, milkiilleyda laftoodu ma galaan xijiga. Waxa ay ka door bidaan in ay heshiis ku siiyaan xirfadleyaal, taas oo loo yaqaan "*Cawaaji*." Ereyada: "*Cawaajl"*, "*Sed", ama "Kiro" w*aa isku micne waxana loola jeedaa qiimaha lacageed ee insticmaalka xiji ee uu bixiyo qof aan ka mid ahayn milkiileyda.

Qiimaha kiradu waxa uu isla beddelaa wakhtiga, goobta, baaxadda iyo wax soo saarka kobta xijiga. Kobaha waaweyni waa ka qaalisan yihiin kuwa yar-yar, kuwa wax soo saarkoodu badan yahay waa ka qaali kuwa kale. Xeerku waxa uu farayaa in xijeyeystuhu baxsho kirada ka dib marka uu goosto dalagga xijiga. Haddii milkiiluhu weydiisto kireystaha qiimo kiro xad dhaaf ah, taas oo kireystuhu u arko caddaalad darro, waxa arrinta la hor geeyaa guurti ka kooban gurato khibrad leh iyo odayaasha degaanka, kuwaa oo si wanaagsan u yaqaan baaxadda iyo wax soo saarka xijiga laga hadlayo. Xeerbeegtigu waxa ay gooyaan kiro macquul ah. Sida badan, labada dhinac

waa ay oggolaadaan xukunka. Kuwa baarayaashu la kulmeed qaar ka mid ah waxa ay raaciyeen in qaabab cusub oo kireysi soo baxeen, sababta oo ah qiimaha xijiga oo waayahan dambe sare u kacey, hantiileyduna qaab-heshiiskii hore ku beddeleen nidaam shurug ah (saammiley). Hantiiluhu waxa uu noqonayaa mid la saami siman hal xiji-gurte. Sidaa awgeed, marka laga gooyo kharashka cuntada, saafiga wax soo saarka waxa loo qaybsadaa si siman. Tusaale ahaan, haddii laba xijeyeyste kobta galaan, saafiga waxa loo qaybiyaa 3 qaybood, mid kasta waxa uu qaataa saddex-meelood meel (1/3).

5.5 Habka Wax Soo Saarka

Dhirta Yacgar iyo Moxor badankood waxa ay ka baxaan fig-ta iyo xaraaraha buurta. Xijiyeysatadu, si ay uga shaqeeyaan meelahaas, waa in ay badanaa is qaawiyaan (wax yar oo dhar ah dhexdooda ku reebaan), cago caddaanna ku tafaan buuraha iyo dhirta. Xijiyeysato badan waxa ay ka soo dhaceen dhirta, kuwaas oo markiiba dhinta (*anigu tegey eh ee timirta*). Goobaha xijiga badankood si adag ayaa loo gaaraa, waana ay ka fog yihiin degaannada qoysaska xijiyeysatada. Inta uu shaqada ku jiro, xijiyeystuhu waa ka fog yahay qoyskiisa. Waxa uu ku nool yahay god keynta xijiga u dhow oo uu ku keydiyo cuntada, biyaha iyo xabagta uu guro. Inta uu goobta joogo waxa uu dareemaa cidlo iyo go'doon badan. Xijiyeysatada badankood waxa ku yar cuntada nafaqada leh: caanaha, hilibka ama khudradda. Cuntadooda qaalibka ahi waa bariis lagu kariyey saliid iyo yaanyo qasacadeysan. Badankood waxa ku dhaca cudurka Qaaxada (TB) iyo cudurro kale oo la xiriira nafaqa-darrada.

Nooc kasta oo ka mid ah sinjiyada dhirta xijiga waxa uu leeyahay meerto dalag gaar ah: **b)** *geedka Yagcar*: kani oo keena xabagta Meydiga, waxa uu leeyahay meerto dalag 12 bilood dhan. Labada bilood ee ugu dambeeya waxa qaadata diyaarinta wax soo saarka, rarkiisa oo awr loogu soo raro magaalooyinka iyo tuulooyinka ganacsi. Shaqadu waxa ay billaabataa Luuliyo, waxa ayna dhammaataa bisha Juunyo ee sannadka xiga. Nabarreynta geedka (tafqid) u horreesa waxa loo yaqaan *"Nagfid"* oo ku qaadata 3 cisho xijiyeystaha ugu dadaalka badan ee ku sugan kob uu hal nin ka hawlgalo. Waxa ku xiga "*Qolofqaad",* oo ah ka qaadidda qolofta ku sameysanta nabarka hore ee geedka lagu dhuftey, taas oo qaadata 7 cisho oo is-daba joogga ah. Dhextaalka meertooyinka qolofqaad ee is xig-xiga waxa ay la korortaa tirada qolofqaadka (1,2,3---), waxa ayna u dhaxeysaa 15-25 maalmood. Shaqadu waa ay sii korortaa marka xabagtu soo badato, waxa ayna la korortaa tirada qolofqaadka. Sida caadiga ah, wixii ka dambeeya nagdfid-da u horreeysa, qolofqaad kasta ee xiga waxa uu qaataa 10-12 maalmood.

Inta u dhexeysa nagfid-da iyo qolofqaadka is-daba joogga ah, xabag ayaa xirta afka nabarka, kuna adkaata. Keydinta xabagtaas isdul fuuleysa waxa loo yaqaan *"Biiririn".* Xijiyeystuhu waxa uu ku uruuriyaa xabagta kolay yar oo loo yaqaan *"Dhuraad*" xabagtana waxa uu ku fujiyaa mindi loo yaqaan "*Mingaaf"*

Laakiin xabagta badankeedu kuma ururo afka nabarka ee hoos aey u dareertaa halkaas oo ay ku biirto tobanka bilood ee hawshu socoto. Xabagtaas waxa loo yaqaan *"Jadar"*, waxana la gooyaa dhammaadka meertada 8aad**.** Inta ay socdaan afarta

qolofqaad ee ugu dambeeya, marka ay badato soo dheecaanka xabagtu, xabag wareeg ah ayaa ku sameysanta oo xirta nabarka afkiisa. Xijiyeystuhu waa uu gooyaa xabagtan oo ku ururiyaa koleyga yar ee uu sito mar kasta oo uu qolofqaadayo nabarka. Noocan xabagta ah waxa loo yaqaan *"Firito"* ama *"Ill"*. Xeer xiji ayaa faraya xijiyeystaha in uu nasiyo geedka muddo sannad ah ka dib marka uu laba sannadood beerto oo dalag ka goosto. Xijiyeystaha keligiis kob ka shaqeynaya sida badan waxa caawiya kaaliye loo yaqaan *"Magdac",* kaas oo isla markaana wehel u ah. Hawlaha kaaliyaha waxa ka mid ah karinta cuntada iyo ka keenidda biyaha meelo fog fog isaga oo ku soo qaada awr. Kaaliyuhu ma aha saamile, balse waxa uu ku shaqeeyaa lacag qiimo-bileed ah.

t) Dadkii la wareystey waxa ay sheegeen in, halka dhirta Yagcar-tu ka baxdo figaha buuraha oo keli ah, Moxorku ka baxo figaha buuraha, uurarka iyo dhulka simman ee ku yaal koonfurta silsiladda buuraha xeebaha. Waxa ay isku waafaqeen in meertada dalag ee dhirta Moxorku tahay 6 bilood, geedkuna sameeyo foox loo yaqaan *"Beeyo".* Qaabka ka faa'ideysigu waxa uu la mid yahay kan Yagcarta. Xijiyeystuhu waxa uu nabarreeyaa ama qolofta ka qaadaa nabarka geedka 15-18kii maalmoodba mar. Dadkii la wareystey waxa ay sheegeen in dareerka fooxu sida badan ku soo dheecaamo qolofqaadka 2aad ama tan 3aad, isla markaana aanu hoos u dareerin ee uu ku biiro nabarka afkiisa. Xijiyeystuhu xabagta adkaatey waxa ay ka gooyaan nabarka afkiisa markasta oo uu qolofqaadayo. Beeridda dalaggu waxa ay bilaabantaa bisha 4aad ee sannadka, waxa ayna dhammaataa bisha 10aad ee isla sannadkaas, kuna beegan xilliga kulul. Geedka Moxorku waxa uu qaataa nasasho 6 bilood ah sannadkiiba,taas oo si caadi ah u timaadda inta ka hartey sannadka. Qalabka loo kaashado gurashada dalagga labada geedba waa: Mingaaf (mindi wax lagu xoqo), Dhuraad (weel yar oo wax lagu ururiyo), Koley (weel weyn oo wax lagu ururiyo), iyo jaranjaro loox ka sameysan oo dhirta lagu tafo.

Qiyaasaha wax soo saarka beeraha xijiga waxa laga sameeyey dood-kooxeed, qiyaastaas oo noqotey sidan:-

Dhir	Kg	Halkii Shaaqaaleba
Beeraha Meydiga: Beeraha wax soo saarka badan Beeraha wax soo saarka yar	 400 -500kg 200-300kg	 Halkii Shaqaaleba "
Beeraha Beeyada: Beeraha wax soo saarka badan Beeraha wax soo saarka yar	 300-500kg 200-300kg	Halkii Shaqaaleba "

5.6 Suuqgeyn

Soomaalidu fooxa (Meydiga iyo Beeyada labadaba) iyo maalmalka waxa ay u suuqgeyn jirtey Masar iyo Bariga Fog tan iyo qarniiyal hore. Odayaasha magaalada Bargaal waxa ay soo tebiyeen qiso ku saabsan taariikhda suuqgeynta fooxa oo facba faca kale u soo gudbiyey. Waxa ay sheegeen in kumanaan sano ka hor uu jirey boqor la oran jirey

“Barxa“oo ku noolaa magalada Bareeda, xukumi jireyna nawaaxiga Caluula. Waxa uu xiriir ganacsi la lahaa boqoraddii Hatsapshut ee Masar oo mar u soo dirtey hadiyad ay sidaan 100 awr. Qisadu waxa ay sheegeysaa in 30 ka mid ah awrtii siddey alaabta ay ku dhinteen dariiqa u dhexeeya Masar iyo Caluula, 70 awr oo keli ahina soo gaareen boqorka. Boqorku waxa uu la dhacey hadiyaddii, waxa uuna ugu beddeley intaa in le’eg oo foox ah (Meydi iyo Beeyo) oo hadiyad ahaan uu ugu direy boqoradda. Wixii intaa ka dambeeyey, ganacsiga fooxu sare ayaa uu u kacey. Boqoraddu waxa ay dhulkan ku magacawdey Puntland, oo la macne ah “D*hulkii udugga”*.

Fooxa Meygida iyo Beeyada waxa hadda loo dhoofshaa waddammada Gacanka, waxana loo isticmaalaa sameynta alaabada isqurxinta, cadarka, warshadaha daawada, xanjada, halka Hadi-ga iyo Malmalka iyagana la dhoofsho, in yarna waddanka looga isticmaalo daween dadka iyo xoolaha. Xabagta Xankookibka hadda lagama faa’ideysto. Odayaasha aqoonta u leh wax soo saarka xijigu waxa ay sheegeen in labo-meelood meel fooxa la soo saaro sannadkii yahay Meydi, halka qaybta saddexaad tahay Beeyo.

In kasta oo faa’idada ay helaan guratada xijigu yar tahay, ka-qayb-galeyaasha iyo dadkii la wareystey waxa ay labaduba xaqiijiyeen in guud ahaan caddadka fooxa laga soo saaro Puntland badan yahay, ganacsina galo. Ma jiro tirokoob dhoofinta wakhtiga hadda ah. Laakiin, J. Coulter, buuggiisii 1987dii, ee lagu magacaabo “Daraasadda Iibgeynta Fooxa iyo Malmalka laga helo Soomaaliya” ,waxa uu ku qiyaasey wax soo saarka Maydiga sannadkii 1000 MT, Beeyadana 300 MT (labada nooc ee dhirta xabagtan waxa laga helaa gobollada Bari iyo Sanaag ee Puntland). Dakhliga saafiga ah sannadiiba laga helo ma yara. Daraasaddii haya’dda “War-torn Society’s Project” waxa ay sannadkii 1998dii ku qiyaastey dakhliga ka soo xeroodey dhoofinta fooxa sannadkiiba in uu dhan yahay 3 500 000 doollar. Seyladaha caalamka cel-celis ahaan 1kiilo ee Meydi ah waxa uu u dhexeeyaa 8-20 doollar iyada oo loo eegayo tayada; halka 1 kiilo ee Beeyo ah sida badan qiimaheedu yahay 2 doollar (labada noocba dumar ayaa u kala saara heerar tayo kala duwan). Sida ay weligeed ahaan jirtey, ganacsadaha dhexe (gacanta dhexe) ayaa hela faa’idada ugu badan ee ganacsiga xijiga.

Dadka la wareystey iyo ka-qayb-galayaashu waxa ay isku raaceen in Meydiga la dhoofsho aanu dhaafsiisneyn gobollada Gacanka Carbeed, halkaas oo qoysaska ladani u isticmaalaan carfinta guryaha iyo calashi. Sida badan, qiimaha iyo dalabku waxa uu ku xiran yahay xaaladda dhaqaale ee waddamadan. Marka dhaqaaluhu sarreeyo, dalabka iyo sicirka Meydigu sare aey u kacaan. Marka korriinka dhaqaale ee waddamadani gaabsho, dalabka iyo sicirku hoos aey u dhacaan. Waxase jirta in fooxa Beeyadu leeyahay seylad caalami ah oo intaas ka ballaaran. Marka laga reebo sameynta cadarka iyo waxyaalaha la isku qurxiyo ee Yurub soo saarto, Kaniisadaha diimeed dhammaantood waxa lagu shidaa foox, gaar ahaan xusyada. Soomaalida soo saarta iyo dillaalleyduba si toosan uguma dhoofshaan Beeyada Yurub. Meydiga waxa ay u dhoofshaan dalka Sacuudiga, halka Beeyada ay u dhoofshaan Imaaraadka Carabta iyo Yemen. Meelahaas oo xabagta (fooxa) lagu kala sooco, lana xirmeeyo, si loogu sii dhoofsho seyladaha Gacanka iyo kuwo ka baxsanba.

5.7 Xiriirrada Mataleyaasha.

Sida aan horey u sheegney, xijiyeystaha (gurte) wax kireystey ayaa beerta xijiga. Gurtuhu ma laha in dhaafsiisan labadiisa gacmood. Waxa uu dhexda ugu jiraa milkiilaha beerta xijiga oo isagu kiro ka qaata intifaacsiga beerta iyo dullaalley hunguri weyn oo iyagu faa'idada ugu weyn ka hela dhoofinta xijiga. Guratada badankood raashinka amaah aey uga qaataan ganacsatada fooxa, sidaa awgeedna, markasta deyn aey ku jiraan. Ganacsatada deggan tuulooyinka ku xiran xijigu, iyaga oo ka faa'iideysanaya wax la'aanta xijiyeysatada, waxa ay ka macaashaan fursaddan. Kuwa la wareystey waxa ay shegeen: ganacsatadu sicir aad uga sarreeya kan seyladda gudaha aey raashinka ku amaahshaan guratada, sandulle-na uga dhigaan (guratada) in ay amaahda ku baxshaan caynad foox qiimihiisu kan suuqa le'eg yahay. Ku dulnoolaadka guratada xijigu ma aha hab cusub ee waa mid jirey boqollaal sano.

Intaa waxa raaca, ka-qayb-galeyaasha iyo kuwa la wareystey waxa ay tilmaameen in hantida ma-guurtada ah (beerta xijiga) ay leeyihiin hantiilayaal maqan, gurtuhuna ka shaqeysto. Tan waxa la sheegey in ay horumarka xijiga ku heyso dhibaato weyn. Halka waaxdu u baahan tahay kaalmo deg-deg ah, sida haddii la damco in berkedo laga dhiso beeraha gudahooda ama meelo u dhow, waxa imanaysa su'aasha ah "yaa ka faa'iidaya berkedahaas? Ma milkiilaha, mise xiji-gurtaha? Ciddee maamuleysa? Maamulladii hore arrintani waa ku cuslaatey.

Markii ay si dhab ah u gorfeeyeen xaaladda, maamulladii hore waxa ay go'aamiyeen in kaalmada la siiyo gurtaha, kaas oo ah dhibbanyaha wax soo saara. Sannadkii 1955tii, maamulkii gumeysiga ee Talyaanigu waxa uu aasaasey wakaalad fooxa si toos ah sicir macquul ah uga iibsata xijiyeysatada guratada ah. Waxa ay diyaarisey bakhaaro keyd, meelo lagu kalo guro iyo habab sahla kala sooca. Fikraddan waxa looga dan lahaa in xijiyeysatada loo suurtageliyo in ay ka madax bannaanaadaan ganacsatada dhexe. Ugu dambeyntii, wakaaladdii kuma guuleysan gaaridda hadafkeeda, sababta oo ah xijiyeysatadii oo u xaglisey dhinaca ganacsatadii dhexe ee iyaga dulmeysey.

Xukuumaddii militeriga ee Soomaaliya (1969-1991) iyana waxa ay faragelin ku sameysey waaxdan, waxa ayna isku taxalluujisey wax ka beddelka xiriirkan aan isu-dheellitirneyn ee dhiig-miiradka ah ee u dhexeeya ganacsatada dhexe iyo xijiyeysatada. Waxa ay u nidaamisey xijiyeysatada iskaashatooyin, siisey raashin amaah ah, isla markaana uga dhistey bakhaarro keyd iyo kaabeyaal goobo ku habboon. Mar labaad, ganacsadaha dhexe waxa uu ku guuleystey kahortagga qorshahan. Labada jeerba, ganacsadaha dhexe waxa uu kaashadey dareenka tolnimo si uu u soo jiito xijiyeystaha, isaga oo siinaya sicir sare oo ku-meel-gaar ah, taas oo xijeystuhu markasta ku sirmo.

Labada xaaladoodba waxa hirgaley dhoofinta sharci darrada ah ee fooxa. Ka-qayb-galeyaasha iyo kuwa la wareystey labaduba waxa ay qireen in, markii wakaaladdii dawladdu hawl gabtey, ganacsadaha dhexe uu dib ugu laabtey hababkii hore ee dhiig-miiradka ahaa. Iyada oo taasi jirto, burburkii dawladda Soomaaliyeed 1991dii kadib, haddana sicirka fooxa iyo kalluunka la dhoofiyo wakhiyadan dambe waa kordheen, waxana u sabab ah la'aanta xannibyadii dawladeed ee dhoofgeynta. Sidaas awgeed,

dakhliga ka yimaada fooxu waa uu kordhey in wax ku ool ah waxanu hadda daboolaa baahida aasaasiga ah ee qoysaska saboolka ah ee xijiyeysatada.

5.8 Xeerarka Xijiga

La wareysteyaasha sahaminta iyo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsiga labaduba waxa ay xaqiijiyeen in iska-hor-imaadyo ka dhacaan mihnadda xijiga. Odayaasha degaanka ah ayaa xal u hela khilaafaadkan, iyaga oo kaashanaya Xeerka Xijiga. Sababaha keena iska-hor-imaadyada waxa loo aqoonsadey in ay yihiin kuwan :-

(b) Iska-hor-imaadyo ka soo jeeda kirada xijiga
(t) Iska-hor-imaadyo ka soo jeeda kobo ay milkiilayaashoodii hibo uu siiyeen dad kale - gabadhahooda, xididkooda ama saxiibadooda. Dadka ka soo jeeda milkiilayaasha xijiga la baxshey muddo hore ayaa sheegtaa lahaanshaha xijiyadaas, kuna doodaan in wareejintii hore ee xijigu tahay mid aan ansax aheyn.
(j) Iska-hor-imaadyo ka dhasha ka fa'iideyste muddo dheer ku jirey (isticmaalaey) kobta, sidaana ku sheegta xuquuqda milkiyadda. Tan waxa loo yaqaan *Fadhi*.
(x) Iska-hor-imaadyo ka dhasha foox la xadey, si toos ah geedka looga gurtey ama godka keydka - *Gole*.
(kh) Muran ka dhasha kobo dadkii lahaa ay dabargo'een**.**
(d) Muran ka dhasha soohdimaha kobaha -*Soorimo*.

Dhacdada 15

Odayaasha tuulada Taageer oo 60 km u jirta Baargaal dhinaca jid dheeraha u dhexeeya Bossaso iyo Baargaal, waxa ay ka war baxsheen iska-hor-imaad dhowaan ah oo ku saabsan lahaanshaha kob(o) xijigi ku yaal Waqooyiga tuulada. Iska-hor-imaadku waxa uu ka dhex-dhacey koox Dir ah iyo bah lagu magacaabo "Reer Shaacib" oo u dhashey Siwaaqroon.

Waagii uu talada haey boqor Cusmaan oo xukumaey gobolka Bari, laga billaabo 1865tii illaa u ka qaadey Talyaaniga 1927dii, ayaa Shaacib diley nin Dir ah. Boqorka iyo xeerbeegtiisu waxa ay xukumeen in diyo loo siiyo kob(o) xiji ah oo uu Shaacib lahaa qolada ninka laga diley. Sidaa aey Dir kobta ku yeelatey wakhtigaas wixii ka dambeeyey. 1999kii, dad ka soo jeeda Shaacib, iyaga oo ka faa'ideysanaya dawlad la'aanta jirta, waxa ay dib u sheegteen xijigii, dalbeenna Dir in ay ka baxdo. Dir waa ay diiddey baaqaas, waxayna fariisiyeen xijigii toddoba nin oo dabley ah. Koox reer Shaacib ah waxa ay weerar ku qaaddey xijiga si ay uga kiciyaan qolada Dirta ah. Dagaalkaa waxa ku dhintey saddex Dir ah iyo mid Reer Shaacib ah. Afartii Dirta aheyd ee kale waa carareen ka dib markii laga tira batey.

Dhacdadu gef aey ula muuqatey dadka deggan gobolka Bari, waxa ay cambaareeyeen Reer Shaacib, oo ay u arkeen in ay gardaran yihiin. Dadweynihi waxa ay isgarab taageen Dir, waxa ayna ku boorriyeen maamulka Puntland in uu arrinta wax ka qabto. Maamulku waxa uu xabsiga u taxaabey lix ka mid ah odayaasha Siwaaqroon, lamana

sii deyn illaa ay aqbaleen mas'uuliyadda dembiga dhacey, bixinta diyada iyo weliba in ay si deg-deg ah u celiyaan xijiga ay boobeen.

5.9 Xeerarka Xijiga

Xeer xiji waa xeer dhaqaameed hirgaley oo nidaamiya xiriirka dhaqaale, milkiyadda, ka faa'ideysiga iyo xallinta khilaafaadka. Xijiyeysatada waayo-aragga ahi waxa ay sameeyaan guddi xeerbeegti qaada garsoorka lagu xallinayo khilaafaadka guud ee xijiga. Xijiyeysatada, milkiilleyda iyo ganacsatada dhexe waa ku waajib in ay u hoggaansamaan go'aannada xeerbeegtida xijiga. Xeer xiji ma qorna, hase yeeshee, af ahaan ayaa la isugu gudbiyaa. Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsiga iyo dadka sahaminta ka jawaab bixiyey waxa ay xuseen qodobbadan muhiimka ah ee hoos ku qoran:

1. Xeerka "Gaafeysi"

Gaafeysi waxa loola jeedaa isticmaalka kaltanka ah ee xijiga, taas oo ay ku dhaqmaan xubnaha wadaaga xijiga. Xeerkani waxa uu sharxaa sida tirada dadka wadaaga xijigu si le'eg uga wada faa'ideysan karaan, iyada oo xubin kasta jeer go'an leedahay.

2 Xeerka "Cawaaji"

Cawaaji waa heshiiska isticmaalka xijiga qof aan milkiile ahayn oo ku gala kiro go'an. Xeerkani waxa uu qeexa qodobbada heshiiska dhex mara milkiilaha iyo kuwa ka shaqeysta xijiga . Waxa uu qeexaa waajibaadka iyo xuquuqaha milkiilaha iyo kireystaha macmiisha ah. kireystuhu waa in uu wakhti cayiman kirada xilliga ku baxshaa, isla markaana ilaaliyaa xeerarka intifaacsiga. Hantiiluhu isna waa in aanu cid kale ka kireyn xijiga, oo aanu jeebin heshiishka sabab caqligal ah la'aanteed.

3 Xeerarka "Intifaacsiga Geedka Xijiga"

Xeerarkani waxa ay u jiraan si looga hortago in dadka shaqo-xilliyeedka kaga intifaaca xijjigu aaney ku xad-gudbin isticmaalka dhirta.

(b) qolofqaad dheeraad ah: xijiyeystuhu waa in aanu qolofqaadin geedka in ka badan inta caadiga ah, taas oo ku xiran tamarta iyo xaaladda geedka. Si dheecaan badani uga soo baxo, xiyiyeystuhu waxa uu mararka qaarkood qolofqaadaa in ka badan siddeed wareeg, taas oo dili karta geedka .

(t) *Jafo ama jageyn:* tani waa iyada oo nabar qoto-dheer lagu dhufto geedka qolofqaadka siddeedad, si looga keeno xabag badan. Haddii sidan la yeelo, geedku waxa uu keenaa xabag badan, hase yeeshee, waxa laga yaabaa in uu dhinto ama dheecaan keeni waayo sannadka xiga.

(x) *Qayo ama Tararaceyn*: tan waxa loola jeedaa qoomidda ama saridda dahaarka sare ee geedka marka xabagta Jadarka ah laga soo goynayo. Haddii sidaa la yeelo, qaybta la saray waxa ay u fududeysaa cayayaanka khatarta badan ee loo yaqaan "Dowsaar" in uu galo, oo ku dhex noolaado, geedka gudihiisa, taas oo si

tartiib ah u disha nolosha geedka. Xeerku waa in la dhowro dahaarka sare ee geedka marka xabagta laga goosanayo.

(kh) *Goynta laamaha geedka*: xooluhu waa ay jecel yihiin daaqa dhirta xijiga. Sababtaa awgeed, xijiyeysatada ama qof kale midkoodna looma oggola in uu jaro laamaha si uu ugu quudiyo xoolaha, taasi waxa ay keeneysa in cayayaanka halista ah ee kor lagu soo sheegey galo meesha laga jaray oo dilo geedka.

(c) *Gaaxin*: geedka Yagcar waa in laga nasiyaa isticmaalka is daba-joogga ah. Xijiyeysatadu waa in ay hal sano nasiyaan geedka ka dib marka ay beertaan labo sano oo xiriir ah.

4. Xeerka Waajibinaya In Wax-Soo-Saarka Laga Iibiyo Ganacsade-Ammaah-bixiye

Xeerkan waxa uu xijiyeysatada ku waajibiyaa in ay fooxa ka iibiyaan ganacsatada amaahda u siiya raashinka iyo alaabta kale ee ay u baahan yihiin inta lagu jiro xilliga wax-soo-saarka. In kasta oo tani tahay caddaalad-xumo iyada oo xaddideysa madaxbannaanida ganacsi ee xijiyeysatada, haddana waa xeer xiji. Haddii aanu jirin xeer, xijiyestuhu badeecadiisa waxa uu u suuqgeyn kari lahaa seyladaha waaweyn, halkaas oo badeecadiisu u goyn lahayd sicir ka sarreeya kan ganacsadaha ag jooga goobta wax soor saarka.

5**.** Xeerka "*Aas Xiji"* – Milki Wareegga Xijiga

Xeerkan waxa uu sharciyeeyaa in xukuumadi ka qaadi karto xiji miilkiilaha. Boqorradii hore ayaa isticmaali jirey awooddan**.** Xeerkan waxa uu boqorka ama xukuumadda awood u siiyaa in uu/ay milkiile kala wareegto xiji sababtii ay doonto ha ahaatee. Tusaale fiican waxa ah Boqor Cusmaan oo uga wareejiyey Shaacib oo Siwaaqroon ah xijigiisii diyo ahaan. Waxa uu ku wareejiyey Dir oo ahaa kuwa ninka laga diley

6. *Xeerka "Fadhi"*

Fadhi: waxa uu tilmaamaa marka xijiyeyste si is-daba joog ah muddo aad u dheer (in ka badan 20 sano) ku jiro xiji - halkaas oo xijiyeystuhu yeesho xuquuq gaar ah sida qiimaha kirada oo aan lagu kordhin karin iyo caruurtiisa oo yeesha xuquuqda intifaacsiga xijiga, haddii aanu milkiiluhu u baahan. Dhan marka laga eego, xeerku waxa uu waajib ka dhigaa in milkiiluhu aanu qofka noocaas ah si fudud uga saari Karin xijiga ama mid kale ku beddeli karin. Inta xijigu kiro yahay, kireystahaa macmiisha joogtada ah ayaa leh xuquuqda intifaacsiga. Intaa waxa raaca, milkiiluhu kuma kordhin karo kirada hadba sida uu doono. Odayaashu waxa kale oo ay ka warrameen dhacdooyin qaarkood oo kireysatadii ku raagtey xijigu diideen in ay kirada baxshaan, ama u diideen milkiileydii in ay iyagu ka shaqeystaan markii ay u baahdeen, iyo marar oo ay kuba doodeen milkiyadda xijiga, gaar ahaan marka ay is-bidaan in ay ka awood weyn yihiin kuwa milkiileyda ah.

7. Xeerka "Dhaxalka Xijiga"

Xeerka dhaxalku waxa uu rasmiyeynayaa in ragga ka soo jeeda marxuumkii lahaa xijiga oo qur ahi dhaxli karaan xijiga. Xeerkan, dumarku waxba kuma laha hantida xijiga oo ma dhaxli karaan. Hase yeeshee, odayaashu waxa ay sheegeen in xeerkani leeyahay qodob waajib ragga kaga dhigaya in ay dakhliga xijiga qayb ka siiyan gabdhaha la dhashey marka ay duruufi soo food saarto gabdhaha. Gargaarkan waxa la sheegey in uu ka duwan yahay gargaar-dhaqameedka dumarku ka helaan tolkood (Kaalo), waayo loo arkaa in uu magdhow u yahay dumarka laga xaqirey dhaxalka xijiga.

Ka-qayb-galeyaasha, oo ka koobnaa odayaal, culimada diinta iyo aqoonyahanno, dhamman waxa ay ku tilmaameen xeerka u diidaya dumarku in ay haxlaan xijiga in uu yahay mid sharci iyo xistiba caddaalad-darro ah, diinta Islaamkana raad ku lahayn, isla markaana gebi ahaan khilaafsan xuquuqda aasaasiga ah ee aadanaha iyo heshiisyada caalamiga ah**.** Xeerkani waa uu shaqeeyaa illaa iyo wakhtiga maanta ah, hase yeeshee, si qun-yar-socod ah ayaa uu uga guurayaa aragtida dadka, waxana dhici karta in uu ugu dambeyntii suulo.

8. Xeerka "Hadhiino"

Marar dhif ah waxa dhacda in qof haween ahi keligeed u harto dhaxalka hantida xijiga aabbeheedna aan carruur kale ka tegin. Markan waxa xeerka xijigu qeexayaa in dakhliga ka yimaada kirada xijiga haweentu yeelato inta ay nooshahey. Af-Soomaaliga tan waxa lagu magacaabaa "*Hadhiino*". Marka ay dhimato, xijiga waxa yeelanayaa ninka ugu dhow (xiga) marxuumkii dhintey ee lahaa xijiga,haweeneydaas ubadkeeduna ma dhaxli karaan. Xaalado badan oo noocaas ah ayaa la sheegay in ay ka jiraan gobolka Bari.

9. Xeerarka Xijiyeystaha Looga Saari karo xijiga

Milkiiluhu waxa uu xijigiisa ka saari karaa xijiyeystaha marka ay dhacaan xaaladaha soo socda. Haddii uu:

(b) Bixin waayo kiro-xilliyeed-da
(t) Sheegto milkiiyadda xijiga
(j) Ku xad gudbo intifaacsiga dhirta xijiga
(x) Soo war-gelin waayo milkiilaha marka xijiga qayb ka mid ah dad kale ku soo durkaan ama sheegtaan. Waxa dhacda in kobaha xijigu wax badan xiriirsan yihiin, marka miilkiileydu waa isku soo durkaan si ay qaybo dhirta ah u kala qaadaan.

XEER-DHAQAMEEDKA BADDA (CURUFAL BAXR)

4.1 Astaamaha Dhaqan-dhaqaale ee Bulshada Kalluumeysata

Dalka Soomaaliya waxa uu leeyahay kheyraad badeed baaxad weyn oo aan laga faa'ideysan. Xeebta Soomaaliya dhererkeedu waxa uu gaaraa 3300 Km, taas oo ay Puntland ka leedahay saddex-qaybood ka qayb, laga billaabo Laas Qoray oo ku taal Gacanka Cadmeed illaa Garacad, oo iyadu ku taal Koonfurta xeebta Badweynta Hindiya, aaggaas oo ah goobaha ugu habboon nolosha kalluunka. Hawlaha kalluumeysi ee halkaa ka jira in badan waxa xukuma Dabeysha Ganacsiga. Sida ay kalluumeysatadu sheegaan, dabeyshan waxa ay wax-soo-saarka gaadiidka kalluumeysiga ee yar yar ku koobtaa 150 maalmood keli ah sannadkii, taas oo caqabad ku ah wax soo saarka.

Taariikhda inta laga xasuusan karo, beelo kalluumeysato ah ayaa ku noolaa kana shaqeysan jirey xeebaha Badda Cas iyo Badda Hindiya ee Puntland. Tuulooyinka iyo magaalooyinka kalluumeysi ee muhiimadda leh kuna yaal xeebaha Puntland waxa ka mid ah: Lass Qorey, Ceelaayo, Boosaaso, Qandala, Dhurbo, Bender Murcanyo, Garsa, Geesaley, Xaabbo, Afkalahaye, Boolimoog, Caluula, Las Daa'uud, Biyo Caddo, Wareegsime, Bareeda, Ollog, Daamo, Tooxin, Saymo, Caanood, Baargaal, Cadayo, Hurdiya, Dabdheer, Xaafuun, Ceel Cadde, Foocaar, Bender Beyla, Gabbac, Bedey, Baarbacadle, Illig, Garacad iyo kuwo kale oo fara badan. Hawlaha kalluumeysigu badanaaba ma dhaafaan daboolidda baahida aasaasiga ah. Kalluumeysatadu waxa ay jillaabtaan kalluun quud guri loo isticmaalo, caddad yar aeyna u iib geyn jireen seyladaha dibadda. Kalluunka la jillaabto waxa ka mid ah kalluun qareedka oo cunto guri loo isticmaali jirey, iyo noocyada kale ee Tabaadin, Tarraaqad, iyo dhegaha libaax-badeedka oo la dhoofin jirey.

Kalluumeysatada waxa ay weligood isticmaali jireen hawaari ka sameysan jirrid geed, iyo Beden oo isagu ka sameysan loox la isku qabtay. Huuri iyo Beden waxa labadaba af-Soomaaliga loo yaqaan Qori ama Khashabad. Sida caadadu ahaan jirtey, weelkan waxa laga keeni jirey Bombay (Hindiya) iyo Karachi (Bakistaan) iyaga oo cusub amaba iyaga oo mustacmal ah ayaa laga soo iibsan jirey Mukhalla (Yemen). In muddo ah dabadeed, kalluumeysatadu waxa ay awood u yeesheen in ay gacantooda ku dayactirtaan hawaarida iyo bedennadaba. Sannadihii 1970-yadii, laba nooc oo weel kalluumeysi ah ayaa ku soo biiray mihnadda kalluumeysiga: laashash matoorro leh iyo hawaari-gacmeedyo casri ah oo labaduba ka sameysan mayrax (fiber).

Ka-qayb-galeyaasha iyo dad la wareystey waxa ay sheegeen in aaney hawaaridii horey loo isticmaali jirey ka fogaan jirin 2-3 Km xeebta. Waxa ay isticmaali jireen qalab kalluumeysi oo aan tayo fiican lahayn, abbaari jireenna noocyada kalluunka ku nool duleedka badda. Sida ay caddeeneyso oraahda caanka ah ee "B*ad-dhac male ayuu ku hurdaa*", wax soo saarku ma ahayn mid la isku halleyn karo. Ka sokow xannibyada la xiriira awood yarida aaladahan kalluumeysi ee

bidaa'iga ah, haddana mihnadda kalluumeysigu waa mid in badan lagu tiirsanaan karo, la iskuna halleyn karo, marka loo eego dhaqashada xoolaha iyo shaqada xijiga, waayo kalluumeysatadu wel-wel kama qabaan quudinta qoyska maadaama helitaanka kalluunku badan yahay. Meelaha qaarkood, markii loo baahdo, kalluumeysatadu waxa ay dusha ku qaataan shebeg loo yaqaan "Milgo", waxa ay lug ku galaan badda. Marka baddu gaarto illa jilibka qofka aey tuuraan Milgada si ay u soo qabtaan kalluun yar yar sida *carabi-da,* oo ay ku quudiyaan qoysaskooda. Kalluumeysatadu waxa ay ganacsi u dhoofshaan Tabaadin ka dib marka ay ka dhigaan *xaniid*. Wakhtiyadii hore iyo wakhtiyadan dambeba, xeebaha Puntland waxa soo gaara doomo laga leeyahay waddammada Yemen iyo Bakistaan oo iibsada noocyada kalluunka ee Tarraaqad-da. Mararka qaarkood, kalluumeysatadu waxa ay qallajiyaan oo milxiyaan hilibka libaax-badeedka una dhoofshaan (jireen) Afrikada Bari, sida dekedaha Dar es Salam, Zanzibar iyo Mombasa.

Hawlaha kale ee kalluumeysatadu waayihii hore qaban jireen waxa ka mid ah quusidda lagu goobayo Luulku, kaas oo laga ganacsan jirey. Goobaha ay ka mid yihiin Bareeda iyo Gacanka Hurdiya waxa ay ku caan baxeen kheyraadka noocaas ah. Kalluumeysatadu waxa ay luulka u dhoofin jireen wadammada carabta, Bariga Fog iyo seylado kale ee caalami ah. Intii ka dambeysey xorriyadda sannadkii 1960-kii, hawshaasi waxa ay noqotey mid joogsatey.

Laashashka motoorrada leh ee wakhtigan dhow ku soo biiray mihnadda kalluumeysigu xaaladdii jirtey waxba kama beddelin, waayo iskama caabbiyi karaan ama uma adkeysan karaan Dabeylaha Ganacsiga (Trade Winds) iyo mawjadaha ay kiciyaan. Sida hawaarida oo kalena fogaan dheer badda ma gaari karaan. Kalluumeysatada deggan xeebta Gacanka Cadan waxa ay tilmaameen in ay ku kalluumeysan karaan hawaaridooda yar-yar in ka badan 150 maalmood sababtuna tahay iyada oo hawaaridu badda kaga fiican yihiin (uga adkeysan badan yihiin) kuwa ka waaweyn sida Beden, Laash amaba Saxiimad. Kalluumeysatada qaarkeed waxa kale oo ay ka shaqeystaan beerashada beeyada xilliga aanu kalluumeysigu jirin, *taas oo* meertadeeda dalag tahay 6 bilood marka loo eego nooca kale ee loo yaqaan Meydi oo iyada meertadeeda dalag tahay 10 illaa 12 bilood.

Ka-qayb-galeyaasha baaristu waxa ay sheegeen, wixii ka dambeeyey 1970-yadii, intii ay jirtey Xukuumaddii Militarigu, in kalluumeysatada Soomaaliyeed sameeyeen horumar aad u weyn. Teeda kale, tirada kalluumeysatadu aad aey u kororteey markii ay dawladdu in badan oo ah reer guuraagii abaartii 1974-tii Dabadheer ku cayrobey ku jihaysey waaxda kalluumeysiga, dejiseyna dadkaas xeebaha ay ka mid tahay Bedey - Eyl. Dhanka kale, marka la eego, xukuumaddii militariga ahayd waxa ay u nidaamisey kalluumeysatadii horey u jirtey iyo kuwii cusbaa qaab iskaashatooyin kalluumeysi, iyada oo weliba siisey taageero deeq iyo deyn fududba leh. Midowgii Soofiyeeti ee hore waxa uu isna ugu deeqey barnaamijkan qalab kalluumeysi, qalab dhisme guriyeyn ah iyo taakuleyn farsamo ay ka mid tahay tababar maareyneed ee hawlwadeennada. Intaa waxa

dheer, iyada oo laga faa'ideysanayo mucaawinada SIDA, waxa laga dhisey Jazira (Mogadishu) warshad soo saarta laashash yar yar oo ay matoorro saaran yihiin iyo kuwo aaney saarneyn, kana sameysan mayrax, kuwaas oo qaab deyn ah uu ku bixin jirey Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed. Bangigu waxa kale oo uu deyn siin jirey iskaashatooyinka kaluumeysiga iyo shakhsiyaadka laashashka qaatey si ay ugu haqabtirtaan qalabka kale ee laashashkaasi u baahan yihiin si ay u hawlgalaan sida shabaag iyo wixii la mid ah. Sannadihii 1980-dii, goortii gacan ku hayntii ganacsi ee dawladdu dhammaatey, waaxda kalluumeysiga waxa ay sameysey horumar dheeraad ah, ganacsiga gaarka ahi waxa uu bilaabey ka ganacsiga Aargoosatada iyo dhegaha libaax-badeedka oo labaduba qiimo weyn ku lahaa seyladaha dibedda.

Qaybta gaarka ah (ganacsiga) ee gobollada Puntland si weyn aey u horumartey sannadihii 1990-dii kadib markii ay burburtey dawladdii Soomaaliyeed, isla markaana ay joogsadeen xayiraadihii ganacsi ee dawladda ka iman jirey. Ka ganacsiga aargoosatada (Panulirus Spp.) waxa uu gaar ahaan ka kobcey xeebaha badweynta Puntland ee Hindiya. Sidoo kale, waxa kordhey ka ganacsiga dhegaha iyo hilibka libaax-badeedka taas oo in aad u badan kor u qaaddey dakhliga beelaha kalluumaysatada ah. Tusaale ahaan, sannadkii 1998-dii, dakhliga laga heley dhoofinta aargoosatada iyo dhegaha libaax-badeedka waxa lagu qiimeeyey 3,500,000 doollarka mareykanka ah, halka dakhliga ka yimid libaax-badeedka loo dhoofshey Afrikada Bari uu ahaa 500,000 doollarka mareykanka ah. Labada badeeco ee hore, aargoosatada iyo dhegaha libaax-badeedka waxa loo dhoofshaa Imaaraadka Carabta (U.A.E), qiimaha halkii kiilo ee dhegaha libaax-badeedku mararka qaarkood waxa ay gaartaa 80 doollar, halka kiilada aargoosatada qiimaheedu celcelis ahaan gaaro 20 doollar.

Il-dhaqaaleed kale ee xoojisa dhaqaalaha kalluumeysatada waxa noqdey doonyaha ka yimaada waddamada shisheeye. Doonyahan waxa ay soo booqdaan xeebaha Puntland ee Gacanka Cadan iyo badweynta Hindiya si ay kalluumeysatada uga iibsadaan Tarraaqad. Intaa waxa dheer, kalluumeysatada qaarkood oo heshiis saamile ah la gala doonyahaas**,** sidaasna ku kasbada dakhli dheeraad ah. Sida ay tilmaameen ka-qeybgaleyaashu, caqabadaha ugu waaweyn ee hor taagan kalluumeysatada Puntland wakhtiga hadda ah waxa ka mid ah: b) Tuugada badda---maraakiib shisheeye oo xaalufisa badda, t) Dalabka oo yar iyo suuqgeybta oo liidata, iyo j) Qalabka wax-soo-saar oo kooban iyo qalab keydin/ qaboojin la'aaneed.

4.2 Dhoofka iyo Ganacsiga Badda

La-wareysteyaasha baarista iyo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa ay sheegeen in reer Puntland leeyihiin dhaqan badeed taariikh dheer leh. Muddo boqolaal sano dhan, waxa dadka Puntland xiriir ganacsi adag la lahaayeen ilbaxnimooyinkii hore sida Faraaciintii Masar, gaar ahaan muddadii ay talineysey boqoraddii Hatsapshut. Doonyo shiraacley ah oo ka tagey Geeska Africa ayaa ka gooshi jirey dariiqyada loo maro Masar, Gacanka Faaris

(dekedaha Kuweyt, Basra, Iiraan), Jeesaan, Mukhalla, iyo Hindiya iyaga oo u jeeda Waqooyi iyo Bari, iyo Mombaasa iyo Zanzibar iyaga oo u jeeda Koofur**.** Sida ay ku warbixiyeen la wareystataashu, doonyahaasi waxa ay badeeco u kala gudbin jireen Geeska Afrika iyo ilbaxnimooyinkii hore. Badeecadaha ay ka mid yihiin xabag, malmal, foox, luul, lohod, hargo iyo saamo, xaniid, baal goroyo, Tarraaqad, iyo hilib libaax-badeed la qallajiyey oo cusbeysan, waxa laga dhoofin jirey Puntland. Iyadana waxa badeecad-celis ahaan loo keeni jirey waxyaabo ay ka mid yihiin dhar, alaabada quruxda loo xirto, iwm.

Safarrada baddu waxa ay ku xirnaayeen Dabeysha Ganacsiga ee K.G. iyo W.B. Xilliga iyo dabeecadaha dabeyshiisa ayaa xaddidi jirey safarka. Maaddaama doonyahan ku socdeen xoogga dabeysha, xawaarahoodu waxa uu ahaa mid yar, safar hal jiho ahina waxa uu qaadan jirey lix bilood. Iyada oo ay sababayeen Dabeyluhu, doonyuhu waxa ay oolli jireen dekedaha ay u socdeen iyaga oo mararka qaarkood dhowri jirey billowga xilliga xiga si ay dabeyshu dib ugu celiso halkii ay ka yimaadeen - *Yaahuun iyo Makhoor*.

La wareystayaasha baarista iyo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa kale oo ay tilmaameen in badmareenka (ama badmaaxiinta ama baxrida) iyo kalluumeysatada Puntland muddadaas dheer ku kasbeen dhaqan badeed ballaaran, marka la eego dhinacyada bad-maridda, cilmiga xiddigaha, kalluumeysiga iyo dhoofka, saadaalinta cimilada, iwm. Mid ka mid ah dhaqammada badda Puntland ee aad u muuqda waa isticmaalka jadwalka taariikhda ee “Nayruuska ama Dab-Tuurka/Dab-shidka”, kaas oo ay isticmaalaan reer Puntland guud ahaan, gaar ahaanna bad-mareenku. Sannadkan 2001-da, jadwal-sannadeedka Nayruusku waxa uu galey 23ka Luuliyo. Jadwalkan waxa uu leeyahay 365 maalmood, mana xisaabsho maalinta dheeraadka ah ee uu leeyahay jadwal-sannadeedka Shamsiyadu (366 maalmood). Bad-mareennadu waxa ay u isticmaalaan jadwalkan taariikhda ah odoroska dabeecadaha iyo dhaqdhaqaaqa dabeylaha iyo mawjadaha badda goobaha ay ka hawl galaan (aag badeedka ku baahsan Hindiya, Masar iyo Zanzibar). Waxa uu jadwalkani u suuro-geliyaa badmareenka saadaalinta cimilada iyo xilliyada dhoofka.

Naakhuudayaashii dhaqamiga ahaa ee hore ma haysan aalado ka caawiya badmaridda. Habeenkii waxa ay kaashan jireen xiddigaha, maalintiina afarta jiho ee waaweyn ee muhiimka ah oo ku kala magacaaban: *Jaah (Waqooyi), Madlac(Bari), Qudub(Koofur), Muqib(Galbeed) iyo Maa Beynaa(inta u dhaxeysa labo kasta).* Run ahaanti naakhuudayaashu waa ka adkaadeen badda waxa ayna yeesheen khibrad weyn sida ay tibaaxayaan oraahyada caanka ah ee ay ka mid yihiin:

“*Sidii ximir muddadii soo baxdey oo mir iyo roob keeney,*

Shiraaceeda muulka ah hadduu moofirka u geeyo,

Inuu kaasi meel daran ku wado magane yaw sheega”

“ Boowe, ma doonteennaas ayaan raacnaa,
Mise berrigeenna ayaan marnaa oo ilaah baan tawakalnaa”

“Badi waa jaa’ir, jaa’irbaana looga baxaa”

La-wareystayaasha baaristu sida ay xuseen, doonyihii shiraacleyda ahaa ma lahayn wax aalad ah oo lagu ogaado qotada (*moolka*) badda marka bad-weynta la marayo, berrina aanu muuqan. Si moolka loo ogaado, haddii ay maalin tahay doonyuhu waxa ay sameyn jireen *Buld*i; bir culus oo salka ka ballaaran ayaa lagu xiraa silsilad ama xarig**.** Badmareenka doontu waxa ay mariyaan salka ballaaran ee birta xayr, biyaha aey ku tuuraan, silsiladdana ama xariggana waa u siidaayaan illaa birtu gaarto salka badda. Badmareenku dhowr jeer aey silsiladda/xarigga inta ay kor u dhuftaan siidaayaan. Birta biyaha ayaa laga soo saaraa, waxana la eegaa salka birta. Haddii xayrtii marsaneyd salka lagu arko jeexdimo, waxa taasi astaan u tahay in salka baddu yahay dhagax dhadhaab ah. Taasi waxa ay sheegeysaa in meeshu tahay badweyn, oo aaney xeebi dhaweyn. Haddiise, salka birta ee xayrtu marsaneyd lagu arko ciid ku dheg-dheggan, salka baddu ciid ayaa uu leeyahay oo micnaheedu yahay in xeebi dhowdahay. Haddii xilligu habeen yahay, badmareenku ma isticmaali karaan habka kor ku xusan, waayo waa mugdi. Waxa ay la yimaadaan hab kale oo ay ku ogaadaan moolka badda ay marayaan: nin badmareen ah ayaa loo diraa khanka hoose ee doonta si uu dhegta u saaro looxa doonta una dhageysto sanqar dibedda looxa ka yeereysa. Haddii uu maqlo sanqar, taas waxa ay tibaaxeysaa kalluun ka qaraabanaya (cunaya) cayayaanka ku dhex nool (dowsar) suufka u dhexeeya alwaaxda doontu ka sameysan tahay. Joogitaanka kalluun badda la marayo waxa uu sheegayaa in xeebi dhowdahey, waayo kalluunku had iyo jeer waxa ku nool yahay agagaarka xeebaha. Haddii uu badmareenku maqli waayo jabaq, meeshu kalluun ma leh, waxana la marayaa badweyn aan xeebi dhaweyn.

Qaab kale ee lagu garto fogaanta uu berrigu jiro marka ay maalin tahay waa iyada oo la eego midabka biyaha badda: midab buluug rassiin ah waxa uu tilmaamayaa in qotada baddu aad u dheer tahay. Midab buluug khafiif ahna waxa uu tilmaan u yahay in aaney qotadu (moolku) aad u dheereyn, berrina dhow yahay.

Si loo cabbiro xawaaraha doontu ku socoto, badmareenku waxa ay isticmaali jireen hab aad u fudud: doonta oo socod ku jirta ayaa badmareenku horaadka doonta cad yar oo loox ah ku tuuraa badda, isaga oo isla markaas saacaddiisa ka eegayaa/xisaabaya inta daqiiqadood ee uu looxaasi kaga dhammaado dhererka doonta. Markaa ka dib, tirada daqiiqadaha uu heley ayaa uu u qaybiyaa dhererka doonta oo uu hore u yaqaanney. Natiijadu waxa ay noqoneysaa xawaaraha doontu ku socoto daqiiqaddiiba. Tiradaas dambe marka lagu dhufto 60 waxa soo baxda xawaaraha doontu goyneyso saacaddiiba.

4.3 Intifaacsiga Kheyraadka Badda

Kheyraadka Badda

Puntland waxa ay leedahay bad aad ugu habboon nolosha kalluunka. In kasta oo uu dhuuban yahay ballaceedu, sida badan 15 Km, haddana bedka uu ku fadhiyo "intercontinental shelf-ka" badda Soomaaliya waa 27,432 Km^2. Puntland qaybtaas waxa ay ku leedahay 17, 432 Km^2, oo dhan 63% wadarta guud. Intaa waxa dheer, aagga Xaafuun "intercontinental shelf-ka**"** uu leeyahay waxa uu gaaraa 80 Km. Dabeysha Maansuunka Koofur Galbeed ee dhacda bilaha Maajo - Agoosto waxa ay abuurtaa hirar duleedyo xawli badan ku socda kuwaas oo leexsama goorta ay u soo dhowaadaan xeebaha Waqooyi Bari. Tani waxa ay sababtaa barabax ku dhaca biyaha fadhiya aag xeebeedyada iyada oo ay beddelaan biyo qabow oo burqanaya isla markaana nafaqo leh. Dabeysha Maansuunka ee Diseembar - Febraayo iyana habkaa mid lid ku ah aey keentaa in kasta oo aaney burqasho lahayn (waxa sidaa qorey Sommer et al. 1996; Baars et al 1998). Dabeysha Ganacsiga iyo hirarka waaweyni labaduba waxa dhinac kale ay lid ku yihiin kalluumeysiga dhaqamiga ah, iyaga oo ku kooba xilliga kalluumeysiga badanaaba inta u dhexeysa labada Maansuun ee bilaha Oktoobar, Nofeembar, Maarso iyo Abriil.

Noocyada iyo cufnaanta kalluunka waa ku kala duwan yihuiin Xeebuha. Xog arrintaa khuseysa waayahan lama ururin. Hase yeeshee, sinjiyada ku badan waxa ka mid ah: large pelagic noocyada kala ah yellow fin, tuna, long-tail tuna, bonito, skipjack, iyo Spanish mackerel. Small pelagic species oo ah Indian Oil Sardinella, rainbow, sardine, scad, horse mackerel, iyo anchovies, halka noocyada ganacsi ee ugu mihiimsan demersel fish yihiin grouper, snapper, grout iyo sea beam. Tiro badan oo ah noocyada shark Iyo ray ayaa iyana la diiwaangeliyey. Waxa kale oo xeebaha Puntland ku nool tiro badan oo ah Aaragoosatada xeebeed ee laga ganacsado, genus panulirus, iyo noocyada badweynta ku nool ee Puerulus Sewell iyo Puerulus Carinatus qotooyinka 150-400m.[1]

Daraasadda WSP ee 1997-1999 waxa ay sheegeysaa in xogta ugu wargalsan ee tirakoobka kheyraadka ku jira badda Soomaaliya uu sameeyey RV Dr. Fredtjof Nansen sannadihii 1980-dii, kadib markii uu qaadey shan daraasaad jabaqeed oo uu maalgeliyey mashruucii FAO/NORAD/UNDP Maarso 1975 illaa Nofeembar 1976. Ma jiro tirakoob dhab ah ee tilmaamaya mugga jillaabashada kalluun duleedka, balse wasaaraddii Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee dawladdii Soomaaliyeed sannadkii 1986-dii waxa ay ku qiyaastey kalluun duleedka waaweyn iyo aargoosatada qodaxda leh sannadkii laga soo saari karo badda in ay dhan yihiin 8000 iyo 1500 metric tan sida ay u kala horreeyaan. Marka laga hadlo aaragoosatada**,** P.J. Fielding iyo B.Q. Mann oo iyagu Puntland ka sameeyey daraasad, waxa ay soo saareen tirakoob ku saleysan qiyaastan**:**

[1] T. Stormme, *Coastal and marine environmental Problems of Somalia.* 1987. UNEP Regional Seas Reports and Studies No. 84 Annex IV, Sectional Report on Marine Living Resources, P.93

wadarta guud ee aaragoosatada nool inta u dhexeysa Foocaar iyo Eyl waxa ay ku sheegeen tiradeeda 1,200,600 xabbo ama 264 tan, wadarta wax soo saarka guud ee gobolkuna sannadkii tahay 280^2 . Tirakoob kale ee wax soo saarka sannadlaha ayaa lagu kala warbixiyey 116 tan sannadkii 1985, 540 tan 1994, iyo 300 tan 1995 (Everett & Jelleher 1998). Arrintani waxa ay muujineysaa in keydku uu aad u badnaa sannadihii hore, hoos u dhacanna ay sabab u yihiin isticmaal xad dhaaf ah iyo qaab kalluumeysi aan xaddadneyn ama loo abbe deyin.

Waa wax aan caqli-gal aheyn, iyada oo kheyraadka baaxaddaa le'eg jiro, haddana in ay jirto saboolnimo baaxad leh, afar bilood ama 150 maalmood ugu badnaanna yahay xilliga la kalluumeystaa. Kheyraadka badda lagama faa'ideysan karo xad dhaafsiisan nolol maalmeed, wax horumar muuqdana laga fili maayo waaxda kalluumeysiga haddii beelaha kalluumeysta ee Puntland aaney helin gaadiid kalluumeysi beddela kan hadda jira, kuwaas oo isla markaana awood u leh in ay iska caabbiyaan dabeylaha xoogga badan, baranna hababka kalluumeysiga iyo farsamada casriga ah, isla mar ahaantaana helin qaabab keydineed. Teeda kale, aqoonyahannadu waxa ay qayladhaan ka bixiyeen xawliga lagu kalluumeysanayo libaax-badeedka iyo aargoosatada**.** Sida ka muuqata hoos u dhaca ku dhacey aargoosatada la soo saarey intii ka dambeysey 1994-tii iyo farqiga weyn ee u dhexeeya keydka iyo gurashada ee jira, sida ay caddeeyeen labada seynisyahan ee quusa ee Fielding and Mann, kheyraadku waxa uu ku dhow yahay gabaabsi. Maraakiib shisheeye ah ayaa si sharci darro ah xeebaha uga xaalufiya labada nooc kale ee aargoosatada**.** Wax xog ah lagama hayo heerka uu gaarsiisan yahay isticmaalkaas xad dhaafka ahi. Waxa lagama maarmaan ah in intifaacsiga aargoosatada sida ugu dhaqsaha badan wax looga qabto, sida: xadeyn tirada kalluumeysatada ugaarata aargoosatada, in la joojiyo ugaarashada aargoosatada muddada gaaban ee ay tarmeyso, isla mar ahaantaana tallaabooyin adag laga qaado ciddii jillaabta aargoosatada dhallaanka ah iyo tan riman. Fulinta tallaabooyinkaas in badan ma suuro-gali karto inta uu maqan yahay maamul dhexe oo awood leh. In kasta oo heerka intifaacsiga aanu lahayn diiwaan sax ah, haddana libaax-badeedka iyo ray fish waxa ay ka mid yihiin sinjiyada khatarta ugu jira dabargo'a marka la eego heerka intifaacsiga wakhtigan hadda ah.

Marka la eego Xeerka Kalluumeysiga, kheyraadka baddu waa hanti intifaacsigeeda bulshadu u siman tahay. Waa la oggol yahay in hantidaas lala wadaago Soomaalida ku nool gobollada kale ee waddanka, balse dadka ajnabiga ahi ma leh xuquuqdaas. Mid ka mid ah caadooyinka kalluumeysiga badda ayaa ah in aanu ruuxna gaar ahaan u sheegan karin milkiiyad goob ama bed go'an ee badda ah. Hase ahaatee, la-wareystayaasha daraasadda iyo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is- weydaarsigu waa ay ku kala duwanaayeen sida uu xeerku ugu kala qaybsho aagagga kalluumeysi Macaad-da (hawaarida iyo weelasha kalluumeysi ee yar-yar) maraakiibta kalluumeysiga ee waddanka laga leeyahay iyo kuwa qalaad ee sharciga sita: badankood waxa ay ula muuqatey in, in kasta oo kheyraadka badda la wadaago, haddana marka loo eego xeerka badda, aagaggu waa kala xadeysan yihiin: Macaad-da waxa u go'an laga

billaabo xaaxida xeebta illa iyo inta ay aragtida indhuhu gaarto. Maraakiibta waddanka laga leeyahay iyo kuwa qalaad ee sharciyeysan waxa ay ka kalluumeysan karaan fogaantaas wixii ka shisheeya. Qaar ka mid ah la-wareystayaasha daraasaddan iyo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu sidaa waa ay diideen, oo waxa ay sheegeen in wax xad ahi aanu u dhaxeyn Macaad-da iyo maraakiibta waaweyn, ee waxa keli ah ee xaddida fogaanta kalluumeysigu yahay awoodda matoorka weelkaas kalluumeysi. Waxa ay u muuqataa in fikradda qabta “fogaanshaha artida indhuha” la isticmaali jirey ka hor inta aan laashashka matoorleyda ahi ku soo biirin kalluumeysiga.

Jawaab bixiyeyaashu waxa kale oo ay sheegeen in Xukuumaddii Militerigu dhaqan-gelisey laba xeer: b) mid ansixinaya xeerka dhaqamiga ahaa ee xadka kalluumeysi u kala yeelayaa Macaad-da iyo maraakiibta waaweyn, iyo t) xeer xad kalluumeysi u kala sameynaya iskaashatooyinka kalluumeysiga. Xeerka dambe ciqaab ayaa uu ku waajibinayaa weelkii kalluumeysi ee lagu qabto isaga oo ka kalluumeysanaya aag iskaashato kale. Wixii uu soo qabteyna waxa xaraashanaya, balse qiimaheeda oo lacag ah celinaya, iskaashatada aaggeeda lagu xad gudbey.

Kooxihii la wareystey iyo ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waa caddeyn kari waayeen jiritaanka xeerar qeexa tashiilidda iyo habsami-maareynta kheyraadka badda. Badankood waxa ay sheegeen in xeerar rasmi ahi aaney jirin, halka tiro yar ku adkeysatey jiritaankooda iyaga oo magacaabey xeer badeed mamnuucaya kalluumeysi sabab iyo baahi la’aaneed, khasaarinta kheyraadka badda, ciqaab aan la qeexinna ku xukumaya kuwa sidaas yeela. Waxa ay u muuqataa arrinta ah tashiil-isticmaalka iyo habsami-maareynta kheyraadka baddu in aaney weli noqon mid gasha ajendaha kalluumeysiga Puntland, taas oo ay sabab u tahay kheyraadka badda oo aad u badan, intifaacsiga oo yar, degaannada beelaha kalluumeysatada ah oo aad u kala durugsan, dalabka oo yar, iwm.

4.4 Weelka Kalluumeysiga ee Dhaqamiga ah

Kalluumeysatadu waxa ay xaqiijiyeen in wakhtigan afar nooc oo weel kalluumeysi ah laga isticmaalo Puntland: labo waa khashabado loox ah, labana waa nooca laashashka ka sameysan mayrax. Markii la wareystey, kalluumeysatadu waxa ay sheegeen in shaqaalaha aaladaha dhaqamiga ah oo loo yaqaan “*Macaad* ama *Jiswad”,* u kalluumeystaan qaabab iyo habab kala duwan. Tusaale ahaan, habka ugaarashada libaax-badeedka ee jilibyada loo dhigo waxa loo yaqaan *Shakaad*, ka raadinta kalluun qareedka salka badda waxa loo yaqaan *Shuquur*. Waxa kale oo ay kalluumeysatadu jilbo ka laalaadiyaan dhinacyada laashashka matoorrada leh kuna socodsiiyaan xawaare sare si ay u qabsadaan noocyada kalluunka ee Tabaadin, Tarraaqad iyo mararka qaarkood libaax-badeed - tan waxa loo yaqaan *Shaayad*. Ugu dambeyntiina, kalluumeysatadu waxa ay dhigtaan shabaago cabbirro kala duwan leh oo ay badanaaba ku dabaan libaax- badeed, tabaadin iyo tarraaqad.

Kalluumeysatadu waxa ay qeexeen in rugaha kalluunku yihiin seddex qoto aag-badeed: b) salka badda, oo laga helo kalluunka heerka ugu hooseeya oo sida badan gaarsiisan 40 baac. Qotadan, kallluun ayaa ku nool qararka iyo jeexdimaha dhagxaanta dheexdooda, waxana loo yaqaan Kalluun-Qareed. t) nooca labaad ee kalluunka waxa laga helaa inta u dhaxeysa dusha sare iyo salka badda, waxana ka mid ah tarraaqad, libaax-badeedka, iyo j) nooca seddaxaad ee kalluunku waxa uu ku nool yahay duleedka biyaha badda. Sida xoolaha nool ee ay reer miyiga Puntland dhaqdaan, iyada oo ay jiraan duruufo aad u adag sida biyo la'aan, roob yari, abaaro, oo aanu wax-soo-saarku dabooli karin baahida nolosha, aey sidoo kale kalluumeysatadu ku nool yihiin nolol aad u qallafsan, sababaha soo socda awgood: heerka noloshooda oo aad u hooseeya, degaanka (badda) oo aad u adag iyo qalabka iyo farsamada ay ku kalluumeystaan oo dambeeya, iyo iyada oo aaney jirin kaabeyaal u fududeeya suuq geynta waxa ay soo saaraan. In kasta oo helitaanka kalluunku aad u badan yahay, haddana kalluumeysatadu waxa ay u shaqeeyaan nolol maalmeed.

Sida xoolo dhaqatada oo kale, kalluumeysatadu waxa ay leedahay dhaqan-hoosaad gaar u ah:

(I) ***HEE-LEEYA'*** ***YAA WILBEE*** ***HEE-LEEYA'***
WILBE WAA WILBEE, *WILBE YAA WAXBAREY?* *HEE-LEEYA'*
WEYNAA WAXBAREY *HEE-LEEYA'*

(II) *RAG BAAN GEEL KALE LAHEYN* *RAG BAAN GUUYA U MAQNEYN*

Heestan waxa ay tilmaameysaa in aaney kalluumeysatadu waxba ka duwaneyn geelleyda ama xoolo-dhaqatada fogaanta dheer u dhaansada. Heestu waxa ay muujineysaa in aan kalluunka goor walba laga helo badda. Xoolo-dhaqatadu waxa ay sawiraan daaqsinkooda iyo xaaladihiisa, waxa ay u heesaan geela mararka qaarkoodna waaba la hadlaan. Sidoo kale aey kalluumeysatadu u sharraxaan xaaladaha badda, uguna heesaan hawaaridooda iyo doomahooda:

(IV) MADOOBEY WAXA MADOW
BADDOO MURUGTA MADOW
MAYEYGA CIRKAA MADOW
MASKANA DUMAR BAA MADOW

(V) QOOLAABANEY
QORIGAA MA JABO
BADDA TAAJIYOO
BARRIGA U TALLOW
NALA ROOR ANNANA
AAN KU RAAWISNEE

4.5. Doorka Dumarka ee Kalluumeysiga

Sida waaxaha kale ee dhaqaalaha, hawl-qaysiga qoyska kalluumeysatadu si weyn ayaa uu u muuqdaa. Marka la eego qoyska, hawsha kalluumeysiga waxa qabta aabaha iyo wiilasha badda geli kara. 10-sano jir aey wiilashu ku billaabaan in ay aabaha u raacaan badda si ay u bartaan xirfadaha kalluumeysiga. Wiilashu 18 jir markii ay gaaraan waxa ay noqdaan kalluumeysato madax bannaan, lehna qalab kalluumeysi u gaar ah. Waayadii hore, dhallinta waxa waajib ku ahayd in ay ka gudbaan imtixaan ah dillaacsiga xuubka dhegta (*dhagadalooshi)* iyaga oo quusaya qoto dheer. Wiilku haddii uu imtixaanka ku guuleysto, aabihii ayaa ku daweyn jirey dab uu kaga dhejiyo dhegta dillaacdey dusheeda. Taa ayaa sababtey in kalluumeysatada da'da weyn (waayeelka) ee hadda jooga badankood dhafoorka ku leeyihiin summado dab.

Hooyooyinka iyo gabdhaha qoysku waxa ay xannaaneeyaan carruurta, qabtaanna hawlaha guriga sida falkinta dermooyinka, iyo raacidda xoolaha guri-joogta ah ee reerku leeyahay. Maaddaama kalluumeysigu isu beddelayo heer ganacsi, dumarku waxa ay qabtaan hawlaha ay ka mid yihiin: tolidda shabaagta, cunto karinta iyo ku iibinta cunto karsan goobaha lagu hagaajiyo kalluunka, gaar ahaan xarumaha ganacsiga aargoosatada ee Eyl, Garacad, Beyla iyo Foocaar. Inta lagu jiro xilliga ugaarashada aargoosatada, tuulooyinka xeebaha waxa dega kooxo kala duwan oo ay dumarku ku jiraan. Is-dhaafsiga iyo dhaqdhaqaaqa lacagtu aad ayaa uu u badan yahay. Halkaa waxa ay dumarku ka helaan faa'ido lacageed. Qaar ka mid ah dhallinta reer miyiga ah waxa ay baratey xirfadaha kalluumeysiga, waxa ayna ka shaqeystaan ganacsiga aargoosatada**.** Dakhliga ay kasbaan ayaa soo jiita dumar iibsha Qaad (Jaad), sigaar, biyo sifeysan iyo cabitaanno kala duwan. Arrintani waxa ay sababtaa in dhallintaasi aaney sida badan wax keyd dhaqaale ah yeelan. Inta xilliga kalluumeysiga lagu jiro, guurku waa uu ku badan yahay goobaha kalluumeysiga, halkaas oo ay ku kulmaan dad meelo kala duwan ka kala yimid. Dumarka iyo raggu waxa ay leeyihiin is-dhexgal, qaybsi hawsha adag iyo waliba qaybsi dakhliga la helo.

Sida badan, degaanka qoyska kalluumeysatada aargoosatadu waa ku-meel-gaar, maaddaama hawshooda kalluumeysi tahay xilliile, ayanna socon sannadka oo dhan. Si ay u helaan nafaqada aassaasiga ah ee loo baahan yahay (hilib iyo caano), dumarka beelaha kalluumeysatada joogtada ahi waxa ay dhaqaan tiro kooban oo ari ah, kuwaas oo aan badanaaba dhaafin 50-80 neef. Horumarkan la taaban karo ee dakhli dhalinta ah isaga oo uu jira, ayaaney haddana dumarka beesha kalluumeysatu talo-bixin ku lahayn tacabka badeed ee ay raggooda, wiilashooda ama walaalahood ka dhaliyaan kalluumeysiga, sifadaas oo ay kala mid yihiin dumarka beelaha xoolo dhaqatada ah oo iyagana sidaas oo kale aan laga talogelin maamulka dakhliga ay wax ka tacbaan.

4.6. Wax-wada-qabsiga Kalluumeysatada

Isu-gargaaridda iyo is-kaashiga dhaqaale ee heerarka kala duwan leh ee ay ku dhaqmaan kalluumeysatadu waxa la sheegaa in ay yihiin kuwo ka soo jeeda Xeer. Arrintu si kasta ha ahaatee, ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsiga iyo la-wareystayaasha daraasaddu waa ku kala duwanaayeen in xeerarkani yihiin kuwo ku dhaqankoodu waajib yahay iyo in kale. Inta badan waxa ay ku adkeysteen in xeerarka jira ay waajib ka yihiin kalluumeysatada gudaheeda ha ahaaato marka xeebta la joogo ama badda gudaheeda. Qaar ka tirsan ka-qayb-galeyaashu waxa ay ku doodeen in caadooyinka iyo dhaqammada jira aaney aheyn kuwo khasab ah, looguna dhaqmin si buuxda.

4.7. Iskahorimaadyada

kalluumeysatada la wareystey badankood waxa ay aaminsanaayeen in, marka laga reebo ganacsiga aargoosatada, iskahorimaadyada ka dhasha kalluumeysigu aaney badneyn. Kheyraadka badda waa ka badan yahay kalluumeysatada degaanka, goobaha kalluumeysiguna ma aha kuwo ciriiri ah. Hase yeeshee, keydka aargoosatada waa mid xaddadan waxa uuna ku ribban yahay goobo baaxad yar, halkaas oo tiro aad u badan oo shirkado aargoosato ahi ku jiraan loollan; sidaas aeyna iskahorimaadyadu badanaaba uga dhex-dhacaan shirkadaha aargoosatada ee ku hardamaya goobo kalluumeysi. Iskahorimaadyadu waxa kale oo ay ku badan yihiin ganacsatada badda. Kuwan iskahorimaadyadu waxa ay sida badan uga yimaadaan; xaalado ku lug leh badeeco xumaatey, badeeco la waayey, badeeco qoydey, heshiis la jebshey ka dib markii loo wareegey ama heshiis kale lala galey koox kale ee ganacsatada degaanka ah amaba kuwa wata maraakiib.

Kalluumeysatadu waxa ay tilmaameen in iskahorimaadyada ugu weyn ee hadda jira yihiin joogista xeebta Soomaaliya maraakiib qalaad kuwaas oo xaalufinaya badda. Sida ay sheegeen, intii ka dambeysey burburkii dawladdii Soomaaliyeed 1991-dii, kheyraadkii badda Puntland ee hodanka ahaa waxa ku yimid boob aan xad lahayn. Maraakiib qalaad ayaa si xad dhaaf ah u guranayaa kheyraadka, iyada oo ayan cidna wax ka qabaneyn, isla mar ahaantaana wax oggolaansho ah ka haysan maamullada ka jira meelaha qaarkood. Waayadii hore, maraakiibtan burcadda ah waa ay cabsan jireen oo uma soo dhawaan karin xeebta. Hadda, iyaga oo kaashanaya muwaadiniin Soomaali ah, ma xurmeeyaan xadka dhaqaale ee badda Soomaaliya, waxa ayna aad ugu soo dhawaadaan xeebta, iyaga oo khatar geliya kalluumeysatada yar-yar, ula kacna u dul mara oo kidfa shabaagta ay badda dhigteen. Kalluumeysatadu waxa ay sheegeen in ay si walba oo ay karaan isugu dayeen difaaca aaggooda kalluumeysi. Hase yeeshee, maraakiibtaasi, iyaga oo mar labaad kaashanaya dad Soomaali ah, waa is-hubeeyeen. Tusaale arrintan waxa u ah iskahorimaad dhawaan ka dhacey aagga tuulada Laamiye.

Dhacdada 16

Sannadkii 2001, kalluumeysatada degaan xeebeedka Laamiye oo ku taal inta u dhexeysa Bender Beila iyo Xaafuun ayaa aad uga caroodey una dulqaadan waayey maraakiibta xaalufinaya badda kuwaas oo baabi'inaya shabaagtoodii. Waa ay is abaabuleen, weerar aey ku qaadeen maraakiibtaa qalaad iyaga oo adeegsanaya hub fudud saaranna laashash matoorro leh. Subaxnimadii maalintii weerarka ku xigtey, maraakiibtii ajnabigu watay waxa ay soo qaadeen weerar aargoosi ah. Laashashkii oo xeebta jooga aey dab saareen iyaga oo hub culus isticmaalaya, isla mar ahaantaana, madaafiic aey ku duqeeyeen tuuladii xeebta ee Laamiye, halkaas oo ay geysteen khasaare lixaad leh. Kalluumeysatada degaanku waa ay tamar-beeleen, maamulka Puntland-na waxba kama qaban karo maaddaama aanu lahayn ciidan ilaalo-xeebeed oo leh awood, haystana qalabka lagama maarmaanka ah.

4.8. Qaybsiga Dakhliga Doonyaha Waaweyn

Badmareenka iyo kalluumeysatada la wareystey intii ay cilmi-baaristu socotey waxa ay si tifaftiran u sharxeen xeerka badda, kaas oo qeexa in badmareenku (baxridu) yihiin saamiley ee aaney ahayn shaqaale. Sidaa awgeed, xeerka baddu uma aqoonsana baxrida ama kalluumeysatada xaquuqaha shaqo iyo nacfiga dheeraadka ah ee shaqaalaha. Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu iskuma raacin jiritaanka qaab go'an oo loo qaybsado dakhliga. Balse, dhammaantood waxa ay isku waafaqeen in: 1) kharashka hawlgalka marka ugu horreysa laga gooyo dakhliga weelku ama doontu kasabtey oo isku duuban, 2) cadad aan la qeexin oo lacag ah loo qoondeeyo naakhuudaha, cadadkaas oo ku xiran mugga weelka/adoonta iyo dakhliga la kasbey. Soomaalidu waxa ay lacagtaa u taqaan *Xaqul-qalin* oo waxa ay u tahay naakhuudaha dakhli dheeraad ah, 3) waxa la soo wariyey in uu naakhuuduhu, xaqul-qalinkiisa ka dib, qaato afar saami: laba saami oo uu ka qaato qeybta shaqaalaha labana milkiilaha. Taa waxa loola jeedaa haddii faa'iidada (dakhliga) saafiga ahi tahay 2000 doollar, shaqaalaha iyo milkiiluhu waxa ay u qaybsanayaan 50% iyo 50%. Sidaa, shaqaaluhu waxa ay qaadanayaan 1000 doollar. Haddii tirada shaqaaluhu tahay 8, isla markaana lagu daro naakhuudaha oo isagu keligii u taagan laba shaqaale, markaa lacagtii 1000-ka doollar ahayd waxa loo qaybinayaa 10 saami, halkaas oo saamigiiba dhan yahay 100 doolar. Shakhsi kasta oo shaqaalaha ah waxa uu yeelanayaa 100 doolar, halka uu naakhuudahu yeelanayo 200 doollar. Naakhuudahu dhanka kale waxa uu milkiilaha ka qaadanayaa saami le'eg saamiga kaga soo aadey shaqaalaha, kaas oo isaguna dhan 200 doollar.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, badmareenka la wareystey waa ku kala duwanaayeen aragtida qaabka dakhliga doonta loo qaybsado. Tusaale ahaan, qayb intee le'eg ee dakhliga ah aey shaqaalaha iyo milkiiluhu qaadanayaan? Marka laga hadlo doonyihii hore ee shiraaca ahaa, badankood waxa ay sheegeen in, ka dib marka laga gooyo kharashka hawsha iyo gunnada naakhuudaha**,** dakhliga inta soo harta loo qaybin jirey sidatan: seddex qaybood

qayb (1/3) waxa qaata shaqaalaha, labada qaybood ee soo harana (2/3) waxa qaata milkiilaha. Tiro yar ayaa soo jeedisey in saami is le'eg wax loo qaybsan jirey. Baxrida oo uu naakhuudahu ku jiro, isaga oo laba shaqaale u dhigma, waxa ay qaybtooda u saanyadaan saami is le'eg. Markii doonyo waaweyn oo matoorro leh soo baxeen, dadkii la weydiiyey waxa ay sheegeen in, laba qaab midkood la isticmaaley: b) baxridu in ay ku shaqeeyaan mushaar-bileed, midkoodba uu qaato, sida badan, 100 doolar ama, t) dakhliga, ka dib marka laga gooyo dhammaan kharashka hawl-fulinta ee doonta, taas oo ay ku jirto dayactirka iyo gunnada naakhuudahu, in loo qaybsado sidan: seddex qaybood qayb (1/3) waxa qaadanaya shaqaalaha, iyada oo uu ku jiro kharashkii cuntada, labada qaybood ee soo hareyna (2/3) waxa qaadanaya milkiilaha. Xaaladdani waxa ay uga duwan tahay tii hore, marka doonyaha shiraaca laga hadlo, halka milkiiluhu bixin jirey dayactirka doonta, hadda waxa la bixinaya shaqaalaha iyada oo laga goynayo lacagta oo isku duuban. Taas waxa weliba dheer, shaqaalaha oo uu saaran yahay kharashka cuntadu.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxa laga yaabaa in sidaasi aaney caddaalad u muuqan, laakiin horumarka farsamada iyo aalado hawsha fududeeya ayaa had iyo jeer door weyn ka qaata xiriirka shaqo ee u dhexeeya shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha: hawaaridii dabeysha ku socon jirey waxa beddeley laashash iyo saxiimado, baxridu waayahan muruqooda kuma tuuraan baroosinka oo shaqadaas waxa qabta aalado koronto ku shaqeeya. Doonyaha matoorleyda ahi waxa ay kaashadaan raadaarro iyo aalado jabaqda adeegsada. Farsamada dhismaha doonyuhu waa ay horumartey, intii hore in ka badan ayaana la isku halleyn karaa. Waxyaabahaas dhammaantood waxa ay yareeyeen hawsha looga baahan yahay baxrida, taas oo hoos u dhigeysa baahidii loo qabey, isla mar ahaantaana wax ka baddeleysa qaabka wax- qaybsiga.

Haddii baxrida midkood damco in uu shaqada ka tago, sababtu waxa ay doontoba ha yeelatee, xeerka baddu waxa uu qabaa in waxa uu xaqa u leeyahay la siiyo. Haddii wakhtigaas ay doontu shaqeysey dakhli ka badan qiimaha hawl-galka, baxrigu waa uu helaa qaybtiisa. Haddiise kharashka taagani uu ka badan yahay dakhliga, baxrigu waxba ma leh.

Saami-qaybintu waxa ay u dhacdaa sidan: naakhuudaha**:** 4 saami (2 ka go'da qaybta shaqaalaha, iyo 2 ka go'da milkiilaha), Saranjiga (ku xigeenka): 1.5 saami (hal iyo bar oo dhammaanteed ka go'da qaybta shaqaalaha), inta soo hartay baxrida (sida shukaan**i**, quusaa, suqayar dereg, kariye, iwm) - mid kasta hal saami; kaaliyaha kariyaha: ¾ saami, iyo Kimiscunka: ¼ saami.

4.9. Dakhli-Qaybsiga Weelka Kalluumeysiga ee Yar-Yar

Sidii aan soo sheegney, qaabka saami-qaybsiga waxa ku dhacaya isbeddel sababta oo ah iyada oo uu isbeddel ku dhacayo habkii wax soo saarka iyo waliba qalabka casriga ah ee yimid. Saami-qaybsigu, waayadan dambe, waxa uu ku yimaadaa wada hadal ama gorgortan. Dadkii la waraystey waxa ay sheegeen in

hababka soo socda midkood loo isticmaalo Macaad-da (weelka yar yar sida hawaarida, bedennada): 1) haddii uu weelku leeyahay qalabka kalluumeysiga, qaybsigu waxa uu noqdaa sidatan: ka dib marka laga gooyo kharashka tacabka hawsha (dayactirku kuma jiro), faa'idada oo saafi ah barkeed waxa leh milkiilaha, barka kalena waxa leh shaqaalaha, amaba 2) haddii aanu weelku lahayn qalabka kalluumeysiga, saamiyadu waxa ay isu beddelaan sidan: seddax qaybood qayb (1/3) faa'iidada oo saafi ah (ka dib marka laga gooyo kharashka hawsha) waxa qaata milkiilaha, qayb (1/3) waxa leh qalabka kalluumeysiga la isticmaaley, qaybta harteyna (1/3) waxa qaata shaqaalaha. Labadaa hab ee la soo sheegayba, saamiga naakhuuduhu waa 2 saami oo ka yimaada milkiillaha iyo 1.5-2 saami oo ka yimaada inta shaqaalaha loo qoondheeyey. Dad tiro yar ayaa qabey haddii aanu weelku lahayn qalabka lagu kalluumeysanayo in faa'idada qaybsigeedu noqonayo: bar (1/2) loo gooyo qalabka, barka kalena (1/2) shaqaalaha, iyada oo milkiiluhu qaybta la wadaagayo shaqaalaha, balse qaadanayo qaybta saamilaha ugu sarreeya, kaas oo ah kan naakhuudaha oo isagu qaata 1.5 saami (saami iyo bar). Xaaladdan waxa muuqata in saamiga naakhuudaha weelka kalluumeysiga ee yar uu hoos ugu dhacey hal saami oo ka yimid shaqaalaha iyo saami barkiis oo ka yimid inta loo qoondeeyey qalabka shaqada.

Laashashka Matoorleyda ah

ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay sheegeen in habka faa'ido-qaybsiga laashashku badankood la mid yihiin kuwa Macaad-da: kalluumeysatada badankood waxa ay sheegeen in marka uu laashku leeyahay qalabka lagu kalluumeysanayo, saamigu u kala baran u yahay milkiilaha laashka iyo shaqaalaha. Haddii laashku aanu qalabka lahayn, qaybtu waxa ay noqoneysaa sidan: seddex qaybood qayb (1/3) saafida waxa leh laashka/milkiilaha, qayb (1/3) waxa leh qalabka, qaybta seddexaadna (1/3) shaqaalaha. Qaybta sidaas ahi waxa ay u muuqan kartaa caddaalad-darro: 33% faa'idada saafiga ah in ay shaqaaluhu ka helaan laashashka matoorleyda ah marka loo eego Macaad-da (hawaarida, bedennada iyo saxiimadaha aan matoorka lahayn) oo ay ka helaan 50%-na. Horumarka farsamo ee hababka wax-soo-saarka ayaa keeney in sidaas saami- qaybsigu noqdo. Halka Macaad-da shaqaaluhu xuddun u yihiin hawsha dhammaanteed, laashashka matoorleyda ah waxa hawsha qaybteed qabta makiinado oo hawsha shaqaaluhu waxa ay ku kooban tahay shabaag dhigidda, ka gurista kalluunka shabaagta, nadiifinta kalluunka ama goynta dhagaha libaax-badeedka. Sidaas oo kale, qalabka kalluumeysiga oo ah mid aan waddanka lagu sameyn (shabaagaha, sabbeeyeyaasha, jilbaha, xargaha, iwm.) waa ku qaali awoodda dhaqaale ee kalluumeysatada. Mararka qaarkood, saamiga loo gooyo qalabku waxa uu la mid noqdaa kan shaqaalaha (33%) ama kaba kor maraa. Shaqo heliddu waa ay ku badan tahay kalluumeysiga marka loo eego mihnadda naakhuudinta oo iyadu u baahan takhasus iyo sannado badan oo khibrad ah. Balse, qof si uu u helo qalab uu ku kalluumeysto, waxa uu u baahan yahay lacagta adag ee qalaad oo uu waddanka dibeddiisa uga soo gato amaba lacag aan yareen oo Shillinka Soomaaliga uga iibsado waddanka

gudihiisa. Sidaa awgeed, qalabka kalluumeysigu waxa uu ku socdaa in uu la tartamo ama beddelo shaqaalaha dhinaca lahaanshaha mudnaanta.

Dad tiro yar ayaa ku doodey ra'yiga ah in meelaha qaarkood, markia aanu laashku lahayn qalab, saami-qaybsiga faa'idadu noqdo sidan: bar (50%) qalabka, 30-42% shaqaalaha, saamiga milkiilaha/laashkuna hoos ugu dhaco 8-20%. Habka dambe marka la raaco, saamiga naakhudaha Macaad-du waxa uu hoos ugu dhacaa hal saami oo ka yimid shaqaalaha iyo saami barkiis oo ka yimid inta loo qoondeeyey qalabka kalluumeysiga. Laashashka matoorada leh waxa ay ku dallacaan shabaagaha aannu laashka amaba shaqaalihiisu lahayn 16-33% wixii ay soo saaraan. Taas waxa loo yaqaan *Jembi-laash ama xoobaalli.*

4.10. Xeer-dhaqameedka Badda (CurufAl baxri)

Ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay sheegeen in xeer-badeedka dhaqamiga ah ee Puntland saldhig u yahay hawlaha kala duwan ee badda, sida bad-maridda, jillaabashada, taakuleynta doonyaha khatarta ku jira, kireynta doonyaha, iibsiga, raridda iyo dejinta badeecadaha, iwm. Ka-qayb-galeyaashu waxa ay isku raaceen in aanu xeerka badda waxtarkiisa intaa ku koobneyn, yahayna aalad muhiimad u leh xallinta khilaafaadka ganacsiga badda iyo beelaha kalluumeystada ah ee Puntland. Xeerarka dhaqamiga ah ee badda siyaabo kala duwan oo rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn ayaa loogaga dhaqmaa Puntland gudaheeda iyo waliba Soomaaliya guud ahaan. Waxa kale oo Ka qaybgalayaashu soo jeediyeen in CurufAl baxriga la uruuriyo lana rasmiyeeyo.

Waajibaadka iyo Muhiimadda

Ganacsatada iyo beelaha kalluumeystada ah ee Puntland waa xurmeeyaan kuna dhaqmaan xeerka badda. Xeerka baddu waxa uu ka kooban yahay yahay caadooyin iyo habab muddo dheer dhismayey oo saldhig u noqdey kalluumeysiga**,** bad-maridda iyo ganacsiga badda. Xeerku waxa uu qeexaa dabeecadda iyo xiriirka u dhexeeya kooxaha kala duwan, xuquuqaha iyo waajibaadka dhammaan inta ku hawlan kalluumeysiga iyo badmaridda. Waxa uu ciqaab sharaf iyo mid maaddi ahba ku xukumaa ciddii jabisa xeerarka dhaqan galey. Sidaa oo kale, xeerka baddu waxa uu leeyahay muhiimad dhaqan-dhaqaale maaddaama uu tilmaan ka baxsho astaamaha duruufaha u baahan taageerada bulshada iyo is-taakuleynta kooxaha. Gole garsoor ka kooban aqoonyahanno ku xeel dheer xeerarka badda, oo loo yaqaan *"Amiir Al-baxr",* ayaa qaada garsoorka lagu dhexdhexaadinayo wixii khilaaf ah, go'aanna ka gaara arrimaha. Xeerka badda af-ahaan ayaa da'ba ugu gudbisaa da'da ku xigta, waxa uuna tixraacaa go'aannadii hore.

Xeerka baddu (*Curuf Albaxr)* wa xeerar dhaqan galey, kaas oo ka kooban qayb degaanka ka askuntey iyo qayb ka timid ilbaxnimooyinkii hore sida Faraaciintii

Masar, Faaris iyo Qaaradda Hindiya, meelahaas oo ay dadka reer Puntland la lahaayeen xiriir ganacsi, muddo boqolaal sano ahna la lahaayeen isdhexgal.

Abla-ableynta *Curuf Al-Baxriga*

La-wareysteyaasha iyo ka-qayb-galeyaashu waxa ay qeexeen *Curuf Al-Baxrigu* in uu yahay cutubyo caadooyin saldhig u ah kalluumeysiga; bad-maridda iyo ganacsiga badaha iyo waliba xal-u-helidda khilaafaadka. Waxa ay sheegeen in *Curuf Al-Baxriga* loo qaybiyo qaybaha soo socda:

Xeerarka Bad-maridda iyo Ganacsiga Badda

1. Naakhuudaha keligiis ayaa ka mas'uul ah maamulka iyo hoggaanka gaadiidka badda. Milkiiluhu sooma fara galin karo hawlaha haddii uu saaran yahay doonta iyo haddii kale-ba.
2. Wada dhoof (*Sinjaar*). Tan waxa loola jeedaa: doonyaha wakhtiyadii hore waxa ay ka sameysnaayeen loox, khatartuna waa badneyd. Sidaa darteed waxa sameysmey xeer waajibinaya in dooonyuhu wada dhoofaan, ugu yaraan laba-laba ama saddex- saddex, si ay isugu gar-gaaraan haddii uu shil mid ku yimaado.

Dhacdada 17

Wakhti aad u fog, nin la oran jirey Ina Hiirad ayaa jabiyey xeerka wada dhoofka. Doon ay wada socdeen badda ayaa xumaatey, waana uu diiday in uu gacan siiyo. Waxa uuna doontii uga dhaqaaqey bartamaha badweynta. Bulshada badda ku shuqul lihi arrintaasi aad aey uga xumaatey, taas oo Ina Hiirad lagu cambaareyn jirey intii noloshiisa ka hartey, iyaga oo arrintaas ku cabbirey oraahda ah: "Sinjaar Ina Hiirad baa Gooyey".

3. Gaadiidka badda waa ka xaaraan in ay shaqaaleeyaan qof aan dabaasha aqoon.
4. Naakhuudaha looma sheeganayo wixii dhaawac ama burbur si aan ula kac ahayn doonta uu soo gaara. Balse, waxa uu mas'uul ka noqonayaa dhibaatada uu sababo qof kale ee uu isagu mas'uulidda wadidda doonta u dhiibo.
5. Sida uu nidaamka cabbirka casriga ahi qabo, doonyaha dabbaalanaya, si ayan isugu dhicin, waa in ay kala fogaadaan (isu jirsadaan) ugu yaraan hal maylka badda ah maalintii, habeenkiina ugu yaraan laba maylka badda ah.
6. Doon kasta waa in ay dhanka bidixda ka dhaafta doonta kale. Doontii gudbeysa waa in ay ka istaagtaa, oo dariiq siisaa, doonta tooska u socota.
7. Haddii ay isku dhacaan Doon taagan iyo mid socod ku jirta, khaladka waxa leh mar kasta tan socodka ku jirtey, sababtu ha noqoto kama', awood dibedeed amaba cillad farsamo.
8. Waa mamnuuc in lagu dagaallamo Doon dusheed, ruuxii dagaal oogana waa la ciqaabayaa. Haddii midkood ama labada qofood ee dagaallamey uu/ay

diido/diidaan in uu/ay dagaalka joojiyo(aan), xeerku waxa uu qabaa in naakhuuduhu qofkaas/dadkaas ku xiro takhalka illaa laga gaarayo dekedda ugu horreysa, halkaas oo inta shaqada laga saaro, lagu wareejinayo ciidanka iyo hay'adaha badda qaabilsan ee dekeddaas.

9. Waa mamnuuc in maandooriye lagu isticmaalo doonta dusheeda. Laakiin, isticmaalka Qaadka (Jaadka) doonta dusheeda waa la ogol yahay waayo Curuf Albaxrigu uma arko qaadka maandooriye.
10. Haddii ay dumar saaran yihiin doonta, waa mamnuuc in loo doonto sheeko, shukaansi ama damac isu-tag. Sababtu waxa weeye, dhammaan waxyaabahaasi waxa ay qofka ka sii jeedinayaan gudasshada waajibaadkiisa shaqo, waxayna ku abuuraan baxrida gudaheeda loollan iyo maseyr, taas oo lumineysa wada shaqeynta, ugu dambeyntiina colaad ka dhex abuuri karta baxrida. Naakhuudeyaasha maraakiibta casriga ah waa loo oggol yahay in ay safarrada u kaxeystaan xaasaskooda. Waxase jirta in xeerka badda ee Soomaalidu aanu oggoleyn taas, waayo waayadii hore doonyaha shiraacleyda ahi khatar weyn aey ugu jireen burbur, halka maraakiibra casriga ahi ka sameysan yihiin bir ay adag tahay in ay degto
11. *Qolfaad*: milkiileyaashu waa in ay si joogto ay u hagaajiyaan una dayac-tiraan doonyahooda. Maaddaama doonyihii hore ay ka sameysnaayeen loox, xeerku waxa uu xoojiyey fulinta qodobkan. Sidaas awgeed, dadka Puntland waxa ay horumariyeen farsamada hagaajinta doonyaha in ka badan farsamada dhismaha doonyaha. Doontii aan u hoggaansamin qodobkan waxa loo arkaa mid xeerka jabisey, sidaa darteedna aan u qalmin in ay ka faa'iddo xeerka badda.
12. *Farsad*- doonyuhu sida ay u soo kala horreeyaan aey dekedda ugu xirtaan.
13. Haddii doon ama weel badeed uu ka go'o ama u baxo baroosinku, xeerku waxa uu waajibinayaa in dhammaan doonyaha iyo weelka badeed ee agagaarka jooga ay gacan ka geystaan badbaadinteeda.

Xeerarka Dadka Badda ku Dhinta

14. Haddii uu ruux ka dhaco doon, xeerka baddu waxa uu qabaa in naakhuuduhu ku dhaqaaqo arrimaha soo socda: b) sida ugu dhaqsaha badan in uu ugu laabto goobtii ugu dambeysey aragga qofkaas, t) in wax kasta oo suuro-gal ah uu sameeyo si uu u badbaadsho nolosha qofkaas sida tuuridda xargo, sabbeeyeyaal, dharka dabaasha, iyo wixii kale ee loo baahan yahay, xitaa haddii ay habeen tahay oo arragtidu aaney fiicneyn. Haddii aanu naakhuuduhu sidaa yeelin, xeerku waxa waajibinayaa in isaga/doonta lagu leeyahay diyada qofkaas.
15. Naakhuudaha/doonta looma sheeganayo diyada qofka ka dhaca doonta iyada oo aan la ogeyn, amaba la badbaadin kari waayey inta la isku dayey.
16. Doonta/naakhuudaha waa lagu leeyahay diyada rakaab badda ku dhacey isaga/iyada oo jooga/joogta dambeedka doonta (waa inta ka dambeysa takhalka doonta); gaar ahaan haddii aan aad la isugu dhibin baadigoobka iyo badbaadinta qafkaas. Balse, doonta/naakhuudaha looma sheeganayo diyada qofka ku dhaca badda isaga/iyada oo jooga/joogta horraadka doonta,

sababta oo ah rakaabka looma oggola in ay hoygooda, oo dambeedka ku yaal, soo dhaafaan inta ay doontu socod ku jirto.

17. Doonta waa lagu leeyahay diyada baxriga ka dhaca maaddaama meel kasta oo shaqadiisa looga baahdo uu doonta ka tegeyo. Xeerku uma aqoonsana ganacsiga badda iyo shaqaalahaba wax caymis ah.
18. Doonta waa lagu leeyahay diyada qofka isaga oo maskax ahaan ama jir ahaanba xanuunsan ku dhaca badda. Sababtu waxa weeye shaqaalaha doonta waxa ku waajib ah in ay ka taxadiraan, oo ayan dayicin, qofka xanuunsan.
19. Haddii ay geeri qof ku timaaddo doonta dusheeda iyada oo badda la marayo, xeerku waxa uu qabaa shaqaalaha doontu in ay qaadaan tallaabooyinka soo socda: waa in ay daahiriyaan (meyraan) meydka, ku duubaan kafan, salaad ku tukadaan, kuna ridaan badda iyaga oo ku xiraya walax culus oo salka badda geeya. Aaskaas Islaamiga ah ayaa la dhaqan geshaa marka aanu dhulku muuqan. Haddiise uu berri dhow yahay, meydka waxa lagu aasayaa berriga.

Shiimiyad (Saxariir)

20. Doontii ku timaadda ama loo sheego doon kale ee saxariir ku jirta, waa in ay shuruud la'aan badbaadisaa, ha noqoto shidaal siin, jiidis doontaas illaa dekedda ugu dhow, iwm. Haddii ay si ula kac ah dooni u diiddo gargaarka, isla markaana dhintaan qayb ama dhammaan rakaabkii saarnaa doonta saxariirta ku jirta, doonta dayaca sameysey waxa ay ku xukuman tahay ciqaab culus, taas oo mararka qaarkood gaarta bixinta diyada dadka dhintey, iyo in ay xaal siiso eheladooda. Xeerkan waxa ka reebban: b) Marka doonta gacanta bixineysa ayan u dhawaan karin doonta kale dabeylo ama duufaanno awgood, iyo t) haddii doonta saxariirta ku jirta aanu milkiilaheeda markii hore dayactirkeeda iyo hagaajinteeda xil weyn iska saarin oo ay doontaasi ahayd mid aan badda geli karin. Xaaladdan, doonyaha ag maraya ama ka war hela saxariirka doontan kuma khasbana u gargaariddeeda, lagumana ganaaxi karo soo dhaafiddeeda.
21. Doonta saxariirta ku jirta ayaa ugu xaq leh in ay dekedda ku xirato, lagana shaqeeyo marka loo eego doonyaha kale. Haddii ay mas'uuliyiinta dekeddu u arkaan lagama maarmaan, waa in ay doonyaha ku xiran dekedda qaar ka saaraan si ay boos ugu banneeyaan doonta saxariirta gashey.
22. Haddii ay doon saxariir gasho, xeerku waxa uu naakhuudaha awood u siinayaa in uu badeecadda doonta saaran daadiyo si uu u badbaadsho doonta iyo dadka saaran. Xaaladaha saxariirta waxa ka mid ah: b) marka kacdoonka baddu dhaafo heerka caadiga ah, t) marka doonta matoorkeedu cilladoobo, amaba tiirka takhalku jabo - waa marka doonyaha shiraaca laga hadlayo, j) marka matoorka biyo-saaruhu cilladoobo, x) marka xashwadi dhacdo.
23. Ka hor inta aan badeecadda la daadin, goorta doontu saxariir gasho, naakhuuduhu waa in uu raacaa qodobadan: b) waxa ugu horreeya ee la tuuro waa in ay ahaadaan walax ay doontu leedahay oo muhiimad weyn u leh

doonta sida, baroosinka, silsiladda baroosinka, in badan oo biyaha la cabbo ah, amaba caddad badan oo shidaalka doonta ah. Sidaas waxa loo yeelayaa in ay caddaato in saxariir dhab ahi dhacay. Doonta waxa lagu yeelanayaa magdhow badeecadda la qubey haddii aan qodobkan lagu dhaqan gelin.

Shaqaalaha/Baxrida

24. Qaybsiga shaqada: doonyaha dhoofa waxa ay yeesheen takhasus hawleed. Tirada shaqaaluhu waxa ay ku xiran tahay baaxadda doonta, una dhaxeeyaan 12 iyo 15. Waxa ay u kala baxaan: naakhuude, daraag iyo baxri. Saraakiishu waxa ay ka kooban yihiin saranji (ku xigeenka), isla mar ahaantaana ah xisaabiyaha, 2-3 shukuuni, quusaa, iyo takhal-raac. Marka loo eego xeerka, saraakiishu waa ka xor shaqooyinka muruqqa ah sida, nadiifinta, raridda, dejinta, iwm. Quusaagu baroosinka waxa uu ku hubsadaa badda salkeeda, doontana ka hagaajiyaa inta ay biyaha kula jirto. Baxrida caadiga ah waxa ka mid ah: dabaakh (kariye), suqayar dabaakh (ku xigeen kariye), suqayar dereg, kimiscun, iwm.
25. Xubinta shaqaalaha ah ee lagu helo xatooyo waxa lagu ciqaabaa soo celinta hantida ay xaddey, waxana gacanta loo gashaa ciidanka dekedda ugu horreysa ee doontu gasho.
26. Ka-ceyrin baxri shaqadiisa waxa ay ku timaaddaa marka ay jiraan xaaladahan soo socda: b) ku caddeyn xatooyo, t) dagaal-oogid doonta dusheeda, j) caaddeysi dhaqan-xumo, x) caajis iyo gudasho la'aan waajibaad, kh) amar diiddo. Naakhuudaha waajib kuma aha in uu bixiyo ogeysiis ama digniin ka hor inta aanu shaqada ka ceyrin baxariga.
27. Xawl illaa Xawl: xeerkan waxa uu saldhig u yahay habka xisaab-xirka iyo kan baxrida lacagta lagu siiyo, waxa uuna tixraacaa qaab xisaabeed ku saleysan xilli. Xiridda xisaabaha iyo dakhliga waxa ay dhacdaa wakhti go'an, kaas oo ah dhammaadka xilliga (moosinka) shaqo. Baxridu waa ay sugaan lacagtooda muddadaas inta lagu jiro, taas oo badanaaba dhan 6 bilood.

Badeecadda

14. Doonta laguma laha dhibaatada badeecadda gaarta sababo dibeed awgood. Balse, doontu waa in ay magdhow ka bixisaa dhibaatada ku timaadda dayac baxrida ama naakhuudaha ka yimid. Dhibaatooyinkaas waxa ka mid ah: biyo ku ururа doonta salkeeda gudaha ah (oo aan laga saarin), qoyaan ay gaarsiiyeen alaabta dusha sare roob ama biyo deregga soo dhaafey shiraac la'aan awgeed.
15. Doonta waxa lagu leeyahay in ay magdhowdo badeeco kiradeeda horey loo baxshey, haddana laga waayo marka la tago goobtii laga rabey. Xeerkan waxa uu jiraa marka ay caddaato in aanu jirin saxariir sababi karey in alaabtaas badda lagu tuuro.
16. Marka doontu gaarto meeshii ay u socotey, naakhuudahuna ka warbixiyo saxariir ku yimid iyo daadin badeeco, waa in sida ugu dhakhsaha badan loo magacaabo guddi kaas oo baara, hubiyana dhabta arrintaa. Hawlaha

guddigaas waxa ka mid ah: b) in uu baaro koobnaanta (liiska) alaabta doontu siddey si loo hubiyo in daadinta ay sabab u ahayd buux-dhaaf, t) in la ogaado wixii hanti muhiimmad leh ee doonta ka maqan (oo lagu tuuray biyaha si loo caddeeyo jiritaanka saxariir), iyo j) in uu naakhuuduhu guddiga hortiisa ku dhaarto dhibaatada sida uu uga warbixiyey in ay dhab iyo saxba tahay.

17. Naakhuudaha oo keliya ayaa ka mas'uul ah dejinta badeecadda marka doontu dekedda ku soo xirato. Haddii ay milkiileyaasha badeecadu jabshaan qodobkan, doonta laguma laha wixii badeeco ah ee la waayo.

Dhacdada 18

Md. Saciid Yuusf Sharmaarka ayaa qisadan ka sheekeeyey isaga oo jooga Boosaaso. Yaraan ayuu ku billaabey barashada badmareennimada. Naakhuude ayaa uu markii dambe noqdey, doon ayaa uu yeeshey, taas oo ugu dambeyntii ku burburtey badda. Wakhtiga hadda ah, waxa uu naakhuude ka yahay doon uu saaxiibkiis leeyahay. Arrinta soo socota waxa ay Boosaaso ka dhacdey Maarso 1999. Saciid waxa uu ka soo shiraacdey Mukulla, Yemen, isaga oo u soo jeeda Boosaaso, sidana badeeco aad u badan. Doontu markii ay dekedda Boosaaso ku soo xiratey, dadkii badeecada lahaa ayaa doontii isku soo gurey, isaga oo mid kasta wato xamaali qoyskiisa ah oo u dejiya badeecaddiisa. In kasta oo. Saciid uu ku adkeystey in Curuf Al Baxriga kor ku xusan (31) la ilaaliyo, haddana lagama dhageysan.

Laba maalmood ka dib, oo ay dejintii dhammaatey, mid ka mid ah ganacsatadii lahayd hantida doontu waddey, ayaa ku dacwoodey in loo gudo 15 kartoon oo uu sheegey in ay ka maqnaayeen alaabtiisa. Md. Saciid waxa uu ku jawaabey in aan lagu lahayn hantidaas. Ganacsadihii waxa uu arrinta u bandhigey guddi Curuf Al Baxri. Ganacsadihii gartii waa laga heley, waayo isaga ayaa ku xad gudbey xeerka dejinta markii uu hawsha dejinta alaabta u deyn waayey naakhuudaha.

Keensashada uu Ganacsataduhu la imaanayo xammaali reerkiisa ah oo u dejiyaa alaabiisa waa arrin ku cusub dhaqanka badda ee soo jireenka ah, waxa ayna soo baxdey burburkii dawladdii Soomaaliyeed kadib. Dawlad la'aanta jirta awgeed, mas'uuliyadda caymiska shakhsiga iyo kan hantidiisuba waxa ay dulfuushey oo qaadey qabiilkiisa. Siyaasadda qabiilku sidaa aey ugu gudubtey heer dawladeed, iyada oo la wareegtey waajibaadkii muwaadinku ku lahaa dawladda. Qabiilku markaas waa in uu difaacaa shakhsiga iyo hantidiisa, halka shakhsiguna ay tahay in uu bixiyo dhaqaalaha lagu horumarinayo danaha qabiilka. Si ay taageero adag uga helaan qabiilladooda, ganacsatadu waxa ay caaddeysteen in ay shaqaalaha dejinta badeecadaha ka keensadaan qabiilladooda.

32. Naakhuudaha lama oggola in uu buux-dhaafsho doonta – in ka badan culeyska loogu tala galey. Haddii naakhuuduhu doonta buux-dhaafsho, kuna

timaaddo duruuf keentey in badeecadda qaarkeed la daadsho iyada oo safar la yahay, badeecaddaas waxa lagu leeyahay naakhuudaha/ doonta.

33. Waa in magdhow laga baxshaa qiimaha badeecadda uu naakhuuduhu daadiyo iyada oo ayan jirin wax duruufo ah oo taa khasbi kartaa.
34. Waa xeer guud in milkiileyaasha badeecaddu keli ku ahaadaan khasaaraha badeecaddooda (aaney cidna ku laheyn) lagu daadshey badda saxariir awgiis, ama tan xumaata sababo dibedeed awgood.
35. *Minshag*. Iib wadajir ah iyo gor-gortan mideysan aey ganacsatadu wax kaga soo gadan jireen sayladaha caalamka si ay uga faa'iddo bataan iibsiga qof-qofka ah.
36. Qaybsiga badeecadda la daadshey iyo tan khasaartey marka saxariir la galo waxa uu dhaqan galaa marka ay jiraan xaaladaha soo socda: b) haddii badeecaddu ahayd minshag (wadajir loo soo iibsadey, loona soo raray, iyada oo aan calaamado gaar kala lahayn), iyo t) haddii hantiilleyda badeecaddu dhoofka ka hor heshiis ku galeen in ay qaybsadaan dhibaatada ku timaadda saxariir ama khasaare aan la fileyn yimaado.

Doonyaha matoorka leh markii ay soo baxeen, b) wada-iibsigii iyo wada-rarkii horey u jirey waa joogsadey. Xilliyadan dambe, ruux kasta goonidiis ayaa uu wax u soo iibsadaa, una soo rartaa. Taasi waxa ay khasaaraha ku koobtaa shakhsi keliya. t) doontu waa in ay bixisaa qayb badeecadda la tuurey ama xumaatey. Qiimaha doonta lagu dalacayo ma qeexna, balse waxa uu ku xiran yahay heerka khasaaraha iyo go'aanka garsoorka.

Xeerarka Kalluumeysiga

37. Beelaha kalluumeysatadu waa wadaagaan kheyraadka badda, ruuxna gooni uma sheegan karo goob kalluumeysi.
38. Haddii weel kalluumeysi baroosinku u baxo ama go'o, xeerku waxa uu waajibinayaa in dhammaan gaadiidka badda ee agagaarka jooga geystaan wixii gacan ah ee loo baahan yahay.
39. Kalluumeysatada aag wada dhigata shabaagta, waa in ay isu jirsiiyaan fogaan fiican si ayan shabaagtu isugu marmin/guntamin. Intaa waxa dheer, shabaagta waa in loo dhigaa mool iyo Maakhir (Koofur iyo Waqooyi) maaddaama kalluunku ka yimaado dhinaca xeebta ama bad-weynta.

Wax wada qabsi

40. Maaddaama gaadiidka kalluumeysigu ku tiro yar yahay goob kasta, da'da cusub ee kalluumeysatada ahi ma awoodi karaan in ay gaadiid wada helaan. Sidaa awgeed, xeerka baddu waxa uu qabaa in kalluumeysatada weelka lihi ay qaadaan shabaagta dadka aan gaadiidka laheyn. Ruuxii ay ku caddaato in uu jabiyey xeerkan, waxa la horgeeyaa guddi (garsoor) odayaal ah, ammar-na lagu siiyaa in uu xeerka waafaqo.
41. Haddii ruux kalluumeyste ah gaadiidkiisu xumaado, xeebtana iska yaal, xeerku waxa uu farayaa: in gaadiidka kale ee shaqeeya ay u qaadaan

shabaagtiisa iyaga oo wax kharash ah ku dallaceyn. Xeerkani waxa uu khuseeyaa hawaaridda iyo beden-gacmeedyada. Balse, laashashka matoorada leh ee shidaalka isticmaala waxa ay dallacdaan (sheegtaan) 16-33% wax soo saarka shabaagta ay uu qaadaan cid dibedeed. Tan waxa loo yaqaan *Jembi-laash ama xoobaalli.*

42. Xeerka baddu waxa uu waajib uga dhigey kalluumeysatada wada shaqeysta in ay shabaag u qaaraamaan kalluumeystaha shabaagtu ka lumeen sababo dibedda kaga yimid awgood sida, badda oo la tagta, iwm.
43. Marka kalluumeysiga laga soo laabto, haddii la tebo in khashabad (weel kalluumeysi) amaba ruux shabaagtiisii maqan yihiin, xeerku waa in dhammaan gaadiidka baddu, ama qaybtood, galaan baadigoob oo badda ku noqdaan.
44. Haddii uu weel kalluumeysi la kulmo shabaagtiisii oo ay ku jirto hanti awooddiisa dhaafsiisan (jiidis ama qaadis u baahan), isla mar ahaantaana uu haadiyo calan cad oo gargaar dalbasho ah, dhammaan gaadiidka u dhowi waa in ay gargaar ugu tagaan shuruud la'aaneed.
45. Xeerka baddu waxa uu waajibinayaa in hantida uu sido weel kalluumeysi ee badda ku xumaada lagu wareejiyo kuwa kale oo ay xeebta u qaadaan shuruud la'aan iyo kiro la'aan.

Bad-ka-soo-Bax

46. Xeerka baddu madaxa qabiilka ayaa uu siiyaa wixii hanti aad u weyn ee soo caarya ee ayan shakhsiyaad koobani iska qaadan karin sida, markab soo caaryey, sida ay caddeyneyso oraahda "*Bad-ka-soo-Bax boqor baa leh*". Wixii hanti noocaas ka duwan ee sabbeyneysa amaba soo caaridey, waxa leh qofka ugu horreeya ee hela. Haddii uu qof arko hanti sabbeyneysa biyaha, laakiin awoodi waayo in uu la soo baxo, oo isaga oo ku sugaya xeebta in ay ugu soo caarido, dad kale yimaadaan oo iyagu soo jiitaan ama qaataan, xeerku waxa uu qabaa: qofkii ugu horreeyey ee hantida arkey haddii aanu cad ka mid ah soo qaadan ama calaamadsan hantidaas sabbeyneysa amaba aanu wax summad ah hantidaas ku dhigan (sida summada geela reerkiisa), hantida waxa yeelanaya dadkii la soo baxey. Haddii-se qofkii hor arkey uu cad ka mid oo uu ka qaatey soo bandhigo ama calaamadsado ama summad ku sameeyey hantida sabbeyneysa, isaga ayaa xaq u yeelanayaa lahaanshaheeda, dadkii soo saareyna waxa ay yeelanayaan hawl ama saami u dhigma qiimaha soo saaridda oo nooca hantida ah.
47. Haddii kalluun ama hanti badeed kale loogu yimaado isaga/ayada oo ku maran laba ama ka badan shabaagood, kowaas oo dad kala duwani leeyihiin, xeerku waxa uu qabaa in hantidaasi uu yeelanayo: milkiilaha hantidu shabaggiisu jir ahaan ku jirto (ugu dhow), ama kan uu shabaggiisu dambeedka hantida ka hayo (qaarka dambe ee kalluunka), ama kan jilibkiisu afka kaga jiro (kalluun). Guddi la xulay oo kalluumeysato ah ayaa xal u hela xaaladdan kakan. Guddigu waxa uu dibedda u soo saaraa shabaagta isku dabramay iyo waxa ku jira oo wada socda. Markaa meel ka mid ah shabaagta haysa hantida ayaa guddigu uu gacanta ku kala leexshaa si uu u gaaro dusha hantida, dun cadna ku guntaa shabagga ugu dhow dusha sheyga (kalluun ama hantida kale). Ka dib shabaagtii ayaa uu guddigu hal hal u kala furfuraa. Qofka shabaggiisa laga helo (ku xiran tahay) dunta cadi ayaa hantidaas yeesha.

5. HABRAACA XEERKA

5.1 Habraaca Garnaqsiga Ka-hor

Ergo

Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa ay isku waafaqeen in dhaqanka Soomaalida ee ergo-diristu yahay hab lagu debciyo colaadda, waana qaabka ugu badan ee ay isugu bandhigaan dacwad ama cabasho. Ergadu waxa ay muhiimmad ballaaran u leedahay xiriirinta dhinacyada is-haya, iyo abuurista fursad lagu wada hadli karo. Ujeeddooyinka loo ergoodaa waa ay kala duwanaan karaan, sida: codsi golafariisi gareed,, amaba dalbasho fulin go'aan guddi garsoor hore u gaarey oo aan la fulin. Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa kale oo ay sheegeen, in kasta oo abaabulka wada-xaajoodku uu yahay arrin u taal dhinacyada is-haya, haddana xeerka Soomaalidu waxa uu ku boorriyaa kooxo kale oo dhex-dhexaad ka ah arrinta in ay soo dhex-galaan ama qabanqaabiyaan wada-hadal. Maahmaah Soomaaliyeed oo taas tilmaameysa ayaa oraneysa: "*Raqba waa ku raggeeda".* Intaas waxa dheer, marka laga reebo dembiyada la og yahay ee aan muranka ku jirin, haddii dhib ama khilaaf yimaado, dhanka shibbanaha ahi waxa ay hubiyaan ansaxnimada eedeynta ama aqoonsadaan dambiileyaasha ka hor inta ayan wax tallaabo ah qaadin ama ergoon. Tani waxa ay la mid tahay helista caddeyn dhab ah, sida xeerarka Qaanuunka Wadciga ah iyo Shareecaddu qabaan. Balse, farqidu waxa uu ka jiraa cidda baarista sameyneysa. Habka Qaanuunka Wadciga ah iyo kan Shareecadda marka la eego, baarista waxa sameeya ciidanka nabadgelyada ama qaadiga, halka, marka la eego xeerka Soomaalida, dhibbanuhu baarista sameeyo, kadibna soo caddeysto. Wixii intaas ka dambeeya keliya ayaa uu dhibbanuhu, haddii uu u arko lagama maarmaan, ergo diraan karaa.

Xubnaha ergada waxa ay ka kooban yihiin odayaal iyo waxgarad. Waxa dhaqan ah in ayan ergadu hub qaadan, sidaa darteedna, aan wax dhibaato ah loo geysan karin maaddaama ay yihiin *Biri-ma-geydo.* Xeerku waxa kale oo uu qabaa in beesha martida loo yahay ay quudiso ergada muddada ay la joogaan. Hadafka ergadu waa in ay farriin u gudbiyaan dhanka kale, diyaariyaanna sidii arrinta looga wada-xaajoon lahaa. Maahmaahdan Soomaaliyeed ayaa koobeysa danta ergada: "*Ergo wixii la faro-na waa geysaa, wixii la siiyana waa cuntaa".* Oraah kale ee Soomaaliyeed ayaa sharraxeysa astaamaha laga doonayo xubnaha ergo in ay yeeshaan:

Ergo waxa geli kara:
Nin kudkude gaajo uga adkeysi badan,
kurtunna qorrax uga adkeysi badan,
waarabena/Tukena cay uga adkeysi badan

Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa ay sheegeen in xaaladaha qaabka ergo lagu xalliyey ay isugu jiraan kuwo madani ah iyo kuwo ciqaab ah.

Xaalad marka ay la soo daristo koox, dhanka dacwoonaya ayaa dhanka kale ergo u dira si ay dacwada ugu gudbiyaan, *muddo iyo madal* go'anna gartaa loogu ballamo. Maaddaama xoolo dhaqatadu ku hawlan yihiin xoolahooda xilliga jiilaalka (abaarta) ah, garta qaadisteeda waxa had iyo jeer loo ballamaa xilliga roobka. Muddada u dhaxeysa, dhanka (ama qofka) la dacweeyey waxa uu baaraa ansaxnimada eeddaa lagu soo oogey , raadshaana talo iyo tab is-difaac. Mararka qaarkood, koox saddexaad ayaa ergo noqota, una garsoorta qaybaha is-haya. Teeda kale, haddii muddicigu shakhsi keli ah yahay, waxa uu/ay ula tagaa/tagtaa odayaashiisa/sheeda oo iyagu u ergooda odayaasha dhanka wax laga tirsanayo, halkaas oo lagu qorsheeyo xilliga dhegeysiga dacwadda.

"Haddaan afku xumaan, gacani ma xumaato."

Ka-qayb-galeyaashu waxa kale oo ay xaqiijiyeen in dumarku buuxshaan doorka ergada xaaladaha qaarkood marka ay jiraan, sida dagaal, oo ragga labada dhinac ayan kulmi karin nabadgelyo-darro awgeed. Sida dhaqanku qabo, dumarku laba aqoonsi aey guurka kadib yeeshaan - kan qabiilka ay ka dhasheen iyo kan ragga guursadey iyo caruurtooda. Aqoonsigan lammaan waxa uu fududeeyaa dumarku in ay xorriyad ku dhaqdhaqaaqi karaan, kana dhigaa kuwo ku habboon gudbinta farriinta ergada marka ay xaaladaha khatarta ahi jiraan. Doorka dumarka Soomaaliyeed waxa aad loo dareemey intii ka dambeysey burburkii qaran ee sannadihii 1990-yadii intii lagu jirey dagaalka sokeeye.

Iyada oo ay ku xiran tahay muhiimadda xaaladda iyo baaxadda hawsha, xeerka Soomaalidu waxa uu waajib ka dhigey in ergada la raacsho ugu yaraan hal qof oo ka mid ah noocyada soo socda: mid aqoon u leh dhaqanka degaanka beesha, mid si wanaagsan u yaqaan Shareecadda, firfircoon, dareemi kara khatarta soo socota, gorfeynna karana qodobka la isku hayo(Xaajo-yaqaan). Iyada oo ay jirto in dhaqanka Soomaalidu xaaraantimeeyo in ergada la laayo xilliyada dagaalka qabiil socdo, haddana taariikhda waa lagu hayaa dhacdooyin la diley sababtii ay doontoba ha ahaatee. Xubnaha ergada mid kasta waxa kale ee laga doonayaa in uu leeyahay astaamahan: aqoon u leeyahay dhaqanka iyo dabeecadda beesha, lagu yaqaan samatalis, leeyahay dulqaad, yahay garyaqaan, waxgarad, yahay geedjooge, daacad iyo dammiir dhan, qodobbeyn kara hadalka iyo doodda (hadal rug ama hadal tiriye), leeyahay awood uu ku cabbiro xaaladaha khatarta ah, ugu dambeyntiina leh jabbaarad oo ahayn hayeeshaale. Waxase jirta habka dirista ergadu iyo qaabilaadeedu in ayan ahayn mid dhib ka madax bannaan. Wakhtiyada qaarkood, ergadu waa ku guul-darreysataa hadafkeeda, sida ka muuqata qisadan:

Dhacdada 19

Ergo ka timid Qardho (Gobolka Bari) ayaa gaartey Karamaanyo, oo ka tirsan gobolka hadda loo yaqaan Galbeedka Sanaag. Ergadaas waxa ay u socotey sidii loo soo celin lahaa geel la dhacey. Si lid ku ah dhaqanka ergada ayaa ergadii loola dhaqmey: lama marti-soorin waana la iska dhega tirey. Hase yeeshee,

ergadi ma niyad jabin, waxa ayna goosteen in ay fadhiyaan illaa ay jawaab helaan. Sida qisadu sheegeyso, ergadu waxa ay halkaas ku sugnaayeen, oo sugayeen jawaab, muddo sannad ah. Mid ka mid ah ergada ayaa markaa tiriyey tix gabey ah, isaga oo muujinaya heerka niyad xumo iyo rajo go' ee ku yimid. Waxa uu yiri:

"Kalkaan imid kalkiisii miyaa kaabiga i saarey
Ma qabaalladii baa kawirey kirada doonaayey…
Kud ha laayo geel aan ka sugo maanta Karamaanyo"

Tixdan gabeyga ah waxa ay leedahay macno dhaqan iyo hiddo. Tan koowaad, ergadu ula-kac aey u fadhiyeen muddo sannad ah, si xumaanta lagu sameeyey ay u noqoto mid taariikhda gasha, xeerna u noqoto lagula dhaqmo beesha xumaantaas sameysey haddii ay xaaladdaas oo kale timaaddo. Tan labaad, sida badan waa wax aan dhici jirin in ergo lagu dheereeyo muddada jawaabta. Sidaa awgeed, ergadan laga hadlayo waxa ay ugu raagtey sugis si ay dhammaan qabiillada waddanku u ogaadaan xaaladda, dembiilleyaashana ceeb weyn u gaarto. Tan saddexaad, haddii dhanka dacwoonaya uu garta helo, xaal dheeraad ah ayaa lagu xukumayaa qolada raajisey ergada. Markaa arrintu waxa ay ka mid noqoneysaa taariikhda dhaqan ee dadka degaanka, waxa ayna noqoneysaa tixraac ceeb qabiilkaasi ku caan baxey .

5.2. Xulka Afhayeennada (Qareenno)

Soo laabashada ergada waxa ay astaan u tahay billowga xilli ay labada kooxood ee colaaddu u dhexeyso isugu diyaarinayaan dacwo iyo difaac. Ka hor inta aan la billaabin dood, guddiyo garsoor dhaqami ah ayaa la doortaa - laba kooxood oo ka kala socda qaybaha is-haya iyo guddi garsoor xeerbeegti ah. Ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay sheegeen in xeerku leeyahay astaamo iyo shuruudo lagu xulo xubnaha kooxahan.

afhayeennada kooxaha is-haya waa xeer-yaqaanno dhaqami ah. Balse, xeerku uma aqoonsana koox gaar ah oo afhayeenno ah oo ah xirfadleyaal qareen. Dhab ahaantii, ruux kasta oo qaangaar ah, isla markaana aqoonsi ku leh qabiilkiisa, waa noqon karaa afhayeen ka dooda golaha odayaasha garsoorka. Waxase jirta in qareennadan dhaqamiga ahi uga duwan yihiin kuwa Qaanuunka Wadciga ah ah, iyaga oo aan ahayn xirfadleyaal sharciyeysan, laakiin ay yihiin qaraabada dhinacyada is-haya, wax kharash ah ama darajo dheeraad ah ku qaadaneyn hawsha ay qabanayaan. Xaaladaha qaarkood, xeerku waxa uu kala mid yahay Shareecadda sida u ogolaanshaha muddiciga iyo kan la dacweeyey in ay wakiishaan qaraabadooda haddii uu yahay af-garooc ama ay jirto caafimaad darro maskaxeed, amaba jirto awood darro kale sida ay doontoba ha ahaatee.

Astaamaha lagu xulo Afhayeennada:

Afhayeennada golaha garsoorka dhaqamiga ahi waa in ay leeyihiin astaamahan: aqoon u leeyihiin Shareecadda, yihiin xeeryaqaan, hadal-ruug, yihiin xaajo-yaqaan, leeyihiin go'aan qaadasho xaaladdu goorta ay adkaato, aftahan, iwm. Soomaalidu waa dad hadal, waa ayna tix-geliyaan af-tahannimada iyo gabyidda. Maahmaahdan soo socota ayaa tilmaameysa muhiimadda ay leedahay af-tahannimadu: "*Nin kaa af badani dhaxalkii aabahaana waa ku dhaafshaa".* Maahmaah kale baa tilmaameysa in aaney af-tahannimadu ahayn hadafka ugu muhiimsan nolosha: "*In dood la yaqaan in dan la yaqaan ayaa ka fiican (dhaanta)".* Tan micnaheedu waa in qofku dantiisa garto oo ka shaqeeyo inta uu wakhtigiisa in badan ku lumin lahaa hadal tiro iyo doondoon aftahannimo ama ha lagaa sheego. Waxa kale oo ay tilmaameysaa in mararka qaarkood hadal badnidu keento natiijo xumo iyada oo laga yaabo in qofku gefo qodobbo dooddiisa muhiim u ahaa. Sidaa awgeed, waa in difaaca qaddiyaddu mudnaanta ka leeyahay aftahan doondoonka qaarkiis.

Intaas waxa dheer, qaar ka mid ah ka-qayb-galeyaasha cilmi baaristan waxa ay qireen in mararka qaarkood kooxaha afhayeennada ahi kaxeystaan mid ama laba qof oo xag-jireyaal ah, kuwaas oo qaabilsan in ay doodda ka istaagaan meel adag arritana sare u laalaan ama cusleeyan, si kooxda kale u dareento hal adeygga dhinacan, sidaa darteedna u soo debecdo. Qaabkan aan xikmadda ku fadhiyin mararka qaarkood khasaare ayaa uu keenaa oo waxa uu sababaa in golaha lagu kala kaco.

5.3. Dhismaha Gole Xeerbeegti

Labada dhinac waxa ay isku waafaqayaan haddii xubnaha xeerbeegtidu ka kala imanayaan labada dhinac iyo haddii ay ka imanayaan dhinac saddexaad. Badanaaba, labada dhinac ee is-haya waxa ay doorbidaan dhinac saddexaad. Marka xubnaha golaha xeerbeegtidu ka socdaan labada dhinac, xubnuhu waa in ay tiro ahaan is le'eg yihiin. Xeerbeegtida noocan ahi waxa ay go'aanka ku gaaraan habka is-qancinta (consensus), halka marka ay xeerbeegtidu ka socoto dhinac saddexaad tiradooda laga dhigo kisi waayo go'aanka waxa ay ku gaaraan hal dheeri codeyn. Waxase jirta, marka xeerbeegtidu ka socoto dhinac saddexaad, labada qaybood ee is-haya waa in ay oggolaadaan xubnaheeda ka hor inta aan hawsha la gudo gelin.

Xeerku waa eexdaa marka jinsiga laga hadlo (lab iyo dheddig); waa uu ka mamnuucaa dumarka in ay ka qayb galaan kooxaha garnaqsanaya iyo xeerbeegtida. Waxa kale oo xeerku ka mamnuucaa xubinnimada xeerbeegtida seddex nooc oo dad ah; kuwa qaraabo soke la ah kooxaha is-haya dhanka hooyada, xididka, iyo kuwa la ah dan-wadaag. Sidaa oo kale, shakhsiyaadka la wadaaga kooxaha is-haya xiriir dhanka aabaha ah (aabbe, ina-adeer, walaal, adeer, iyo wiil) iyo qof kasta oo horey uga qayb galay guddi garsoor arrintaas lafteeda loo qabtey, amaba kooxaha midkood ciil-qab u haya. Sababtu waxa

weeye iyada oo ay dhici karto in dadkaasi lid ku yihiin dhinacyada midkood. Maahmaah Soomaaliyeed ayaa oraneysa: "*Seddex gartaada looma dhiibto: Naasjid, Lugjiid iyo Dhuunjiid (Nacfijiid)*". Shareecadda Islaamka iyo tan Qaanuunka Wadciga ah waa ay kaga duwan yihiin Xeerka qaabka qaadista garsoorka. Halka Xeerka iyo Wadcigu qabaan in go'aanka ay gaaraan guddi (xeerbeegti), Shareecaddu waxa ay ku koobtaa go'aanka hal shakhsi oo nin ah kaas oo loo yaqaan Qaadi. Qaadigu keligiis ayaa xukunka rida, waxa uuse la tashan karaa kalkaaliyeyaal uu leeyahay. Hase yeeshee, qaadiga waajib kuma aha in uu sameeyo la-tashi. Arrintu si kastaba ha ahaatee, xaaladaha adag qaarkood marka ay jiraan, Shareecaddu waxa ay oggoshahay in guddi culimada diinta ahi garsoorka qaadaan, kuwaas oo ka kala socda labada dhinac ee is-haya amaba dhinac seddexaad. Diinta Islaamku waxa ay qabtaa in Qaadigu marka ugu horreysa uu Allah hoos yimaado, Isaga oo ciqaabaya Qaadiga haddii uu caddaalad darro ula kac ugu kaco. Dhanka uu go'aanku ku dhacey waxa ay racfaan u qaadan karaan Qaadi kale, kaas oo baabi'iya go'aanka khaldan ee Qaadiga hore.

Sida caadadu tahay, golaha xeerbeegtida reer miyigu waxa ay garta ku qaadaan geed hoostiis, hawsha ay qabanayaanna wax hawl ah kuma qaataan. Laakiin, inta ay gartu socoto, qaybaha is-haya waa in ay quudiyaan xubnaha golaha. Golaha xeerbeegtida tuulooyinka iyo magaalooyinku waxa ay qaataan khidmad loo yaqaan *Hawl ama Hagarbey ama Agabare*, hadba meesha la joogo. Garsoorka Shareecaddu-se waxa uu qaataa khidmad joogto ah oo lagu magacaabo *Xaqul-qalin*.

Oraah Soomaaliyeed: *Nin gar galey eed gal*

Astaamaha lagu xulo xubnaha xeerbeegtida (Guddi garsoor)

Intaa kor ku xusan waxa dheer, xubinta golaha xeerbeegtidu waa in ay leedahay sifooyin tilmaamaya in ay aamin tahay. Sifooyinkaas waxa ka mid ah in ay tahay mid khibrad u leh xeerka iyo qaababka uu u shaqeeyo, tahay garyaqaan iyo geedjooge, taqaan dhaqanka dadka, tahay waxgarad, aan eex gelin, leh go'aan qaadasho, naxariista ka tegin, wax ka taqaan Shareecadda ahna taqi, hadalruug ah, ah maslaxo-ka-talis. Waxa jira dad ku caan baxey caddaalad iyo hufnaan oo la magacaabo mar kasta oo garsoor loo baahdo. Raggaas qaarkoodna waxaaba laga yaqaan illaa heer gobol, taas oo ay keentey caddaaladda ay ku dhex-dhexaadiyaan xaaladaha adag awgeed.

5.4. Noocyada iyo Habraaca Xeerbeegtida

Guddiyada xeerbeegtidu waxa ay galaan khilaafaadka madaniga ah iyo kuwa ciqaabta, habraac isku mid ahna ku dabakhaan labadoodaba. Garsoorka Xeerku ma madax bannaana ee waxa uu si weyn ugu tiirsan yahay Shareecadda. Dhan marka la eego, habraaca Xeerka waxa laga soo min-guuriyey kan Shareecadda, dhan kale marka la eego-na, xeerbeegtidu marka ay dhageysato dacwadda,

waxa ay go'aanka u celisaa Shareecadda, iyada oo dalabta culimada Shareecadda. Waxa muhiimad leh in la ogaado in xeerku sidaas oo kale aanu ugu dhaweyn lana naasnuugin Qaanuunka Wadciga ah iyo habraaciisa. Arrintu iyada oo ay sidaa tahay, haddana marka dhan kale laga eego, Xeerku waxa uu leeyahay, dhanka madaniga iyo kan ciqaabta labadaba, laba haabraac dheeraad ah: *Masaalaxo* iyo *Garcadaawe*.

Masaalaxo

Xeerbeegtidu, marka ay dhegeysato dacwadda, heshana dhabta, go'aankeeda kuma saleyso qodobada xeerka ama Shareecadda ee qeexaya xukunkaas, ee waxa ay ku saleysaa habraac masaalaxo iyo sulux. Ka-qayb-galeyaasha cilmi baaristu waxa ay sheegeen in isku deygan masaalaxada ahi labada qaybood ee is-haya isugu keeno meel dhexe, xukunkuna ka hooseynayo qiimaha ciqaabeed ama dhibaaleed ee caadiga ah (dhabta ah). Halka xaaladaha madaniga ah inta laga dhimayo qiimaha dhabta ah ee tasoobey ay ku xiran tahay guddiga garsoorka oo eegaya dhibaatada sida ay u jirto iyo waliba duruufaha gaarka ah ee ku hareersan, dacwadaha ciqaabta ah waxa la dhimaa seddex-qaybood qayb qiimaha dhabta ah. Gobollada ay qabiillada Daaroodku degaan tan waxa looga yaqaan *Dalool-xoor (Xeer Daarood).*

Markii la weydiiyey sababta ay Soomaalidu masaalaxo uga door-biddo Garcadaawe, odayaasha ka-qayb-galeyaasha ka mid ahaa waxa ay ku doodeen in sidaas ay ku dhaqmaan sababta oo ah iyada oo aaney jirin miyiga mas'uuliyad dhexe oo ilaalisa sharciga ama fulisa. Odayaashu waxa ay alaaba yiraahdaan, *"Waxan sidaas moodney dan".* Teeda kale, sida badan labada dhinac waa ay oggolaadaan masaalaxada, dan beyna bidaan. Dhanka la eedeeyey waa uu oggolaadaa masaalaxada waayo waxa uu og yahay in haddii garta lagu helo, lagu xukumayo magdhaw ka yar intii ku caddaatey. Dhanka dacwoonayana waa uu oggolaadaa masaalaxada waayo waxa uu aaminsan yahay ku qancidda xukunka ku yimaada masaalaxo in uu khayr ku helayo, dhibaalka loo xukumana bixintiisa la dedejinayo. Taas waxa sababaya iyada oo odayaal labada dhinacba ahi ay ka qayb galeen garsoorkan, oggolaadeenna go'aanka ka soo baxay amaba, haddii ayan sidaa wax u dhicin, koox odayaal dhinac seddexaad ka socotaa go'aanka gaartey.

Xeerbeegtidu waa ay bandhigtaa kala doorashada labada habraac, iyo in labada dhinacba ku qanci doonaan guddoonka. Qodob kale oo ku khasba dhanka dacwoonaya in uu masaalaxo ka door-bido garcadaawe, ayaa ah iyada oo xukunka ka soo baxa garcadaawe laga yaabo in aanu fulin, awood dhexe oo xukunkaas meel marisa la'aanteed. Fulin la'aanta go'aanka xeetbeegtida, badanaa waxa ay hurisaa dagaal, kaas oo aan ahayn isaguna xal lagu degdegi karo. Marka labada dhinac ay ku heshiiyaan in ay wax ku dhameystaan masaalaxo, jawigu waxa uu noqdaa mid deggan oo debecsan, waana sababta habka masaalaxada mararka qaarkood loogu yaqaan "*Gar-sokeeye".*

Garcadaawe:

Marka la dhuuxo macnaha ereyga Garcadaawe, waxa uu tilmaan ka bixinayaa naxariis darrada go'aanka xeerbeegtida. Taas waxa loola jeedaa, marka la eego aragtida Soomaalida, dhammaan maxkamadaha ku saleysan fulinta qiimaha dhabta ah ee waxdhimaal ee xeerka dhaqamiga, Shareecadda ama Qaanuunka Wadciga ah, dhammaantood waa kuwo naxariis daran. Si kale marka loo sheego, marka laga reebo go'aanka ku yimaada masaalaxada, xukun maxkamadeed kasta oo kale waa mid adag oo qallafsan. Habka Garcadaawe waxa uu ku fulaa dacwad xiisad leh iyo garsoor ay qaadeen guddi cadaadis badan saaran yahay. Sida badan, qodobbada Garcadaawe looga hadlo waa kuwo ku lug leh fal-dambiyeedyo waaweyn, aadna u adag sida, jar-jarid jir qof meyd ah, kufsasho, dil qof magac dheer sida oday, qof darajo ama tujaarad leh. Labada dhinac midkoodna ma filo guddoon dabacsan. Garcadaawe waxa kale oo lagu yaqaan iyada oo dhinaca tabarta badan uu shuruudo u yeeriyo dhanka tabarta yar – waa eedeyn adag, difaac adag iyo go'aan qallafsan. Xukunka waxa loo eegayaa sida uu xeerku qabo. Wax laga nusqaamin maayo dhibaalka, khasaaraha ama dhiigga la yeesho. Sidoo kale, ma shaqeeyo *Xeer-Daarood*, kaas oo gooya qiime dhibaal dhan hal dalool (1/3) oo loo yaqaan *Dalool-xoor.* Waxa waajib ah in sida ugu dhaqsaha badan loogu hawlgalo fulinta go'aanka sida, bixinta dhibaalka, dhiigga, iwm. Lama tix-raaco wixii go'aanno dabacsan ee xaalado hore lagu xalliyey. Xukunka Garcadaawe waxa ka mid ah *Mag-dharaareed* (magdhow gole joog ah). Dadka isku jifada ah, iyo kooxihii xeer gaar ahi u yaalley, labaduba ma doontaan Garcadaawe. Isimo ha ahaadaan ama yeyan ahaan, odayaasha ayaa tiir u ah Xeerka. Labada qaybood ee xeerka, madani iyo ciqaab, waxa kiiba leeyahay seddex heer-maxkamadeed. Si aynu u bar-bar dhigno xeerarka Shareecadda iyo Qaanuunka Wadciga ah, waxa aynu garsoorka xeerka ka soo qaadi karnaa in uu leeyahay xeerbeegti darajada koowaad, labaad iyo seddexaad. Mararka qaarkood, hoggaamiyeyaasha sare ee boqran (sida boqor, Suldaan, Islaam, Garaad, Ugaas, Beeldaaje) ayaa xeerbeegtida noqda.

Halka ay Xeerka Dhaqamiga iyo kan Qaanuunka Wadciga ahi isaga mid yihiin darajooyinka maxkamadaha, Shareecaddu qaab kale aey leedahay. Maxkamadda Shareecaddu waxa ay leedahay hal Qaadi. Shareecaddu waxa ay oggoshahay in racfaan loo kala qaato maxkamado isku darajo ah. Maxkamadda racfaanka loola tagey waa ay ayiddaa, burisaa, amaba wax ka beddeshaa go'aanka maxkamaddii hore. Daaqsinnada aaney maxkamadaha dawladdu ka jirin, dhanka dacwadda laga heley waxa uu u yeerataa culimada diinta la aaminsan yahay in ay Shareecadda kaga fiican yihiin Qaadigii dacwadda ridey. Marka xaaladdaasi jirto, xaakimkii hore iyo kan burinayaa waxa ay ka hor doodaan dhinacyadii is-hayey. Waxa suuragal ah in xukunka la jebiyo oo uu guuleysto dhinacii garta lagu naqey.

Waxa La Yiri Ma Dhaqmo Reerka:
Ninka ugu weyni Xumo-taliska yahay,

Ninka ugu xoolo badanina bakheylka yahay,
Ninka u xoog weynina fulaha yahay,
Ninka geedka u tagaana af-garooca yahay,
Ninka u wadaadka ahina beyd-gaabka yahay,
Ninka ugu yarina xoog-caynadka yahay.

Tilmaamahan aan fiicneyn ee ku jira dhaqanka Soomalida waxa ay badanaaba xubnaha qabiilku soo xigtaan (kaashadaan) si ay u muujiyaan aftahannimadooda marka ay hadal ka jeedinayaan shir ay odayaal isugu yimaadeen.

6. Dhegeysiga Dacwadda (Garnaqsiga)

Dhegeysiga dacwaddu waxa uu ka dhacaa meel fagaare ah, ruux kasta oo xiiseynayana waa ka soo qayb-geli karaa. Hawshaasi waxa ay u dhacdaa sidan:

Waxa lagu furaa Faatixada oo uu akhriyo dadkaas kan ugu da' weyn, ama diinta ugu badsha, isaga oo raacinaya duco. Xubin golaha xeerbeegtida ah ayaa jeedisa hadal isugu jira waano iyo wacdi, taas oo loola jeedo in jawiga lagu qaboojiyo, xiisaddu ku degto, una gogol-dhigta xeerbeegtidu in ay shaqadeeda gudo-gasho, isla mar ahaantaana ku boorrisa kooxaha in ay ku qancaan go'aanka xeerbeegtida. Hadalkan waxa tixraac u ah aayado Qur'aan ah, Axaadiis, xikmado, iyo suugaan kale oo murti leh. Golaha garsoorku waxa uu iska dhex doortaa hal guddoomiye iyo hal afhayeen. Guddoomiyaha waxa lagu doortaa aqoonta, sumcadda, da'da, iyo eex la'aanta lagu yaqaan. Waayihii hore, ka hor inta aanu uu far-qoraalku soo baxin, waxa la adeegsan jirey afhayeen kor ugu dhawaaqi jirey hadalka ay labada dhinac yiraahdaan, si qof kasta oo halkaas jooga uu si wanaagsan u maqlo. Xubnaha xeerbeegtidu dusha aey ka xifdin jireen qodobbada dacwadaha labada dhinac. Ka-qayb- galeyaasha cilmi baaristu waxa ay sheegeen in wixii ka horreeyey qorista af-Soomaaliga, xeerbeegtidu dalbi jirtey qof af-Carabi ku qora go'aanka.

Xeerbeegtidu waxa ay ka dalabtaa dhinacyada is-haya in ay marka ugu horreysa soo gudbiyaan qoraal ama ballanqaad af ah oo qoordhiibasho ah. Sida caadiga ah, haddii uu muddicigu yahay qabiil dhan, loogama baahna qoordhiibasho waayo qabiilku sida badan ma jabsho guddoonka xeerbeegtida. Odayaasha ka socdey gobolka Sanaag waxa ay sheegeen in degaankooda qoordhiibashada la dalbo marka dhegeysiga dacwaddu dhammaado, wax yar ka hor inta aan go'aanka lagu dhowaaqin. Waayadii hore go'aanka af ayaa lagu bixin jirey. Xaaladaha shakhsiyaadka khuseeya, xeerbeegtidu waxa ay dhinaciiba ka dalabtaa ugu yaraan labo bud-dhige, kuwaas oo ballanqaada in dhinacoodu oggolaan doono go'aanka. Xeerbeegtidu waxa ay kala tashataa dhinacyada is-haya habraaca ay heshiiska ku yihiin in dacwaddu ku socoto; masaalaxo ama garcadaawe.

Dhinaca dacwadda wata ayaa hadalka hor qaata. Dacwaddana waxa jeediya kooda ugu aftahansan xog-ogaalna ah. Garsoorka dhaqamiga ah marka laga

hadlayo, muddiciga ayaa hadalka ku billaaba ereyadan**:** "*hal waa iga dacwad, hal waa iga dood, hal waa iga durid, hal waa iga didiif*, *horgolkeygiina waa wataa"*. Haddii ay dacwaddu khuseyso shakhsi, shakhsigaas laf ahaantiis ayaa soo bandhiga, amaba doorta wakiil sida badan xigtadiisa ah. Dhinac waliba waa uu wadanayaa doodda hadalka illaa uu soo wareegiyo. Dhanka wata dacwadda, waxa uu soo bandhigaa dacwaddiisa, umana ay bannaana in uu wax ka beddelo qaybteed ama dhammaanteedba nuxurka dacwadda uu horraantii sheegtay inta lagu jiro dhegeysiga. Dhanka dacwaddu ku socoto sidaa oo kale ayaa uu u jawaab bixiyaa. Dhan walba waxa uu leeyahay **labo** fursadood oo uu ku hadlo. Marka xeerka la eego, dadka wareegga koowaad uga hadla labada dhinac, ma hadlaan wareegga labaad ee intooda kale qaar ka mid ah oo aan horey u hadlin ayaa afceliya.

Haddii dhanka la dacweeyey uu qirto dacwadda, dooddu waa xirmaysaa, xeerbeegtiduna waxa ay u gudubtaa go'aan gaaris. Haddii kale, xeerbeegtidu waxa ay dhanka dacwadda wata ka dalabtaa in uu la yimaado caddeyn, kaas oo haddii uu noqdo markhaati, inta la dhaariyo ka marag kaca golaha hortiisa. Dhanka kale, waxa ay su'aalo weydiiyaan markhaatiga si ay dhabta hadalkiisa u hubiyaan. Intaas waxa dheer, xeerku waa u oggol yahay dhanka wata dacwadda in uu ula yimaado garsoorka ruux kasta oo xog dheeraad ah ka bixin kara arrinta laakiin aan goobjoog ahayn. Tan waxa loo yaqaan "*Hor-godol"* mana ay aha markhaati toos ah, balse waa ruux xog ka haya xaaladda. Qofkani waxa uu garsoorka si gaar ah u siiyaa xogta dheeraadka ah ee uu hayo, taas oo waafaqsan hababka ay ciidanka boliisku u uruuriyaan xogta dembi-baarista ay hor-geeyaan maxkamadda Qaanuunka Wadciga ah. Haddii dhanka dacwadda wata aanu keeni karin markhaati, kan la dacweeyey waxa waajib ku noqonaya in uu dhaarto, taas oo xeerku ka waafaqey Shareecadda. Dooddu halkaas aey ku xirantaa, xeerbeegtiduna waxa ay kala diraan labada dhinac si ay u falanqeeyaan go'aanna uga gaaraan arrinta (dacwadda).

Xukunka

Xeer-Hoosaadka Xeerbeegtida

Waxa jira habraac loo meel-mariyo hawlaha garsoorka dhaqamiga ah. Ka hor inta aaney dooddu billaaban, goluhu waxa uu iska dhex-doortaa Guddoomiye iyo afhayeen. Sida waafaqsan Shareecadda iyo Qaanuunka Wadciga ah, xeerbeegtidu waxa ay ku dhaqantaa falanqeyn xubnuhu ku sameeyaan dacwada ay dhegeysteen, kadibna go'aan gaaraan, iyada oo ay xubnaha xeerbeegtidu leeyihiin wada-tashi; si gaar ah aey uga wada hadlaan wixii ay arrinta ka ogaadeen, una codeeyaan go'aanka haddii ay koox seddexaad ka socdaan. Laakiin, haddii xubnuhu ka kala socdaan dhinacyada is-haya, go'aanku waxa uu noqdaa is-qancin. Xubini kama gaabsan karto codeynta; go'aanka marka la gaaro wixii ka dambeeya xubini kama sheekeyn karto xubnaha kale ra'yigoodii iyo sida ay u codeeyeen. Waxa sidaas lagu xafidayaa anshaxa iyo asluubta. Intaas waxa dheer, iyada oo loo eegayo hadba dabeecadda arrintu leedahay,

xeerbeegtidu waxa ay xukunkeeda ku saleysaa mid ka mid ah kuwan: b) Shareecadda, t) xukun xeer soo-jireen ahaa, kaas oo loo yaqaan "*Curad".* Haddii aanu jirin xeer soo-jireen ahi, xeerbeegtida ayaa sameyneysa mid cusub, kaas oo Soomaalidu u taqaan "*Ugub".*

Baaraandegga Xeerbeegtida

Guddiga garsoorku (xeerbeegtidu), marka uu si wanaagsan u dhegeysto labada dhinac iyo wixii caddeyn/caddeymo ah ee ay la yimaadeen, sida ugu dhaqsaha badan ayaa uu go'aan uga gaaraa arrinta. Arrintu si walbaba ha ahaatee, xaaladaha qaarkood, marka xiisad aad u weyn ka dhex taagan tahay dhinacyada dagaashan, golaha garsoorku dib ayaa uu u dhigaa go'aan gaaridda, iyada oo loola jeedo in xiisaddu heerkaas ka debecdo. Xikmaddan soo socota ayaa digniin ka bixineysa in si khaldan loo fahmo dib u dhiga go'aanka garsoorka:

Gar sisibatay waayeel kolkii odayo loo sooco
Shir sasaba muddada saadambe ah, amase saakuun ah
Suxulkaaga soo leef kolkii badowgu sooyaansho
Kii kala sabaaleyn jirey iyo sayncaddihii dhimaye

Ku Dhawaaqidda Xukunka

Ugu dambeyntii, marka xeerbeegtidu isku af-garato xukunka, tallaabada ku xigta waa iyada oo loo yeero labada dhinac si ay u dhegeystaan xukunka garsoorka. Guddoomiyaha xeerbeegtida, ama xubin uu isagu magacaabey, ayaa ku dhawaaqa(da) xukunka iyada oo ay goobjoog yihiin labada daraf ee ishaya. Waxa dhacda in xubin kale oo xeerbeegtida ahi faahfaahin dheeraad ah raaciso. Sida badan, xeerbeegtidu waxa ay hadalka ku billowdaa: *"Eebbow eexna ha nooga tegin, aqoondarrona ha nagu cadaabin"*. Intaas ka dib, xeerbeegtidu waxa ay dulmar ku sameeyaan nuxurka dacwadaha labada dhinac soo jeediyeen, isla mar ahaantaana hubaal ahaan u weydiiyaa haddii ay arrintu sidaa ka duwaneyd. Haddii dhinac xuso qodobbo ka maqan dacwaddooda ayna caddaato, xeerbeegtida waa tixgelineysaa qodobbadaas. Hase yeeshee, arrintu marka ay heerkan soo gaarto, labada dhinac midna wax qodobbo ah oo cusub kuma biirin karo dacwaddoodii hore, halkii, marka laga hadlo maxkamadaha Shareecadda iyo kuwa Wadciga ah ay oggol yihiin in labada dhinac doodahooda qodobbo ku biirin karaan ka hor inta aan go'aanka lagu dhawaaqin.

Soomaalidu waxa ay leedahay maahmaah oraneysa, *"Gari laba nin kama wada qosliso"*. Haddii koox ama qabiil diidmo ka bixiyo xukun, xeerbeegti kale ayaa la abaabulaa. Marka shakhsi keli ah laga hadlayo, haddii muddicigu diido go'aanka, bud-dhigeyaashiisuna oggolaadaan, arrinta waxa loo aqoonsanayaa in ay oggolaansho ku dhammaatey. Laakiin, haddii kan la dacweeyey iyo bud-dhigeyaasha labaduba dood ka keenaan go'aanka, xeerbeegti cusub ayaa la abaabulaa, taas oo la mid ah racfaan-qaadasho. Waayadii hore, Soomaalidu meelaha qaarkood oraahdan aey u lahaayeen racfaan qaadashada: *"Golahaan*

gole kale ayaan ka leenahay" ama "Sharac Allah cinda qayrakum". Oraahda dambe waxa la isticmaali jirey goorta ay koox la noqoto in Shareecaddu uga faa'ido badan tahay xeerbeegtida.

Ugu dambeyntii, iyada oo aan loo eegeyn in labada dhinac go'aankii oggolaadeen iyo in kale, xeerbeegtidu waa ay qortaa go'aankeeda, una qaybisaa qoraalkaas labada dhinac ee is haya, nuqulna siisaa dawladda (maxkamadda degmada iyo/ama Guddoomiyaha Degmada). Intii ka dambeysey qorista af-Soomaaliga sannadkii 1972, dad badani waxa ay barteen wax qoridda iyo akhrinta, waana laga helayaa dadkaas meelaha miyiga ah. Ma jiro wakhtigan dhibkii waayadii hore laga mudan jirey raadinta qof af-Carabi wax ku qora, waayo qof af-Soomaali qori kara waxa laga helaa guddiga, haddii kalena waxa laga helayaa goobta. Xeerbeegtidu af-Soomaali aey go'aankeeda ku qortaa, xubnaheeduna waa ay saxiixaan.

"Wax wax dhima la waayi mayee, allow aannan waayin wax wax dhaya."

7. Caddeynta, Racfaan Qaadashada Iyo Fulinta Xukunka

Soo bandhigga Caddeymaha

Garsoorka dhaqamiga ahi, sida Shareecadda iyo Qaanuunka Wadciga ah, waxa uu qabaa in caddeyn laga bixin karo jiritaanka ama jiritaan la'aanta arrin. Caddeyntu waxa ay noqon kartaa mid aalad ah ama markhaati. Xeerku waxa uu waajibinayaa in qofka markhaatiga ahi ka marag kaco xeerbeegtida horteeda. Qofkii diida in uu ka markhaati furo arrin uu goobjoog ka ahaa beeshu waa takoortaa. Markhaatiga waxa waajib ku ah in uu golaha hortiisa ku dhaarto, af-na ku markhaati furo iyada oo uu eedeysanuhu goobjoog yahay. Haddii caddeyntu noqoto mid aan ku filleyn, xeerbeegtidu waa ay burisaa markhaatigaas. Soomaalidu markii ay qaateen diinta Islaamka, dhaqamadii jaahiliga ahaa waa ka tageen. Dhaarta xeerka ee uu iminka markhaatigu ku dhaarto waxa ay tahay sidatan: *"Waxan si daacadnimo leh ugu dhaaranayaa Qur'aanka kariimka in aan runta sheegayo",* waxa la raacaa dhaarta Shareecadda ee *"Wallahi, Billahi, Tallahi" .* Ka-qayb-galeyaashu waxa ay sheegeen wixii ka horreeyey Diinta Islaamka, caadada dhaartu in ahayd: *"Qoodhey iyo Xeradey iyo Xiniintey iyo Dhurkey iyo Dhaqankey"*, ama qaab uu qofku isku inkaaro: *"Waa tii shahwada iyo kaadida, shahwadu ii soo hormarto in aanan been sheegeyn"*. Dhaar dheeraad ah, oo loo yaqaan Xilo-dalaaq ama Xilo-fur, ayaa lagu daraa haddii kan la eedeeyey ee markhaatiga lagu furey qanci waayo oo dalbado, iyada oo uu qofku ku dhaarto xaaskiisa in ay ka furan tahay haddii uu been sheegayo. Dhaartan waxa ay u muuqataa in laga dhaxley dhaqamadii jirey Islaamka hortiis, taas oo ku raagtey kuna sii hartey dhaqanka Soomaalida siiba xoolo dhaqatada. Halkaas waxa ka muuqata in guurku yahay mid qaddarin weyn la siiyo, xaaskuna ninka u tahay mid aanu ninku uga maarmeyn korinta dhallaanka, xannaaneynta xoolaha guri-joogta ah iyo maamulka qoyska. Intaas waxa dheer, waxa suurtogal ah in ninku yarad ka baxshey gabadha, hantidaas oo aanu dib u sheegan karin

haddii uu si fudud u furo. Markaa, haddii ay dhaartu tahay mid been ah, waa in uu ka dheeraadaa xaaskiisa, waana go'aan aanu ninku si fudud u qaadan.

Ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay sheegeen si uu qof markhaati uga furo xeerbeegtida horteeda, waa in laga helaa shuruudaha qaarkood. Shuruudahan waxa ka mid ah: in uu qaangaar yahay (ugu yaraan 15 sano jir), maankiisu dhan yahay, heysto Diinta Islaamka, yaqaan 5-ta tiir ee Islaamka, iyo 6-da tiir ee Iimaanka. Kooxda uu markhaatigu liddiga ku yahay waa ay iska hubin kartaa in markhaatigu aqoon u leeyahay mabaadii'da Diinta Islaamka (5-ta iyo 6-da tiir), oo haddii ay caddaato in markhaatigaasi aqoon waayo qodobbadaas waa burayaa marag kaciisu. Shuruudo kale ayaa markhaatiga ku xiran sida, salaadda in uu sida ay tahay u oogo, yahay run-sheeg, aanu horey dembiyo culus u galin sida kufsi, ama ciil-qab u hayn kooxda uu ku markhaati furayo, aanu wax dan gaar ah ka lahayn arrinta, aanu wax xiriir dhiig la lahayn kooxda markhaatiga ugu yeeratey. Marka la eego xeerka, haddii uu markhaati qaraabo soke la yahay koox, uma markhaati kici karo kooxdaas. Qaraabadaas waxa ka mid ah: *naasjiid, Lugjiid iyo dhuunjiid* Ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay isku waafaqeen in, marka markhaati laga hadlo, xiriirka dhiiggu gaarsiisan yahay illaa Ina Adeer Labaad. Qareennadii Qaanuunka Wadciga ah ee ka qayb galey daraasaddu waxa ay caddeeyeen in maxkamadaha Qaanuunka Wadciga ahi u oggol yihiin qof qaraabo soke ah in uu markhaati noqdo haddii kan ay u markhaati furayaan uu yahay muddici, haddiise uu yahay kan la dacweynayo, uma markhaati furi karaan. Culimada diintu waxa ay sheegeen in Shareecaddu qabto sidaas si ka duwan: maxkamadda Shareecadda ma oggola markhaatiga qof qaraabo soke ah, haddii go'aanka la filayo faa'ido ugu jirto markhaatigaas amaba uu go'aankaasi sababayo dhimaal ku imaan kara markhaatiga sida, bixin qayb dhibaalka lagu xukumayo qofka ay qaraabada yihiin oo uu u markhaati furayo. In kasta oo ay Shareecaddu aqoonsan tahay waxa ka iman kara xiriirrada kor lagu xusay iyo eexda ka imaan karta markhaatiga, haddana waxa ay talada u deysaa Qaadiga. Marka uu Qaadigu derso, haddii ay ula muuqato in markhaatigu yahay mid u xaglinaya dhanka uu u markhaati kacayo, Shareecaddu waxa ay fartaa Qaadiga in uu buriyo markhaatiga qofkaas. Haddii kale-se, Qaadigu waxa uu ansixinayaa markhaati galka qofkaas, iyada oo aan loo eegeyn wixii diidmo ah ee dhanka lagu furayo ka yimaada. Si kastaba ha noqotee, Shareecaddu asal ahaanba waa ay ka mamnuucday aabbe in uu wiilashiisa markhaati u noqdo.

Baaridda Markhaatiga

Sida ay qabaan xeerarka Shareecadda iyo Wadcigu, xeerku waa oggol yahay in dhinacyada is-haya su'aashaan markhaatiyada si ay u hubsadaan dhabta hadalkooda. Guddiga garsoorka waxa uu ikhtiyaar u leeyahay in uu buriyo markhaati, ama hadalkiisa aanu waxba ka soo qaadin, haddii ay u caddaato in aanu ahayn mid mudan, sida ka muuqata xaaladdan:

Dhacdada 20

Dhinac ka mid aha labo dhinac oo is-haya ayaa keeensatey nin si uu markhaati ugu furo xeerbeegti horteed. Ka dib marka uu ninkaasi dhaartey, hadalka waxa uu ku billaabey " Ma waxan markhaati ahay, mase waxan mudici ahay". Halkaas marka uu marayo ayaa xeerbeegtidii ka joojisey hadalkii buriseyna maraggaas, waayo waxa uu sheegtey in uu mudici yahay.

Markhaati-Galka Haweenka

Ka-qayb-galeyaasha badankood waxa ay isku raaceen, marka la eego xeerka dhaqanka Soomaalida, in hal dumar ahi keligeed aaney markhaati ka bixin karin guddi garsoor hortiis. Tani waxa ay lid ku tahay Shareecadda oo ayadu ku xaddadda labo dumar ah in ay u dhigmaan markhaatiga hal nin, dumarkana u banneysa in ay markhaati gal noqon karaan, marka laga reebo labo xaaladood oo qura: kufsi iyo meherka. Xeerka Qaanuunka Wadciga ahi isagu dumarka waa u oggol yahay in ay markhaati furi karaan xaalad kasta. Qaar ka mid ah ka-qayb-galeyaasha daraasaddu ayaa ku adkeystey in xeerku uu ka xaaraantimeeyey dumarka in ay markhaati baxshaan, khaas ahaan xaaladaha dilka. Waxa ay sabab uga dhigeen iyada oo aanu dhaqanku qabin in dumarka loogaba yeero meelaha fagaaraha ah sida guddi garsoor hortiis. Dadka badankood waa diideen aragtidan. Meelo ka tirsan Puntland, dumarka looma oggola in ay markhaati ka baxshaan xeerbeegti (guddi garsoor) horteed, laakiin xubnaha xeerbeegtida qaarkood si gaar ah waa u weydiin karaan xog arrinta la isku hayo ku saabsan.

Racfaanka iyo Dib u Eegidda Xukun Xeerbeegti

Racfaan

Ka-qayb-galeyaasha daraasaddu badankood waxa ay sheegeen in xeerku u oggol yahay shakhsi ama koox in ay racfaan qaato(aan), mar kasta oo dhinacyada midkood u arko xukunka xeerbeegtida mid aan caddaalad ahayn. Dhan kasta racfaan waa qaadan kara. Waxase jirta, ka-qayb-galeyaasha ka socdey gobolka Sanaag in ay tilmaameen in aaggooda racfaan aan laga qaadan karin xukunnada xeerbeegtida xitaa haddii ay taasi cadawtooyo dhex-dhigeyso labada dhinac. Waxa ay sheegeen in xeerbeegtidoodu ay in badan iska ilaaliyaan khaladaadka inta lagu gudo jiro dhegeysiga iyo go'aan gaaridda. Iyada oo ay taasi jirto, haddana gobollada kale, dhinac racfaan waa u qaadan karaa odayaal kale oo iyagu dhisa xeerbeegti cusub oo mar labaad dhegeysata arrinta. Haddii ay mar labaad kooxi ku qanci weydo xukunka garsoorka cusub, racfaanku waxa uu u gudbaa hoggaamiyeyaasha sare ee dhaqamiga ah ee ku sugan aaggaas. Hoggaamiyeyaasha boqran waxa ay ka kala imaan karaan labada dhinac ee is-haya ama dhinac seddexaad, ama isku jir labada nooc.

Waxase jirta, sida hore loo sharxay, go'aanka kama dambeysta ah waxa leh hoggaamiyeyaasha boqran (Isimmada), hase yeeshee iyaga laf ahaantoodu ma

qaadaan garsoorka marka laga reebo xaalado dhif ah, sida tan hoos ku taal. Isimadu waa ay iska dhowraan in ay qaadaan gar toos ah maaddaama ay taasi wax yeelleyneyso sharaftooda. Waxa ay magacaabaan guddi odayaal sooc ah oo dib u eega arrinta. Marka arrinta la dhegeysto, lana miisaamo wixii gunaanad hore ah ee ay guddiyadii hore gaareen, guddigu waxa uu gaaraa go'aan, una gudbiyaa Isimada, oo ayaguna, ka dib marka ay ka baaraandegaan, ansixiya dhammaan ama wax ka beddela. Isimadu waxa ay markaa isugu yeeraan dhinacyada is-haya, waxa ayna ka dalbaan odayaashii arrinta galey, oo ay is-og yihiin, in ay ku dhawaaqaan xukunkoodii. Markaas aey Isimadu dhankooda taageeraan xukunkaas iyaga oo kaashanaya awooddooda siyaasadeed iyo sharaftooda, kuna adkeeya dhinacyada is-haya in ay qaataan xukunka. Guddoonkan Isimada waa kama dambeys ay arrintu ku xirmeyso.

Dhacdada 21

Khilaaf Dhexmarey Beel Degta Tuulada Xarfo

Bisha barakeysan ee Ramadaan-tii la soo dhaafey, taas oo ku beegneyd bilihii Nofeembar-Diseembar 2001-dii, nin ayaa aanno ugu dilay nin kale oo ay isku reer yihiin Tuulada Xarfo oo ka tirsan degmada Gaalkacyo. Dilkan waxa uu ku yimid aanno u dhexeysey beeshaas. Arrintan hore waa ku dagaallami gaarey labada jifo ee beeshu waayo waxa ay dhacdey iyada oo dilkii hore laga heshiiyey, laguna dhammeeyey xal wanaagsan. Xalkaas hore waxa uu ahaa diyo la kala qaatey iyo gabar loo baxshey godobtir ahaan. Taas ayaa keentay in dad badan u arkaan dilkan labaad mid aan sabab macquul ah laheyn, labada dhinacna xiisad weyn dhex dhigtey. Nasiib wanaag, Isimada degaankaas kooda ugu sarreeya ayaa soo dhex galay arrintii, cagahana u dhigay, isaga oo kaashanaya ciidan maleyshiyo gaar ah oo aan ka socon labada dhinac midkoodna, si looga hor tago dagaal ay isaga hor yimaadaan labada dhinac. Waxa uu sameeyey guddi garsoor seddexaad oo gala arrinta. Xubnaha golaha waxa ka mid ahaa Guddoomiye dhaqameedka sare laf ahaantiis, iyo seddex Isin kale oo ayaguna degaanka ah. Guddigu waxa uu Guddoomiye u doortay koodii ugu sarreeyey. Iyada oo loo eegayo degdegsiiyaha iyo khatarta ka iman karta arrinta, guddigan garsoor ee Isimada boqran ahi waxa uu gaarey go'aan kama dambeys ah oo aan racfaan lahayn. Ka dib markii laga wada hadley, laga doodey, lana gorfeeyey xaajada muddo gaareysa 5 bilood, guddigu waxa uu ugu dameyntii ku guuleystay in uu xal u helo colaadda bishii Abriil 15, 2002. Tani waxa ay aad u muujineysaa doorka wanaagsan ee ay Isimada boqrani ka geystaan xallinta colaadaha iyo xakameynta iska hor-imaadyada bulshada Soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaanna gobollada Puntland.

Habraaca Dib-u-eegidda Xukunka

Sida habraacyada sharciyada kale-ba, xeerka Soomaalidu waxa uu aqoonsan yahay in dib loo eegi karo go'aan ama xukun xeerbeegti. Xaalad xukunkeedu dhacey dib waa loo eegi karaa haddii ay soo baxaan xaqiiqo ama caddeymo

kale, kuwaas oo caddeynaya in go'aankii hore aanu ahayn mid sax ah, ama arrintu gebi ahaanba aanney jirin markii hore, ama arrintu waxba ka khuseyn la-xukumaha. Dib u baaris waxa kale oo ay dhici kartaa marka la caddeeyo in markhaati been ahi jirey, ama la caddeeyo in markhaatigu xiriir dhiig la wadaagey kan/kuwa uu u markhaati furay. Waxase jirta in xaalad kasta aan dib loogu laaban. Xeerku waxa uu qeexayaa in guddi garsoor uu xaalad dib u eegi karo keliya haddii taasi suurtogal tahay ama xaaladda dib loo celin karo. Tusaale ahaan, marka la eego xeerka Soomaalida, waxba lagama qaban karo xaalad dil qof lagu diley, haddana markaa ka dib la ogaadey in aanu lahayn dambiga loo diley. Sidoo kale, in badan lagama qaban karo xaalad gabar bikro ah nin ku dacweysey in uu kufsadae, sidaa darteedna, sida uu dhaqanku qabo gobollada Puntland qaybtood, ninkii lagu xukumay in uu guursado gabadha la kusfaday, mar dambena la ogaadey in aaney arrintu dhab ahayn. Xeerku ma oggola in dib loo baaro xaaladaha noocaas ah, maaddaama ay yihiin kuwo aan wax laga beddeli karin. Shareecadda iyo Qaanuunka Wadciga ah labaduba waa ay ku khilaafsan yihiin xeerka arrintan, dib aeyna u baaraan xukun hore, iyada oo aan la tixgelineyn waxa hawshaas cusub ka iman kara ama inta ay qaadaneyso. Intaa waxa dheer, Shareecaddu waa ay ciqaabtaa markhaatiyada beenta uga marag kacey xaalado keenay ciqaab dil la fuliyey, ciqaabtaas oo noqon karta mid dil ama bixin diyada dhibbanaha la diley.

Fulinta Xukunka

Sida ay qoreyaal badan isku waafaqeen, awood iyo khasab laguma fulin karo xukummada xeerka dhaqanka Soomaalida. Awoodda ay Isimadu leeyihiin waxa ay ka soo jeeddaa xurmo guud oo loo hayo. Halka dhaqan-gelinta xukummada Shareecadda iyo Qaanuunka Wadcigu ku tiirsan yihiin hay'ado fulineed, fulinta g'aannada xeerbeegtida dhaqamiga ah inteeda badan waxa ay ku tiirsan tahay dhaqanka beesha. Lewis I.M. waa uu ayidsan yahay arrintan: "*Xukunka dhibaal ee le'eg dhibaatada dhacdey ayaa saldhig u ah wada xaajoodka khilaafka ka dhex dhaca jifida gudaheeda kuwaas oo dhex-dhexaadiyeyaal loo doorto. Ma jiro qaab rasmi ah ee lagu fuliyo xukummada marka laga reebo rabitaanka kooxaha is-haya oo iyaduna ku xiran awoodaha dhinacyada is-haya iyo xaaladaha siyaasadeed ee wakhtigaas taagan. Ugu dambeyntii, isticmaalka xoog ama ka baqashadiisa ayaa sandulleey fulinta xukunka".*

Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa ay magacaabeen dhowr qodob oo ka keeni kara dhinaca laga guuleystey dacwadda in uu waafaqdo xukunka. Qodobbadaas waxa ka mid ah: iska ilaalin aanno dambe, cadaadis beeleed ama qabiil, xurmeyn xubnaha xeerbeegtida, iyo sida ay kala yihiin xoogagga dhinacyada is-haya. Haddii dhinaca wax loo xukumey uu ka xoog badan yahay, ama tabar le'eg yahay dhinaca kale, markaa xukunku si toos ah ayaa uu u fulaa. Haddiise dhanka guusha heley ka xoog yar yahay dhanka kale, waxa dhacda dhanka xoogga badani in uu isku dayo in uu ka warwareego fulinta xukunka iyo ballanqaadkii uu sameeyey billowgii (Qoordhiibashadii), xurmeynta ballanqaadkii bud-dhigeyaasha iyo raacidda xukumo hore. Tan waxa loola jeedaa,

ogaanshaha la og yahay in xaalado hore lagu xalliyey isla qaddiyaddan oo kale, waxa ay ku khasabtaa dhanka laga guuleystey in uu qanco, kana niyad-jebiya in uu racfaan qaato, waayo xeerbeegti cusubi sooma saareyso xukun kaas ka duwan. Iyada oo ay dhacdo in shakhsi ama dhinac aanu ku qancin xukun, haddana, shakhsiga ama dhinacu waa uu oggolaadaa xukunka, isaga arrintan ka dhiganaya ama u keydsanaya abaaldhigasho iyo tixraac mustaqbal.

Dhinaca sidaa yeela waxa uu yiraahdaa: *"Tani waa inoo xeer".* Arrimaha kale ee dhinac ku khasba in ay xukun qaataan waxa ka mid ah qanac, ilaalinta nabad ku wada noolaanshaha degaanka, adkeynta xiriirka wadajirka, dhowrista anshaxa wanaagsan. Xeerka iyo Shareecaddu labaduba waxa ay boorriyaan garqaadashada. Shakhsiga la eedeeyey keligiis ma bixiyo dhibka ee dhibaatada uu geystey waxa la baxsha inta ay diyada wadaagaan. John Drydale waxa uu qoray:

"..waxa waajib ah in qofka dhibaatada geystey tolkiis la bixiyaan magdhow isa saami le'eg. Qofka dhibta geystey waa uu ka xishoodaa in uu dhibkaa mar labaad geysto...caddaaladda wada bixintu markaa waa hab leh laba dariiq oo waajibaad is-dhaafsi ah. Xubinta tol ama qaybtiisa ayaa uu ka baxshaa mag, ama qaybtiisa ayaa uu qaataa haddii uu tolkiisu yahay dhinaca dhibban."

Dhacdada 22

Aabe iyo Wiil

Aabbe ayaa loo sheegey in wiilkiisa gar laga heley. Waxa uu ku jawaabey in aanu dhib ku jirin haddii garta laga heley, wuxuuse dadkii weydiiyey su'aashan "Laakiin, ma oggolaadey xukunkii xeerbeegtida?" "Haa, waa oggolaaday," ayaa loogu jawaabey. Aabihii waxa uu yiri, "wiilkeygu dhab ahaantii waa nin qiimo badan, waana igu bannaan yahay."

Ciqaabta Kuwa Diida ama Fulin Waaya Xukunka Xeerbeegtida

Guud ahaan, ciqaabta dadka diida xukunka xeerbeegtida waxa ay ku xiran tahay xukunka iyo inta uu le'eg yahay qiimaha la xukumay. Diidmo fulin xukun waxa uu khatar weyn u keenaa dhinacyada arrintu khuseyso iyo waliba beesha. Fulin xukun oo uu qabiil wada diido waxa loo qaadan karaa ku dhawaaqid dagaal, in kasta oo ay arrintani dhacdo marar dhif ah. Sida badan, dhaqanku waxa kale ee uu qabaa: in la magacaabo, la takooro, lana go'doomiyo dhanka wax diida. Iyada oo ay taasi jirto, ka-qayb-galeyaashu waxa ay isku waafaqeen haddii shakhsi uu diido xukun xeerbeegti, in odayaashu arrinta la wareegaan. ciqaabtu waxa ay noqotaa mid maaddi ah, mid jirka ah ama mid sharafeed: b) tan maaddiga ah, guddigu waxa uu qofka ku xukumaa gawraca awrkiisa gurgur, t) tan jirka ah, qofka waxa lagu xiraa geed quraanjo badan ama lagu xiraa meel qorrax badan illaa uu xukunka oggolaado. Ciqaabta jirka ah waxa lagu fuliyaa meel fagaare ah si loo sharaf dilo. j) tan sharafta ah, qofka madaxa adag waa la cambaareeyaa,

waxana lagu naaneysaa *Gardiid*. Soomaalidu waa ay neceb tahay ninka xukunka xeerbeegtida diida, oo waxa ay yiraahdaan: *“Gardiid waa alle-diid.”* Ciqaabaha kale waxa ka mid ah xoolaha oo xoog qofka looga qaado, laban laabidda qiimaha la xukumey, iyada oo uu qofku noqdo deyro, qabiilkuna aanu diyada la wadaagin.

8. Kaalinta Isimada

Kaalinta isimada waxa aynu kaga soo hadalnay qaybihii hore. Intaas waxa dheer, maamulkii gumeysiga iyo kii ka dambeeyey ee Soomaaliyeed labaduba waxa ay taageereen xukunka xeerbeegtida ama hoggaamiyeyaasha dhaqanka, oo ay u arkeen in ay isku xiraan dawladda iyo reer miyiga. Intii lagu jirey dawlad la’aanta waddanka Soomaaliya, odayaasha qabiilka iyo hoggaamiyeyaasha dhaqanku waxa ay kaalintoodii gaarsiiyeen heer ay dhexgalaan khilaafaadka siyaasadeed ee reer miyiga iyo reer magaalkaba. Marka uu iska hor-imaad yimaado, dadku waxa ay khilaafkooda ula tagaan odayaasha iyo isimada kadib marka dhanka la dacweeyey diido in uu ka jawaab baxsho xaalad ama hor yimaado xeerbeegtida. Maaddaama ay yihiin hoggaamiyeyaasha dhaqanka ee qabiilada, isimadu waxa ay dadka diidmada noocaas ah sameeya ugu yeeraan in ay hor yimaadaan guddiga garsoorka. Maqaamkooda iyo xurmadooda aey ugu yeeraan dadkaas kuna amraan in ay hortaagaan xeerbeegtida. Sidaas oo kale aey dhinaca laga heley garta ee diidda ku amraan in uu u hoggaansanaado xukunka. Xaaladda soo socota ayaa arrintan tusaale u ah:

Dhacdada 23

Wakhti hore, dadka deggan gobolka Nugaal waxa ku timid abaar xun, taas oo ku khasabtey in ay xoolahoodii ula guuraan xeebaha bari ka xigta Garoowe ee Badweynta Hindiya. Waxa ay dadkii si ciriiri ah uga cabbi jireen ceelal gaaban ee ku yaal tuulada Dhaganle oo ku dhacda Koofurta Eyl. Ceelashaas gaagaaban waxa ka mid ahaa Waqtiille, Xamur, El-jeex iyo Mattaan; mid kastana waxa lahayd jifi. Waxa dhacdey in milkiilleyda ceelka ugu biye badan diideen in ay la qaybsadaan biyaha xoolo-dhaqatada kale. Marka ay dad iyo xoolo badani isugu yimaadaan ceelal kooban, baahida biyuhu cirka aey isku shareertaa, maaddaama aaney ceelashu dabooli karin baahida. Arrintan ayaa sababtey in uu khilaaf dhex maro jifooyinkii biyaha isugu yimid degaankaas. Khilaafkaasi waxa uu gaarey heer loo baahdey in loo dhex galo sida ugu dhaqsaha badan. Hoggaamiye dhaqameed ay weheliyaan kaaliyeyaashiisu iyo xubno ciidanka ilaalada dawladda ah, ayaa qabtey shir deg-deg ah. Isaga oo maskaxda ku haya dhibaatada ay abaartu keentey, hoggaamiye dhaqameedkii waxa uu go’aanshey in si ku-meel-gaar ah dadku si wadajir ah u wadaagaan ceelasha.

Go’aankaas kuma qancin dadkii lahaa ceelka ugu biyaha badan, nin ka mid ay kooxdaas ayaana diiday. Odaygii guddoominayeyy shirka waxa uu ninkaas ciqaab uga dhigay in laga gawraco awrkiisa gurgur. Laba ninkaas jifadiisa ahayd oo kale aeyaguna qaylo ku dhuftay iyaga oo taageerey ninkii. Odaygii labadaas

nin waxa uu iyagana ku xukumay gawraca awrtooda gurgur. Hadalku marka uu halkaa marayey, odaygii horjoogaha u ahaa kooxdaas waxa codsadey in shirka dib loo dhigo isaga oo ula jeeda in uu xaaladda dejiyo. Ka dib marka ay kooxdu yeelatey wada hadal dheer iyo dood, waxa ay oggolaadeen in ay u hoggaansamaan go'aanka hoggaamiye dhaqameedka.

Odayaal dhaqameedyada sare ee mudnaanta la siiyo waxa ay baxshaan go'aanno iyaga oo aan la tashan odayaasha qabiilka haddii ay marxaladdu u baahan tahay faragelin degdeg ah oo looga hor tagayo dhib ama qalalaase. Marka laga hadlayo xaaladda ceelka kor ku xusan, hoggaamiye dhaqameedkii ma aanu magacaabin guddi odayaal go'aan ka gaara qaybsiga biyaha, waayo odayaasha kooxda diidmada sameeysey ka socday ayaa isku deyey in ay ligligaan awooddiisa xukun haybadeed. Hase yeeshee, waxa jirta in go'aan gaarista aan la tashiga lahayn ee hoggaamiye dhaqameedyadu aaney ahayn mid caado ah ee dhacda xaalado gaar ah.

9. Kaalinta Dawladda

Dawladdu sida caadiga ah ma farageliso xukunka xeerbeegtida ee waxa ay waliba ku taageertaa ciidan meel mariya xukunkooda, haddii ay kooxi diidmo keento. Soomaaliya intii uu ka jirey maamulka gumeysigu, maamuleyaasha Talyaaniga iyo kuwa Ingriisku si buuxda aey u taageeri jireen xukunka xeerbeegtida. Sidoo kale, dawladihii Soomaaliyeed ee isku xigey iyana waa ansixiyeen xukunka xeerbeegtida. Dhab ahaantii, dawladda Soomaaliyeed waxa ay gudbisey Sharci Lambar 19, **Codice di Procedura Civile Somalo,** oo ku taariikheysnaa Luuliyo 27, 1974, kaas oo Qodobkiisa 333 uu banneynayo heshiiska ka dhaca maxkamadda dibeddeeda:
"Heshiisyada suluxa ah ee kooxo iskood u gaaraan, ama iyaga oo kaashanaya wakiillo ka socda xafiisyada siyaasadeed ee magaalada, tuulooyinka iyo beelaha, waxa ay yeelanayaan sifo sharci, kana fulayaan Maxkamadda Degmada ay heshiisyadaasi ka dhaceen".

Iyaga oo waafaqaya sharcigaas, si ay dawladda u wargeliyaan, waxa xeerbeegtidu u gudbinayaan nuqul xukunkaas ah Guddoomiyaha Degmada degaankaas.

Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa ay ammaaneen xiriirka wanaagsan ee u dhexeeya xeerarka dawladda iyo xeerarka dhaqanka, oo labadu iskaashada. Waxa ay sheegeen in dawladdu mararka qaarkood adeegsato xukunka dhaqamiga ah iyada oo xaaladaha qaarkood isu dhaafisa xeerbeegtida. Drysdale waxa uu sii raaciyey: *"maxkamaddu muddiciga waa u oggoshahey in uu dacwadda ula wareego odayaasha xitaa haddii ay dil tahay si loogu qaado xeerka dhaqanka. Tan ayaa caddeyn u ah wax-ku-oolnimada iyo waaritaanka xeer dhaqameedka. Farqiga u dhexeeya labada hab sharci waa iyada oo xeerku mas'uuliyadda dembiga dulsaaro reerka ama qabiilka uu ka*

dhashey dambiiluhu si fal dembiyeedkaas loogu helo magdhow, ha ahaado mid madani ama ciqaab ahe."

Ka-qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay sheegeen marka keliya ee ay dawladdu faragelin ku sameyso garsoorka dhaqamiga ah in ay tahay marka xaaladda loo arko in ay tahay mid khatar ku keeni karta nidaamka iyo nabadgelyada guud.

10. Wax-Ku-Oolnimada Xeerka

Xeerku waa aaladda ugu suubban ee ay reer miyiga Soomaalidu ku xalliyeen iska hor-imaadyadooda. Laakiin, iska hor-imaadyada ka dhasha xoolo dhaqatada waa tiro yaraayeen maaddaama ay ku koobnaayeen labo degaan oo isu dhow, qabiil is xiga, iwm. Hubka la isticmaalo badnaa waxa uu ahaa waranka oo isagu aad uga duwan hubkan casriga ah ee darandooriga ah ee wayadan sababa xasuuqa badan ee ka yimaada dagaallada **siyaasadeed** ee qabiillada. Marka dhaqanka laga hadlo, odayaasha xal aey u heli jirey colaadaha, xakameyn jireyna, iyaga oo adeegsanaya xeer dhaqameedkooda.

Marka la eego dhaqanka Soomaalida, ereyga Xeer waxa uu leeyahay dhowr macno oo kala duwan. Lewis I.M. ayaa sharxay ereyga Xeer: *"Ereyga Xeer waxa loola jeedaa heshiis ama mucaahado walba oo ay ku midoobeen shakhsiyaad iyo kooxo... teeda kale, ereyga waxa loola jeedi karaa heshiis dhex mara kooxo diyada wada baxsha ama qabiillo...macnaha ugu yar ee ereygu waxa loo isticmaali karaa marka laga hadlayo qawaaniinta ku lug leh isticmaalka bar biyood, khaas ahaan war biyuhu galaan, iyo waliba ganaaxa laga muto dayaceeda. Ugu dambeyntii marka ereyga macnihiisa la ballaariyo, waxa guud ahaan loola jeedi karaa xeerarka bulsho ku dhaqanto."*

Waxase jirta in xeerku eex ka galo dumarka isaga oo aan u oggoleyn in ay ka qayb qaataan af-hayeennimada ama xeerbeegtida. Intaas waxa dheer, inkasta oo ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu isku waafaqeen in qof dumar ah, sida ninka oo kale, loogu yeeri karo markhaati xeerbeegti horteeda, halka Shareecaddu oggoshahay ugu yaraan laba dumar ah in ay noqon karaan markhaati, haddana qaar ka mid ah odayaasha ka-qayb-galeyaasha waxa ay ku adkeysteen in xeerku aanu u oggoleyn dumarka in ay markhaati ka furaan goleyaasha xeerbeegti ee qabiillada.

Xeerku sida badan waa hab sharciyeedka ugu muhiimsan ee ay isticmaalaan bulshada reer miyiga Soomaalida ahi, oo tiro ahaan ugu badan. Marka uu xakameynayo iska hor-imaadyada qabiillada, xeerka Soomaalidu waxa uu adeegsadaa qaabab dhibaato-xallin tiro badan, waxa uuna asaasaa maxkamado dhaqameed. Odayaasha ka-qayb-galeyaashu waxa ay xaqiijiyeen in reer miyigu mar walba door bido xeerka marka la barbar dhigo Shareecadda ama Qaanuunka Wadciga ah. Taas waxa u sabab ah iyada oo xeerku yahay mid fudud, kuna habboon qaab-nololeedkooda. Waxa kale oo ay qireen

maqnaanshaha awood dhexe in ay xeerka ku khasabtey ku tiirsanaanta masaalaxo marka la barbar dhigo ku kala bax sharci. Tan ayaa sababtey, iyada oo xeerku leeyahay qodobbo xukun oo qeexan oo madani iyo kuwo ciqaab ah, in haddana xukunkiisu badanaaba ugu dambeyntii ku dhammaado masaalaxo iyo meel dhexe oo wax la isugu keeno.

Ka-qayb-galeyaashu waxa kale oo ay sheegeen in xeerku aanu ahayn mid madax bannaan oo iskiis u jira. In kasta oo xeerku leeyahay qodobbo xukun, haddana xeerbeegtidu, marka ay xaalad dhegeysato, sida badan waxa ay gaaridda go'aanka ugu yeertaa culimada Shareecadda. In kasta oo qofna aanu aqoon xaqiiqada ugu saxan ee ay u jireen beydda iyo qaab-dhismeedka xeerku wixii ka horreeyey diinta Islaamka, waxa la maleynayaa in isbeddel qoto dheer ahi ku dhacey xeerka, illaa iyo xad-na uu beddelmey, kuna milmay Shareecadda, wixii intaa ka dambeeyeyna si xiriir ah ula hawlgaley. Tusaale ahaan, hab-raaca xeerka hadda la isticmaalo, sida muuqata, waa mid laga soo min-guuriyey Shareecadda. Lewis I.M. ayaa ogaaday arrintan: *"Hab-raaca xeer-dhaqameedka Soomaalidu waxa uu lk yimid Shareecadda Islaamka. Sharciga Muslimku in badan ma saameyn xiriirka u dhexeeya qabiillada, balse aad ayaa uu u dhexgaley xiriirka qabiilka gudahiisa, xiriirka qoyska ama kan shakhsiyeed."*

Arrimahan kor ku xusan oo lagu biiriyey isticmaalka ballaaran ee xeerka ee bulshada reer guuraaga ah, waxa ay ka dhigeysaa xeerka mid ah nidaam garsoor wax ku ool ah oo si sahal ah loo tuuri karin

11. GUNAANAD

Baadigoobka “Is-waafajinta Sharciyo Dhaqamadyada Soomaalida” waxa uu u muuqdaa mid taagan bar ay isku gooyaan saddex dariiq, isaga oo isku deyeya in uu is-waafajiyo saddex hab-sharciyeed ka kala yimid saddex ilood oo kala duwan, is diiddan-na. Saddexdan ilood waxa ay kala yihiin: asalka galbeed-Roomaankii-Jarmalkii oo uu ka askunmey Qaanuunka Wadciga ah, kaas oo diiddan aqoonsiga ilaahey iyo diimaha, kuna dooda in dadku yihiin kuwo keliya ee sameeya sharciga; asalka diinta Islaamka- oo qaba in fakarka dadku yahay mid macnawi ah oo isla beddela hadba xaaladda taagan, sidaa darteedna aanu kaammil ahayn, wax walbana ku qeexa aragtida hadba ilbaxnimada aadamiga iyo heerarkeeda kala duwani marayaan iyo ka dabqaadashada xaaladaha markaa jira. Mabda’an waxa uu ayidsan yahay sharciyada Rabbaaniga ah iyo in dadku Allah addoomadiis yihiin, Isaga oo qur ahna uu sharci-Sameeye yahay, sidaa darteedna ay dadka waajib ku tahay in ay u hoggaansamaan sharciyadiisa, kuwaas oo ku qoran Qur’aanka iyo Axaadiista ee saldhig Shareecadda u ah. Ugu dambeyntiina, asalka Xeerka Soomaalida- oo ka yimid baahida nolosha reer guuraaga. Xeerka waxa ku dhacey isbeddel, kan wakhtigan la isticmaalana waa mid ku milmay Shareecadda, kana tarjuma dhaqan reer miyi ku nool dhul dabeecaddiisu adag tahay, kheyraadkiisa dabiiciga ahina yar yihiin.

Billowgii imaatinkiisa, Islaamku waxa uu jiidey xeerka reer guuraaga heerka ugu fog. Duruufaha jirey wakhtigaas, Shareecaddu heer intaas ka badan ma aaney durkin karin xeerka. Waxa loo turay, oo khatar u muuqatey, hab-nololeedka ruuxa reer guuraaga daaqsinleyda ah. Mid ka mid ah ka-qayb-galeyaasha daraasaddan baa laga yaabaa in, isaga oo u hadlaya asxaabtiisa ayidsan xeerka, uu sida ugu wanaagsan u sharraxay arrintan markii la weydiiyey sababta ay reer guuraagu Shareecadda si buuxda ugu qaadan waayeen:

“Waan ognahey in xeerku leeyahay dhaqamo lid ku ah Shareecadda, balse duruufo xoog badan ayaa nagu xakammeeya in aan isticmaalno caadooyinkaas, kuwaas oo ay ka mid tahay nolosha adag ee reer guuraaga.”

In kasta oo ay saddexda hab-sharciyeedba wada shaqeeyaan, haddana marka Soomaalida laga hadlo, Shareecadda ayaa ugu sarreysa, udub dhexaadna u ah intooda kale. Marka la eego ra’yiga badan ee ka-qayb-galeyaasha daraasaddii wajigii 1aad ee mashruucan iyo waliba daraasaddan, waxa la isku waafaqey in is-waafajinta saddexda hab-sharciyeed, siyaabo badan marka loo eego, la gaari karo. Tilmaan wanaagsan waxa ah bulshada reer magaalka Soomaalida ah oo durba carrabka ku dhuftey qaar ka mid ah sifooyinka xun ee caadooyinka xeerka. Hase yeeshee, marka laga hadlo dhabta, sida ay la tahay dadka daaqsinleyda badankood, carqaladaha is-hor taagi kara is-waafajin waxa loo arkaa in ay yihiin: halka Shareecadda iyo Qaanuunka Wadcigu mabda’ ahaan isku waafaqsan yihiin qaabka abaalmarinta xaaladaha madaniga iyo kuwa ciqaabta badankood, sida iyaga oo wada isticmaala ganaax, xabsi, iyo ciqaab naf-goyn, haddana waxa ay ku kala duwan yihiin, farqi caqiiddo darteed, marka laga hadlayo

xaaladaha ay ka mid yihiin diin-ka-bixidda, sinada, ribada (dulsaar dheef), khamaarka, xatooyada, cabidda khamriga, iwm.

Qofka ayidsan Qaanuunka Wadciga ah (aan diin aamminsaneyn) iyo kan muslimka ah si mideysan wax uma arkaan. Midkood wixii wanaag ama sax ula muuqda, kan kale waxa dhacda in aaney sidaas ula muuqan amaba fisqi la tahay. Tusaale ahaan, Muslimku waxa uu aamminsan yahay toosnaanta iyo habboonaanta ciqaabta Shareecadda ee goynta xubnaha jirka marka ay xatooyo jirto, iyo shaabuug in lala dhaco amaba nafta laga gooyo qofka dambi gogol-dhaaf xaaraan ah sameeyey, halka qofka Qaanuunka Wadciga ah taageersan ay intaasiba ugu muuqdaan waxyaabo aan habbooneyn, lidna ku ah sida ay qeexeyso aragtidiisa xaquuqaha aasaasiga ee aadaminimo ee shakhsiga.

Sharci kasta (Shareecadda iyo Qaanuunka Wadciga ah) waxa uu ku taagan yahay sal adag, in kasta oo sharciga Qaanuunka Wadciga ah ee Soomaliya aanu ahayn kii reer galbeedka oo asal ah. Intii uu sharci Soomaaliyeed ahaana, waxa in badan la waafajiyey Shareecadda iyo caqiiddada diinta Islaamka, in kasta oo ay u muuqato in isaga iyo Shareecaddu midkoodna kan kale mabaadii'diisa aanu qaadan. Sharciga Qaanuunka Wadciga ah caalamka in badan ayaa taageersan, dawladdii Soomaaliyeedna isaga ayaa sharci u ahaa, dabaqadda sare ee dadka waddamada reer galbeedka wax ku barteyna waa ay taabacsan yihiin, halka ay Shareecaddu ka soo jeeddo diinta Islaamka, shacabkuna aamminsan yahay, isla mar ahaantaanna kooxaha diintu taabacsan yihiin. In kasta oo ay shacabku rummeysan yihiin niyad wanaagsanna u hayaan diinta Islaamka iyo Shareecadda, haddana Soomaalidu waxa ay u muuqataa in aaney raalli ka ahayn dhaqan gelinta jeedalka, goynta xubnaha jirka ama dhagax ku dilka, kuwaas oo dhammaantood ku qallafsan dhaqanka qabiilka. Marka la eego dhaqanka Soomaalida, qof in shaabuug lala dhaco waa wax la qoonsado, sharaf-dhac ay ku jirto, ceebna ku ah qofka iyo qabiilkiisaba.

In kasta oo ay Soomaalidu si niyad ah u rummeysan tahay Shareecadda iyo mabaadii'da diinta Islaamka iyo caqiidadeeda, haddana Shareecadda sida ay tahay uguma dhaqmaan. Kala duwanaanta asaasiga ah ee sharciyadan wada jira, Shareecadda iyo xeerka, ayaa ka dhigaya is-waafajintooda mid adag. Iyada oo ay is-burintaasi jirto, haddana Shareecadda iyo xeerku sidaa uma kala foga. Xeerku kama horyimaado Shareecadda, mideynta xeerka iyo shareecadduna waxa ay maangal u tahay sababahan dartood: b) xeerku illaa iyo hadda waxa uu ku jiraa marxalad billow ah, mana gaarin in uu yeesho mabaadii'da ama dareenka mas'uuliyadda guud, hay'ado guud iyo dawladnimo. Lewis I.M. ayaa qoray:

"...shakhsiga Soomaliga ahi daacad ayaa uu u yahay tolkiis oo uu xubin ka yahay, isla markaana xaquuqo iyo waajibaad isku leeyihiin, Soomaaliga xoolo raacatada ah, dabcan, ma laha dareen mas'uuliyad guud ah".

Xeerku wakhti hore ayaa uu isu dhiibey diinta Islaamka, wax farqi ah oo fikri ahna uma dhexeeyo labadooda. Xeerku si aan rasmi ahayn oo tartiib ah waxa uu ugu milmayaa Shareecadda t) farqigu waxa uu ka jiraa qaar ka mid ah qodobada xeerka oo ka soo hor jeeda shareecadda. Ku dhaqanka caadooyinkan waxa u sabab ah yaraanta kheyraadka. Caadooyinkan waxa looga soo hadley cutubka labaad ee daraasaddan. Sida ay ka-qayb-galeyaashu sheegeenna daaqsatu diyaar aey u tahay in ay joojiyaan haddii ay meesha ka baxaan duruufaha khasbayaa. Guud ahaanba, daaqsatadu waxa ay aamminsan yihiin in Shareecaddu waxa ay goyso uu muqaddas yahay, sidaa darteedna ay tahay in aan laga daba hadlin.

In kasta oo Soomaalidu aqoonsan tahay Shareecaddu in ay tahay sharciga asaasiga ah ee ay tahay in si buuxda loo adeeco, haddana caadooyinka dhaqanka ee weli jira iyo xeer Soomaaliguba waa iska dhega tiraan fulinta buuxda ee Shareecadda.

Dhammaan qaybaha kale ee xeerka ee daraasaddan (daaqsinka, badda, iyo xijiga) waxa ay qeexayaan ku dhaqanka caadooyin saldhig u ah dhinacyada kala duwan iyo wada shaqeynta wax soo saarka dhaqamiga ah ee kakan ee dadku ku nool yihiin. Caadooyinkani waxa ay xoogga saaraan baahida loo qabo sidii loo heli lahaa loona wadaagi lahaa kheyraadka kooban, marka laga reebo kheyraadka badda oo isagu in yar laga intifaacsado. Wax yar oo ay ku kala duwan yihiin mooyaane, xeerarkani waxa ay leeyihiin dabeecado isku mid ah oo ka turjumaya tacabka ay beelaha Soomaaliyeed ku soo saaraan habab dambeeya iyo heer horumar dambeeya ee bulshadan billowga ah. Waxase jirta in xeerarkan aan soo sheegnay ay inta badan dhowraan xaquuqda aasaasiga ah ee aadamiga marka laga reebo dhowr qodob oo dumarka u diida dhaxalka, meelaha qaarkood, lahaanshaha xijiga iyo xeerka khasbaya in xijiyeysatadu ka iibiso wax soo saarkooda ganacsatada deymisey raashinka.

Xeerarka loo arko in loo baahan yahay in la beddelo waxa ka mid ah: xeer wadaagidda qaadashada iyo bixinta diyada, xukunka xeerka ciqaabta kufsiga, shuruudaha guurka khasabka ah, jir-dilka dumarka iyo xaqiraadda xuquuqda dumarka beelaha qaarkood. Xeerarkani asal ahaanba waxa ay ka soo hor jeedaan mabaadii’da Shareecadda. Maaddama isbeddel aan xoog lagu sameyn karin, duruufaha hor taagan beddelka caadooyinkan waa in meesha laga saaraa. Si mideyn u suurto gasho, dhowr waxyaalood waa in la helaa, sida: is-beddel dhaqaale ku dhaca nidaam-nololeedka daaqsatada, in baahin lagu sameeyo awoodaha siyaasadeed iyo kuwa maamul ee dawladda, in dawladdu yeelato awood weyn oo ay ku meel-mariso sharciyada, waxbarasho ballaaran oo dadku u dhan yahay, iyo in hoos loo dhigo awoodda qabiilku ku yeeshey siyaasadda iyo sida ba’an ee loo aaminsan yahay. Sidaa darteed, isku deyga ah in la mideeyo xeerar dhaqameedyada waxa waajib ah, hor iyo horraanba, in xal loo helo xannibyada kor ku xusan si hawshan loogu guuleysto. Hase yeeshee, maaddaama ay dawladihii gumeysiga iyo kuwii ka dambeeyey ee Soomaaliyeedba ku guul darreysteen mideynta nidaamyadan sharci, isku day

kasta oo dawladeed, mid dhexe ama mid gobol, waa in uu u babac dhigaa caqabadaha ka hor imanaya.

TALO-BIXIN WAX-KA-BEDDELKA XEERKA

Ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsiga iyo dadkii la wareystey waxa ay ku adkeysteen in, si loogu guuleysto dib u habeynta socota, hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo culimada diintu ay ka qayb qaataan ololaha looga gudbayo xeerarka aan fiicneyn, maaddaama ay in badan cod ku leeyihiin aragtida dadka. Isla markaas, waxa ay soo jeediyeen in qodobadan soo socda ay waxtar u leeyihiin dib u habeynta:

- In dawladda, garsooreyaasha, Qaaddiyada iyo hay'adaha aan dawliga ahayniba (NGO's) ahmiyad weyn siiyaan horumarinta garsoorka.
- In dadweynaha laga qayb-galiyo fulinta hawshan.
- In kor loo qaado waxbarashada dadka, iyo in dadka la fahamsiiyo Shareecadda si ay u fududaato garashada waxa ay Shareecaddu ka qabto qodobbada xeerka iyo dhaqammada ku taxaluuqa.
- In la qaado olole wacyi gelin ah, kaas oo lagu iftiiminayo caddaalad-darrada ka timaada ku dhaqanka xeerar dhaqameedyada qaarkood iyo waxa ay Shareecaddu ka qabto. Hawshan waxa laga fulin karaa masaajiddada, idaacadaha degaanka iyo wargeysyada, shirar dadku isugu yimaado, urrurada bulshada rayidka ah, bannaan baxyo, tuseyaal qoraal ah, kooxo, iwm.
- Shirweyne ay isugu yimaadaan hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo culimada diintu: ka-qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigu waxa ay si adag u tilmaameen muhiimadda ay hoggaamiyeyaasha dhaqanku u leeyihiin wax ka beddelka xeerka, maaddaama ay yihiin asalka xeerka. Sidaa darteed, waa in la abaabulaa shirweyne aan loo kala harin oo ay isugu yimaadaan garsooreyaasha, hoggaamiyeyaasha siyaasadda, isimada, culimada diinta iyo ururada haweenku. Shirweynahan, haddii lagu guuleysto, waxa ka soo baxaya go'aanno mamnuucaya xukunnada xeerka kuwa loo arko in aan loo baahneyn ama wax-yeello leh, iyada oo maanka lagu hayo in kan/kuwa lagu beddelayo noqdaan mid/kuwo uu daryeel ugu jiro qaybaha dhibban ee bulshada, sida daaqsinleyda oo dan weyn goor walbaba ugu jirto xeerka.
- Dhaqangelin xooggan ee sharciga: wacyi gelin iyo dejin go'aan kasta waxa ay u baahan tahay awood dawladeed oo lagu meel mariyo.
- Abaabul iyo maalgelin: ururrada aan dawliga ahayn ee maxalliga ah, kuwa xirfadleyda ah iyo ururrada caalamiga ahiba waa in ay gacan ka geystaan hawlaha abaabulka ololahan, u doodidda iyo helitaanka maalgelin.